# Wacdinta Erayga Ilaah ku salaysan

## Bilawgii 12-23

## Michael Eaton





Hawlaha buugan waxaa lagala xidhiidhaya
Sovereign World

Hawlaha buugan waxaa lagala xidhiidhaya
Sovereign World
PO Box 777
Tonbridge
Kent, TN11 0ZS
England

Waxaa xaq kasta u leh [C] 1999 Michael Eaton

Xaq kasta waa la dhawray. Ma jirto qayb buugan katirsan ee dib loo daabici karo, ama lagu geedsan karo hab kale ama lagu baafin karo habkaleeto ey ahaataba sida qalabka isgaarsinta, koobi, rekoor ama hab kaleba, iyadoo aan rusqa laga helin

xaqdhawrka daabacadda. Qayba yar yar waa laga istecmaali kara sida xigasho oo laakiin la aqoonsanayo halka qoraalkaas laga soo xigtay.

***Isla qoraaga buugan wuxuu haddana qoray buugag kale sida:***

*Wacdiyaha (Faahfaahinta Baybalka ee Tyndale) – IVP*

*Kunoolanshaha Nolol Alla ka cabsasho leh – Paternoster*

*Ku raynraynta Kiniisadda Ilaah ee adduunka oo dhan ka jirta – Paternoster*

*Kunoolanshaha Nimcada (Rooma 6–7) – Paternoster*

*Baridda ku saabsan Dhiirigelinta – Paternoster*

*Ku dhaqashada Sharciga Ilaah – Paternoster*

*Waxyaalaha horey loo go'aamiyey iyo Israa'iil (Rooma 6-7) - Paternoster*

*Saamu'eelka 1aad (Wacdinta Erayga Ilaah ku salaysan) – Sovereign World*

*Saamu'eelka 2aad (Wacdinta Erayga Ilaah ku salaysan) – Sovereign World*

*Yooxanaha 1aad, 2aad, 3aad (Shiishka ku taagan Baybalka) – Christian Focus*

*Hosheca (Shiiska ku taagan Baybalka) – Christian Focus*

*Tesaloniikaha 1aad iyo 2aad (Wacdinta Erayga Ilaah ku salaysan) – Sovereign World*

*Bilawgii 1–11 (Wacdinta Erayga Ilaah ku salaysan) – Sovereign World*

*Markos (Wacdinta Erayga Ilaah ku salaysan) – Sovereign World*

*Dareemidda Ilaah – Paternoster*

*Yo'eel iyo Camoos (Wacdinta Erayga Ilaah) – Sovereign World*





Calaamadda buugan adduunka looga aqoosan yahay - ISBN: 1-85240-244-X

Hab dhismeydka buugan waxaa laga soo xigtay CRB Associates, Reepham, Norfolk

Turjumaadda buugan waxaa loo fasaxay Codka Wadada Nabada (CWN). Waxaa qaas ahaan buugga turjumay oo iskudabariday Sharmaarke.

## Waxyaalaha buugan ku jira

Horudhaca guud ... 7
Horudhaca Qoraaga ... 9
Gogol dhigga Noolosha Aabraam ... 11
Rumaysashada Ilaah ... 18
Ballamada Ilaah ... 24
Magac weyn ... 32
Anfaca, Macnaha, Saameenta ... 38
Mabda'a Rumaysadka ... 44
Caadada rumaysadka ... 51
Ka hor imaadyada Rumaysadka ... 57
Heerka weynaanta iyo heerka yaraanta ... 63

Saddex ballan ayaa dib loo xoojiyey .................... 70
Afar boqor oo ka hor jeedda shan boqor............... 76
Malkisadaq........................................................... 82
Shakiga iyo xaqiiqda............................................ 88
Iimaanka xaqa lagu noqdo .................................... 94
Fiijinta Haadda.................................................. 101
Axdi iyo Dhaar................................................... 103
Dulqaad la’aanta ................................................ 112
Atkaynta Axdiga Ilaah ....................................... 120
Gudniinka........................................................... 128
Shabadda badbaadada Ibraahim.......................... 135
Taajirnimada Naxariista..................................... 142
Ficil gelinta ballanta........................................... 149
Ibraahim oo Sodom u duceynayo ...................... 155
Ducada Deeqsiga leh.......................................... 162
Ku Badbaadidda Dabka ...................................... 168
Sodom iyo Gomora ............................................ 175
Liidasho aanan la filaneynin .............................. 182
Jidhka iyo Ruuxa................................................ 189
Baaqa dhiirigelinta Ilaah .................................... 195
Tijaabada Addeecista ......................................... 201
Addeecista Ilaah................................................. 207
Dhaarta Ilaah ...................................................... 213
Gelidda nasashada Ilaah..................................... 219
Nasasho mise Hawlgab? .................................... 225
Sharaf Daa’imi ah? ............................................ 231



*Wacdinta Erayga Ilaah ku salaysan: Bilawgii 12-23*

# Horudhaca guud

Waxaa jirta baahi ah in fahfaahinta Baybalka lagu fasiraa habka ugu sahlan ee maanta inta badan lagu dhaqmo si ay kuwa afka Soomaaliga ku hadlo si sahlan ugu fahmaan farriinta Baybalka. Fahfaahinta noocaas ah waxay saldhig u yeleysa wax ka barashada Baybalka si ay kuwa akhristaan uga faa'idaan qoraaladan (haddii ay wacdiyayaal yihiin). Oo weliba waxay ku caawineysa inay markay wax sharaxayaan hab wanaagsan wax u fahansiyaan. Waxay u baahan yihiin inay ka leexdaan erayada culus ama aan la fahmaynin iyo weliba hab dhismeydka jumlada qoraalka. Waa inay ka leexdaan tusalooyinka aan laga garanaynin dhaqanka aad wax baraysid. *Wacdinta Erayga Ilaah ku salaysan* waxyaalahaas ayey xoogga saraysa. Meela badan oo adduunka ka tirsan ayaa laga istecmaali kara qoraaladan.

Fasiraadan waxay ku salaysanyihiin qoraalada Cibraaniga iyo kuwa Griigga. Inta badan Baybalka keliya ee halkan lagaga istecmaalay turjumaanka iyo fasiraadda waa Baybalka afka Soomaaliga.

Qoraalkan ma ahan mid loogutalagalay in doodo looga jawaabo ama waxyaalaha yar yar ee doodda ay ka taagan tahay. Saa ay tahayna qofka qoraalkan istecmaali doono waa inuu xor u ahaado inuu fasiraaddiisa oo aan Baybalka iyo dhaqanka ka baxsanayn uu ku fasiraa wax bariddiisa. Laakiin isla sida ay hooyada guriga u jacayshahay inay cuntada tan ugu macaan reerkeeda u bixiso oo ay laakiin tuseynin weelka ay ku karisay, isla sidaas annaga waxaan u dan leenahay 'cuntada tan ugu wanaagsan' ee qoraalka Eebbe inaan bixino, ee laakiin ma ahan erayo culculus ee khamuuska ku jira iyo waxyaalaha ay doodaha ka taagan yihiin iyo wiixi la midka ah. Marar dhif ah ayaa waxyaalaha noocaas ah looga hadla qoraaladan. Isla sidaana erayada horudhaca inta badan ma ahan inay dooda wada hadal u baahan laga soo saaro laakiin qaar yar oo u wanaagsan uun in lagu fahmo mawduuca guud. Maraha qaarkood waxaa dhici karta in horudhac yar oo





fahfaahin leh lagu daro qoraalka guud laakiin haddii si guud loo eego cutubka ugu horeya ee buugan wuxuu toos u bilabaya mawduuca laga hadlayo. Markii kor laga eego waxaa caddanaysa in waxyaalaha halkan looga hadlayo ay yihiin kuwa cilmi sare looga fikiray laakiin mawduuca si sahlan oo qof kasta uu sahal ku fahmi karo ayaa looga shaqeyey. Saa ay tahayna, sahlanaanta hab dhismeydka qoraalka ma ahan isla sidaa markii loo kaco qoraalka iyo micnihiisa guud. Erayga Ilaah waa in si taxadir leh loo dhiga oo weliba si taxadir leh loon fasira. Laakiin luuqadda waa inaynan ka duwanaanin ujeeddada mawduuca ee uu qof kasta si sahlan ku fahmi karo. Waxyaalahan oo dhan waa lagaga shaqeyey qoraalka buugan.

***Michael A. Eaton***

## Horudhaca Qoraaga

Buuggan yar ee labaad oo ku saabsan Bilawgii, isla sida uu kii hore ahaaba, waa hawl ka soo askumatay waaya aragnimadayda aan ka helay wax ka baridda qaybtani Baybalka. Marka ugu horeysay ee aan ka hadlay sheekada Ibraahim waxaan kaga hadlay Kiniisadda la yidhaahdo  Babtist Church ee ku taala Rouxville xagga iyo magaala madaxda Koofur Africa ee Johannesburg, sanada la soo mooday. Dabadeedna wax baridda buugga Bilawgii oo dhan oo ku saabsan Ibraahim ayaan hawada ka sii dayey idaacadda Trans-World Radio. Wakhti dambena sanadka 1996 waxaan haddana ku wacdiyey sheekada ku saabsan nebi Ibraahim kaa oo aan kulama kala duwan kaga bixiyey xagga magaalada Nayroobi ee waddanka Keniya. Qaybaha buugan waxaad kala kulmeysa qoraalada aan wax barrideyda ku sameeyey wakhtiyada kulamadaasi.

Isla sida aan weligeed samaynayey ayaan aad ugu faraxsannahay reerkeyga iyo weliba saaxibyaalkeyga kuwa oo aad iigu dhiirigeliyey wacdigeyga. Aad baan ugu mahadinaya Chris Mungean sida farfarcoon ee uu hawsha Rabbiga u jeclaa inay socoto, qoyskeyga, Jenny, Tina Gysling, gabadhayda oo aad uga shaqaysay qoraaladayda, Calvin oo mar alla markay kombyutarada dhib keenan iga caawinayey si aanay hawsheyda u baabi’in ama ay u qaribmin iyo weliba sida macaawinada leh ee uu igalatalinayey hab qoraalka





hawsheyda taa oo aan fikiradahiisa baalasha qoraaladeyda ku daray.

***Michael A. Eaton***

***Cutubka 1aad***

# Gogol dhigga Noolosha Aabraam

(Bilawgii 11:27-12:1)

Shanta buug ee Baybalka ugu horeya waa qayb qoraalo oo isku xiran. Qaybtan waxay ka mid tahay saddex qaybood oo ay Buugagta Axdiga hore u qaybsan yihiin. Buugga Bilawgii wuxuu noo shee waxyaalaha ku saabsan sheekada uunka, caasinimada, iyo badbaadada iyo rumaysadka. Saddexda buug ee dhexda ku jira (Baxniintii – Tirintii) waxay noo sheegayaan sheekada ku saabsan dhiig nayl. Buugga Sharciga Kunoqoshadiisa wuxuu ka sheekeynaya reer binu Israa'iil intaanay bilaabin safarka ay dhulkii Kancaan ku geli lahayeen. Wuxuu noo macnaynaya dhacdooyinka u dhaxayay Baxniintii iyo Tirintii.

Kaalmo ayay noo noqonaysaa haddii aan sawir guud heli lahayn. Dhacdooyinka ka dhaceen Shanta buug ee ugu horaya Bayba sidaan ayay iskuugu xigaan:

**Qaybta 1aad. Taarikhda reer binu Israa'iil intaanay badbaadada helin (Bilawgii)**

Uumista wax kasta (1:1-2:3)
Farcankii Jannada iyo adduunka (2:4-4:26)
'Buugga' farcanka Aadan (5:1-6:8)
Farcankii Nuux (6:9-9:29)





Farcankii wiilasha Nuux (10:1-11:9)
Farcankii Sheem (11:10-26)
Guushii Terax (11:27-25:11)
Farcankii Ismaaciil (25:12-18)
Farcankii Isxaaq (25:19-35:29)
Farcankii Edoom (36:1-43)
Farcankii Yacquub (37:1-50:26)

**Qaybta 2aad. Badbaadintii reer binu Israa'iil (Baxniintii – Tirintii)**

Badbaadada lagu helo dhiigga naylka (Baxniintii 1:1-15:21)
Dayactirkii reer binu Israa'iil ku noqdeen dadka Ilaah (Baxniintii 15:22 – 40:38)
Sharciga iyo caleemo saarkii axdigii Siinay (Laawiyiintii)
Safarkii Siinay ilaa Mo'aab (Tirintii)

**Qaybta 3aad. Xusuustii iyo gubaabintii Muuse (Sharciga Kunoqoshadiisa)**

Horu dhaca guud (1:1-5)
Horu dhaca dhacdooyinka ugu horayay (1:6-4:49)
Shuruudaha: Axdiga nolosha (5:1-26:19)
Cunaqabataynta iyo ogolaanshaha sharciga (27:1-30:20)
Gogol dhigga mustaqbalka (31:1-34:20)

Wax kastoo Bilawgii 1:1-11:26 waxay dib ugu noqonayaan maalmihii Aabraam. Shekooyinka Bilawgii 1-11 waxay noqon karaan dhaqan qoys uu Aabraam kala yimid Mesabotamiya halka uu

qoyskiisa ku noolan jiray. Bilawgii 11:27-50:26 waa dhaqamadii qoysaska Aabraam, Isxaaq, Yacquub iyo Yuusuf. Wakhti dambe ayuu Muuse qoraallo fara badan sameeyey. Wuxuu wax ka qoray daba go’ii Amaleek (Baxniintii 17:14) iyo qoraaladii ku saabsanaa Axdigii uu Ilaah reer binu Israa’iil kula yeeshay buur Siinay. Inta badan waxyaalaha aan Laawiyiintii ka akhrinayno waxay sal ku leeyihiin xiligan. Taarikhda safaradii ay reer binu Israa’iil galeen waa la qoray. Haddaba markay reer binu Israa’iil galayeen dhulkii laga balan qaaday – Kancaan, inta badan waxyaalaha aan ugu yeereyno buugagta sharciga waa la dhamaystiray. Waxaa loo yaqaanay ‘buugagta Muuse’.

Fikiraddan ma ahan in loo fahmo inuu Muuse dhamaan qoraaladan ku qoray habka aan maanta ku haysano. Waxaa la haya caddayn in shanta buug Baybalka dib loo habayay wixii u dhaxayay wakhtigii Muuse iyo wakhtigii boqoradii reer binu Israa’ill. Waxaana laysugu daba riday dhimashada Muuse kaddib. Waxaana cad in Bilawgii 36:11 la qoray kaddib markay boqorada Israa’iil xukumeen – waa wakhtigii Sa’uul iyo Daa’uud kaddib. Wakhtigii Suleymaan waxay ahayd mar ay wax qoridda heerkeeda sare joogtay. Waxay u dhawdahay in wakhtigan la gebagebeyey qoraalka buugga Bilawgii ee aan maanta haysano. Sidaa daraaddeed waxay u egtahay in Bilawga aan haysano saldhigiisa la bilaabay 1300 sannadood dhallashada Ciise ka hore sida aan uga arkayno





qoraalada kale ee horayey laakiin qoraalka kama dambaysta ah ee ku qoran afka Cibraaniga waxaan helnay abaaraha sannadka 950 dhallashada Ciise ka hore. Waxaan fahmaynaa inuu buugga Bilawgii u qaybsan yahay tobban meelood (2:4; 5:1; 6:9; 10:1; 11:10, 27; 25:12, 19; 36:1; 37:1). Qaybahan waa ku talagal uu qofka dib u habbeyey qoraalkan ugu tallagalay, waxayna ahayd in buugga uu tobbankan qaybood u kala baxo sida aan kor uga soo aragnayba.

Kow iyo tobbanka cutub ee ugu horaya waxay ka hadlayan uumista, gef galkii, iyo ciqaabtii baniaadmiga ku soo degtay. Ilaah jiinsiyad cuseb ayuu ku keenay daadkii oo marxalada cuseb ayuu adduunka ku bedelay. Gefka iyo dhimashaduba way jireen laakiin Ilaah qurumaha ayuu ku faafiyey adduunkii hore oo dhan wuxuuna u diyaargaroobay hordhicii Aabraam.

Qaybaha kale ee Bilawgii waxay na tusinayaan sida uu iimaanka u shaqayo iyado lagu noolyahay noolosha iimaanka leh sida aan uga arkayno noolosha Aabraam (11:27-25:11), Ismaciil, Isxaaq, Yacquub iyo Isau (25:12 – 36:43), iyo haddana sheekada Yuusuf oo aad xoogga loo saaraya (37:2 – 50:20). Sheekada Yuusuf waxay na tusinaysa sida noolosha rumaysadka leh ay uga muuqato mid kale oo farcanka Aabraam ah, iyo weliba waxay na tusinaysa sida ay reer binu Israa’iil Masar ku tageen

iyo sababta ay ugu baahnayeen in lagu badbaadiyo dhiigga wanka.

Haddaba waxaan diyaar u nahay sheekada Aabraam. Arinta aad xoogga loo saaraya waa tan: **Aabraam wuxuu ahaa mid rumaysadka loo daydo.**

Isagu waa midka looga deyan karo rumaysadka lagu badbaado. Xaq baa nagala dhigaya, Ilaah hortiisa ayaan xaq ku noqonaynaa isla sida Aabraam xaq looga dhigay. Aabraam wuxuu ahaa midka uu Rasuul Bawlos rumaysadka kaga dayday.

Aabraam waa hubaal loogu deyan karo rumaysadka dhabta ah. Waa uun ku adkaysashada rumaysadka Ilaah midda keliya oo aan ku dhaxli karno balamada Eebbe. Rumaysadka ugu horaya ayaan Ilaah hortiisa xaq ku noqon karnaa. Ku adkaysashada iimaankana waxaan ku dhaxlaynaa balamada Ilaah.

Aabraam waxaan kaga deyan karnaa xornimada sharciga laga xoroobo. Isagu wuxuu noolaa ka hore intuusan sharciga Muuse soo degin. Wax kastoo uu sameeyey wuxuu sameeyey sharciga Muuse la’aantiisa.

Aabraam waxaa lagaga deyan karaa maqlidda codka Ilaah. Aabraam ma haysanin sharciga Muuse iyo weliba Baybalka! Sidaa ay tahayna wuu maqlay codka Ilaah. Waaya arag ayuu qaas ah ayuu la lahaa





Ilaah wuuna ogaa inuu Ilaah isaga la hadlayo. Aabraam waa kan lagaga deyan karo xaq ku noqoshada shaqada wanaagsan. Tobneeya sanadood markii xaq laga dhigay kaddib, Aabraam wuxuu nooloshiisa ka gaaray heer sare xaga addeecista Ilaah Ilaahna aad buu ula dhacay nooloshiisa. Kaddib markii addeecistiisa aad loo tijaabiyey, Ilaah wuxuu isaga ku yidhi, ‘waan ogahay inaad xaq tahay’. Yacquub wuxuu tan ugu yeedhaya xaq ku noqoshada shaqooyinka. Tani kuma xirno badbaadadeeni ugu horeysay. Kumana xirno erayada uu Rasuul Bawlos ku dhawaaqay oo kaga hadlayo xaq ku noqoshada shaqada iimaanka. Waxayse ka hadlaysa heer ugu sareeya e Ilaah lagaga farxiya. Haddana waxaa halkan nooga cad inuu Aabraam yahay mid lagaga deyan karo noolosha Ilaah lagaga farxiya.

Aabraam waa nin nooloshiisa lagaga deyan karo waayo wuxuu ku noolaa noolol sare uu wadaad sare ku noolaan lahaa. Mar uu dhib weyn haystay isaga, uuna aad u niyad jabnaa, wuxuu ka barakaystay wadaad sare, Melkezedeeq. Wuxuu noo bandhigaya noolol wadaad sare uu ku noolaan lahaan Melkizedeeq ka sokow.

Aabraam waa nin lagaga deyan karo waxa ay tahay waaya aragga dhaarta Ilaah. ‘Waan ku barakadayn doonaa’ ayuu Ilaah ku yidhi Aabraam. Waxyaalahan oo dhan waxay bilawdeen markuu

Aabraam codka Ilaah maqlay uu bilawbay rumaysashada Ilaah.





***Cutubka 2aad***

# Rumaysashada Ilaah

(Bilawgii 11:27-12:1)

Aabraam waa muuqaalka labaad ee Baybalka ku jira Ciisena waa kan kowaad. Sheekoooyinka Baybalka ee laga helaya Bilawgii 1-11 si dhaqso ah ayay Aabraam u tilmaamayaan. Ilaah dunida si sax ah ayuu ku uumay (1:1-2:3). Nin iyo naag ayaa soo gebagebayay uumista (2:4-25). Duurbaba laakiin kaddib markuu maska iyaga ku dhega hadlay waxay isku deyeen inay sida ilaahas noqdaan (3:1-7). Natiijaduna waxay ahayd ceeb, iinlaaweyaal, daahir ahayn, ka eryintii Ceeden (3:8-24).

Qof ayaa u malayn kara inaynan adduunyada mar dambe Ilaah ku caasin doonin. Gefka uu jiinsiga baniaadmiga galay wuxuu ahaa mid aad u weyn oo aan fikiraddaan lagu soo qaban karin. Gefkana wuxuu noqday mid ka mid ah noolol maalmeedkooda. Isla sida uu beerta Ceeden ugud dhex gefay ayuu ugu gefay xataa markuu beerta banaanka ka joogay. Durbaba awoodda noocyada jinniyada ka mid ah ayaa soo galay jiinsiga baniaadmiga si uu u burburiyo xiriirkii wacanaa ee u dhexeeyey jiinsiga (Bilawgii 6:1-8). Natiijada waxay ahayd mid aad u xun oo keentay in jiinsiga baniaadmiga waxyaala badan laga mamnuuco. Ilaah wuxuu go’aan ku gaaray inuu jiinsiga baniaadmiga ka baabi’iyo ‘adduunka’ si uu nebi Nuux saldhig

uga dhigo jiinsiga cuseb ee uu bilaabi doono. Xataa daadkii kama uusan reebbin dadka muddo dheer inay mar dambe Ilaah u gefaan. Durbaba dadkii waxay bilaabeen inay waxyaalaha ay samaysteen samada ku aadaan (Bilawgii 11:1-9). Iin la'aantii way baaba'day (Bilawgii 1-3). Xataa markii laga raacdeyey Ceeden taasi uma aanay noqon edbin ay kaga toobad keenaan nooloshoodii Eebbe ku caasisay (Bilawgii 4-6). Daadkii baaba'a daran keenay ma jiraan wax isbedel ah uu jiinsiga baniaadmiga ku dhaliyey (Bilawgii 6-11). Waxyaalaha jiinsiga baniaadmiga laga mamnuucayay way sii bateen. Waxay ahayd marka ugu habboonayd uu Ilaah soo bandhigi lahaa tallaabadiisa kama dambaysta ahayd sida balanta ku dhigan Bilawgii 3:15 oo ahayd inuu burburin doono maska iyo wax allaate wuxuu sameeyey oo dhan. Wuxuu balan qaaday inuu adduunka ku barakayn doono qof farcanka Sheem ku xiran (Bilawgii 9:27).

Ilaah wuxuu doortay Ibraam – wuxuu ahaa mid sanamyada caabuda oo ka tirsanaa kuwa bisha caabudaan oo ku noolaa magalooyinka waweyn sida Uur iyo Haraamka. Laakiin isla sida uu Nuux Ilaah naxariista uga helay ayuu Aabraamna Ilaah naxariis uga helay.  Ilaah ayaa u doortay inuu noqdo mid saldhig u yeeli lahaa qorshaha Ilaah ee ku saabsan badbaadada. Ilaah ayaa nooloshiisa la wareegay. Ma jirin qorsha qaas ah  oo lagu diyaariyey noolosha Aabraam. Sheekada waa mid degdeg ah oo naxdin leh; qorshaha oo dhan wuxuu ahaa mid uu Ilaah





wato. Codkii Ilaah ayaa soo gaaray nin sanam caabud ah oo Uur ku nool. Uur waxay ahay magaala uu qabiilka Shaldiin la yidhaahdo ay ku noolayeen. (Dabadeedna Shaldiintii waxay  qabsadeen Babiloon oo Shaldiin macnaheedu waa reer Babiloon sida ay ku ahay Cibraaniga Xabaquuq 1:6.) Kani waa habka dhabta ah uu Baybalka u baro waxyaalaha nimcada Ilaah ku saabsan. Ilaah ayaa doortay Aabraam, isagoo jacaylkiisa u bandhigay si uu u ogolaado badbaadada Ilaah una adeego Ilaah. *'Waayo, kuwuu hore u yiqiin wuxuu haddana hore ugu doortay inay u ekaadaan suuradda Wiilkiisa, inuu isagu curad ku noqdo walaalo badan dhexdood* (Rooma 8:29). Aabraam waxaa la doortay uumista adduunka ka hore (eeg Efesos 1:4-5), waxaa horay loogu tallagalay dhaxal (eeg Efesos 1:11). Intuusan dhalanin ayuu Ilaah qalbigiisa ka shaqayay oo isku soo jeediyey (isla sida Yeremyaah iyo Bawlos; eeg Yeremyaah 1:5; Galatiya 1:15). Terax, Aabraam Aabbihiis, wuxuu lahaa ugu yaraan laba naagood (Bilawgii 20:12). Haaraan iyo Naboor waxay markaasi ahaayeen Aabraam walaalihiis kuwa ugu da'da weynaa. Wakhti ayaa jiray intuunsan Aabraam 75 jir noqon oo Terah uu aaday Uur. Haaraan wuxuu ku guursaday Uur wuxuuna dhallay laba gabdhood, laakiin waxay wada geeriyodeen intuur reerka Uur joogay. Naaxoor wuxuu guursaday mid ka mid ah ilma adeerkiis. Aabraam wuxuu guursaday walaashiisa ay waalid wada wadagaan, Saaray. Intuusan Aabraam toddobaatan ii shan jir gaarin ayuu reerka u guuray

Haaraan. Teraxna wuu dhintay; Aabraam wakhtigan wuxuu ahaa 75 jir (Faalimaha Rasuullada 7:4). Wakhti dheer intaanan lagu amrin inuu aado Uur sida ku dhigan Faalimaha Rasuullada 7:4; Bilawgii 15:6, laakiin waxay ahayd uun markuu Terax dhintay kaddib markuu toos u raacay wax kastoo uu Ilaah u faray isaga. Aabraam waxaa lagu amray inuu noqdo mid guuraa ah. Wuxuuna israaciyey Saaray iyo Luut.

Waxaa loogu yeedhay inuu ku noolaado noolol **rumaysashada** Ilaah ku dhisan. Ilaah ayaa isaga ugu yimid Uur. Haddaba Ilaah wuxuu Aabraam ku yidhi, *'…Anigu waxaan ahay Rabbiga kaaga soo kaxeeyey Uur tii reer Kaldayiin, inaan ku siyo dalkan si aad u dhaxashid'* (Bilawgii 15:7). Laba shey ayaa halkan ku sawiran,

- Ilaah xaggiisa, sheekada waxay ku bilaabatay korshaha dambe uu Ilaah Aabraam u qorsheeyey.
- Aabraam xaggiisa, barakooyinka Aabraam oo dhan waxay ku yimideen rumaysad uu Ilaah rumaystay addeecayna codka Ilaah markuu Ilaah isaga la hadlay.

**1. Rumaysadka wuxuu ku salaysan yahay muujinta doonista Ilaah.** Suurtagal ma ahan in wax la rumaysto haddii aanay haba yaraate e aanay jirin wax muujin ah. Rumaysadka waa iimaan la saaranaya wuxuu Ilaah yidhi. Ma ahan wax





caadiyan ah oo qof waliba uu markuu doono ku dhaqmi karo. Rumaysadka wuxuu dhab ku noqdaa markay jiraan hadala uu Ilaah ku dhawaaqay ama daliil uu Ilaah muujiyey.

Aabraam waa nin lagaga deyan karo rumaysadka Ilaah la rumaysto (Rooma 4:6) oo kuwa Ilaah rumaysta oo dhan waa 'carruurta Aabraam'. Hase ahaatee, rumaysadka Aabraam waa mid ku salaysan wax uu Ilaah ku dhawaaqay. *'Aabraam rajuu wax ku rumaystay iyadoo aan rajo jirin inuu aabbe u noqdo quruumo badan, sida waxyaalihii lagula hadlay leeyihiin, Farcankaagu sidaasuu noqon doonaa'.* (Rooma 4:18). Tani waa arin aad muhim u ah. Wax baridda qaarkood aad bay waddada saxda ah uga leexdaan maxaa yeelay, ma arkaan in **rumaysadka uu markastaba ku salaysan yahay wuxuu Ilaah ku dhawaaqay.** Iimaanku waa rumaysadka Ilaah la rumaysto, erayadiisana aad loo tixgeliyo. Hadduu Ilaah arin wax ka sheegin way adagtahay in rumaysad lagu dhaqmo. Aasaaska rumaysadka waa markay suurtagal noo tahay inaan nidhaahno: "…Anigu Ilaah waan rumaysanahay inay noqon doonto sidii la ii sheegay" (Falimaha Rasuullada 27:25). Haddaan horay looga hadlin suurtagal ma ahan in la rumaysto.

Waa run oo rumaysadka maraha qaarkiis waxay qaadanaysaa in ruuxa Ilaah uu qofka caawiyo sida uu wax ku rumaysan lahaa (waxaan u malaynaya 1 Samu'eel 14:6-14 waa tusaala tan lagaga deyan

karo); oo maraha qaarna rumaysadku waa isku halaynta guud ee dabiicadaha Ilaah (Matayos 8:5-10 and 15:27-28 waa tusaalooyin kale oo aan tan kaga deyan karno), laakin sida caadiga ah rumaysadku waa inuu haba yaraate e uu ku dul dhisnaada 'eray' xagga Ilaah ka yimid.

Haddii aan isku deyno inaan ku dhawaaqno wax aan ku salaysnayn erayga Ilaah, dhib baan isku kicinaynaa. Rumaysad ayuu Yaashuca ku burburiyey Yeriko. Dhiiranaan ayuu saa ku sameeyey maxaa yeelay, waxaa lagu yidhi ku dul wareego magaalada toddoba maalmood isagoo buun yeedhinaya. Haddii aan ku dul wareegan lahayn magaalo toddoba maalmood anagoo buun yeedhinayna waxba ma dhacdeen! Waxaa dhici kartaa inaanan ficilkaas ku helin amarka Ilaah. Rumaysad ayuu Enook kaga gudbay duugtiisa (Cibraaniyada 11:5), laakiin haddii ay noqon lahayd inaad adiga isku deydid inaad samada toos u aaddid adoon dhiman waxaad fahmi lahayd inaadan heli karin wax uu Ilaah ku siinin! Waxaan u baahan nahay inaan Ilaah erayga Ilaah ku dhaqano. Dabadeedna waa rumaysan karnaa eraygaasi waanna dhaxli karnaa.





***Cutubka 3aad***

# Ballamada Ilaah

(Bilawgii 12:2-3)

**2.** Midda kale oo aan halkan ka arkayn waxay tahay **inuu rumaysadka uu yahay wax shaqsi u go'an.** Haddaba ka bax waddankaaga (luuqadda Cibraaniga waxay xoogga saaraysa inay tani ahayd masuuliyad qaas ahaan Aabraam saarnayd). Waxay ahayd Aabraam inuu go'aan iisu gaaro.

*'Ka tag waddankaaga, iyo xigaalkaaga, iyo reeka aabbahaaba…'* (Bilawgii 12:1).

Waxyaala badan ayaa aayadaan ku jira oo noo cadaynaya in hadalka uu Aabraam oo keliya ku socdo sida *'ka tag'; 'waddankaaga'; 'xigaalkaaga'; 'aabbahaaba'*.

Aayadaha kalena waxay leeyihiin sida tan haddii aan ka soo bilawno tan kowaad, *''Ka tag waddankaaga, iyo xigaalkaaga, iyo reeka aabbahaaba, oo dalka aan ku tusi doono u kac. Oo quruun weyn baan kaa digi doonaa, oo waan ku barakadayn doonaa, magacaagana waan weynayn doonaa; oo waxaad noqon doontaa barako; oo waan barakadayn doonaa kuwa kuu duceeya, kan ku habaarana waan habaari doonaa; oo*

*qabiilooyinka dhulka oo dhammu adigay kugu barakoobi doonaan'* (Bilawgii 12:1-3).

Runtii boqolaal ruux ayaa la sasfray Aabraam. Wuxuu lahaa xoolo badan iyo shaqaala xoolaha u raacayay (13:7). Wuu awooday inuu samaysto duulan military ah (14:14). Dadka Aabraam waxay ahayeen sida qabiil yar. Wuxuu lahaa naag, taa oo isaga la safartay; Luutna wuu raacay isaga (13:1). Hase ahaatee, Ilaah shaqsi ahaan ayuu Aabraam ula hadlay. Qof kasta waa inuu iskiisa Ilaah u rumaystaa. Waa run oo rumaysadka wuxuu dhaliyaa jaalnimo iyo wadajir ay kuwa Rabbiga rumaysta oo dhan magaciisa iskuugu imaanayaan. Saa ay tahayna, waxaa jirta heer uu qofka shaqsiga ah xil iska saaraya rumaysadka uu Ilaah rumaysanaya. Qof kasta waa inuu iskiisa u fahmaa wuxuu Ilaah ka doonaya (Rooma 14:5).

**3. Rumaysadka wuxuu inta badan xooga saaraya ballamada Ilaah.** Markuu Ilaah la hadlayay Aabraam waxaa jireen ballama badan uu siiyey Aabraam. Waxaa jiraan siddeed weer oo ay ballama ku jiraan,

a. *'dalka aan ku tusi doono…'*
b. *'Oo quruun weyn baan kaa dhigi doonaa'*
c. *'oo waan ku barakadayn doonaa'*
d. *magacaagana waan weynayn doonaa*
e. *'oo waxaad noqon doontaa barako'*





f. *'waan barakadayn doonaa kuwa kuu duceey'*
g. *kan ku habaarana waan habaari doonaa*
h. *qabiilooyinka dhulka oo dhammu adigay kugu barakoobi doonaan'*

Erayga Ilaah wuxuu leeyahay maragfuryo tiro badan, sharci iyo ballamo. Ilaah wuxuu ku maragfura runta. Wuxuu wax kasta u sheega isla sida ay wax yihiin. Eraygiisa waxaa ku jiraan maragfuryo.

Rabbiga wuxuu bixiyaa amaro. Wuxuu bixiyaa amar wuxuuna noo xilsaara waxyaalaha noo wanaagsan oo xaqa noo ah. Eraygiisa 'sharciyuu' leeyahay'. Ilaah wuxuu na siinaya cadayn ku saabsan waxa uu Ilaah samayn doono, wuxuu noo sheegaya waxa ay yihiin waxyaalaha uu doonaya inuu noo sameeyo. Eraygiisa wuxuu leeyahay 'ballamo'.

Maragfurka dhabta dhacda, eray u baahan in la addeeco, ballamada ku saabsan doonista Rabbiga uu u leeyahay mustaqbalka – waxyaalahan oo dhan waxay noogu imaanayaan erayga Ilaah. Haba ahaatee, rumaysadka wuxuu ku dul dhisan yahay ballamada Ilaah. Waxaa jiraan, *'ballamadiisa qaaliga ah oo aad iyo aad u waaweyn'* (2 Butros 1:4).

**4. Rumaysadku wuxuu u baahan yahay dulqaad.** Ballamadan uu Ilaah Aabraam siiyey oo dhan waxay u baahan yihiin dulqaad. Ilaah markuu ka hadlaya wuxuu Aabraam u samayn doono sida leeyahay, *' ku tusi doono…'; 'Oo quruun weyn baan kaa dhigi doonaa'; waan ku barakadayn doonaa' magacaagana waan weynayn doonaa; 'waxaad noqon doontaa barako';'waan barakadayn doonaa; waan habaari doonaa.* Wakhtiga ficilkaan ma ahan inuu yahay mid dhici doono isla marka laga balan qaadaya; waxay sheegayaan inay waxyaalahan yihiin wax dhici doono ilawse wakhti kuma xirno. Iimaan iyo dulqaad ayuu Aabraam ku dhaxli doona ballamadaan.

**5.** Tan waxaa kale oo ay macnaynaysaa inay **iimaanka iyo rajada ay ahayn laba la kala qaadi karo.** 'Rajo' sida uu Baybalka u macnaynaya waa iimaan aan dib u gurasho lahayn. Cibraaniyada 11:1 waxay leedahay sida tan, *'Rumaysadku waa hubaasha waxyaalaha la rajeeyo'.* Wixii wakhtigan ballamada la siiyey ka dambeeyey Aabraam wuxuu rajaynayay inay wax dhacaan. Ilaah ayaa hadlay; Aabraamna wuu rumaystay Ilaah.

**6. Rumaysadka waa inuu la kulmaa waxyaala badan oo niyad jab keenayaan.** Ilaah wuxuu Aabraam ku yidhi wuxuu heli doonaa dhul wuxuuna lahaan doona farcan. In kastoo ay saa tahayna waxaa noola sheegay in *'Saarayna…ahayd madhalays'* (Bilawgii 11:30); oo *'wakhtigaasna reer Kancaan dalkay joogeen'* (Bilawgii 12:6). Waxaa dhulka haystay dad Ilaah ku caasiyey.





Bal aan dhinac u yara leexanno oo aan toos u eegno ballamada Aabraam la siiyey. Habab kala duwan ayay Masixiinta qalbiyadooda kaga ogoladaan ballamadaan Aabraam la siiyey. Masixiinta oo dhan waa dhashii Aabraam markii loo kaco waana kuwa wax la dhaxli doono isaga sida ay ballan dhigayso. Wax alla wixii Aabraam laga ballan qaaday waa laga ballan qaaday dhashiisa oo dhan. Wax alla wuxuu dhaxlaya oo dhan waan dhaxli doonaa.

Ballamada uu Ilaah Aabraam ka ballan qaaday waxay dhan yihiin toddoba,

- Dhul
- Tarankiisa wuxuu noqon doonaa quruun
- Barako shaqsiyeed
- Wuxuu helaya magac
- Ilaah ayuu u adeegi doonaa
- Muhimad ayuu lahaan doonaa
- Wuxuu faa'idayn doonaa qurumo

Ballamadan oo dhan waxay u baahan yihiin iimaan. Ilaah wuxuu Aabraam ku yidhi, 'tag' oo anna waxaan kuu samayn doonaa…waxan ii waxaas samee. Hadduu Aabraam addeeci waaya wuxuu Ilaah ka doonaya ma dhaxli doono ballamada u dhignaa.

Axdiga cusub wuxuu sheegaya in markuu qofka badbaadada Ciise qaadanaya uu helayana ballamada uu Ilaah Aabraam ka ballan qaaday. Ballamada Aabraam la siiyey uu qofka badbaadada Masiixa helay uu helaya waa Ruuxa Qoduuska ah ee Ilaah isla sida ay Galatiya 3:14 ay sii sheegeyso. In kastoo ay saa tahayna, ballamada Bilawgii 12:2-3 waa kuwa uu qofka Masiixiga ah uu si kastoo uu ugu dhaqmaba uu ku dhaqmi karo.

Haddaba ka feker waxyaalaha kala duwan ee ku jiray ballanta Aabraam la siiyey. Mid ka mid ah waxay ku saabsanayd **dhul.** *'Ka tag waddankaaga, iyo xigaalkaaga, iyo reeka aabbahaaba, oo dalka aan ku tusi doono u kac'.* Aabraam waxaa lagu deeqay dhul uu degi karo; 'dhulka' kan oo loogu yeedhi doono dhulka 'Israa'iil'. In kastoo ay saa tahayna ballanta waa mid dhan oo ay faa'ido badan ku jirto. Runtii Aabraam intuu noolaa ma jirin dhul weyn uu helay sida ballanta looga fahmi karo. Dhulka uu lahaaday wuxuu ahaa oo keliya meesha uu naagtiisa lagu aasay.

Waxaa jirtay hawl ruuxiyan ah uu Ilaah u qabtay inuu dhulka Israa'iil ku noolaa. Intuusan xataa reerkiisa dhul heli ayuu Ilaah u sahmiyey quruun. Waxaa jiray dhul ay ahayd inuu qabsado, wuxuuna ahaa dhul uu Aabraam Ilaah ugu adeegi doono. Fasiraadda dhabta ah oo ku saabsan dhulka uu Aabraam heli lahaa gadaal ayaan kaga hadlaynaa, laakiin hawsha, meesha uu ka shaqayn lahaa oo





loogu yeedhay, waxay ahayd mid horaanba qorshaha Ilaah ku jirtay.

Aabraam wuxuu helay boqortooyo xaga jannada ah. Cibraaniyada 11:6 waxay sheegeysa inuu raadinayay waddan xagga jannada ah.

Aabraam mar buu dhulka dhaxli doonaa. Rooma 4:11 way saxsan tahay markay leedahay Aabraam wuxuu lahaa ballan taa oo ahayd inuu 'dunida dhaxli doono'. Runtii erayada noocan ah ma ahan kuwa ku cuseb buuga Bilawgii, laakiin Bawlos ayaa aad u soo cadaynaya macnaha guud ee ku jirta ballanta 'dhul'.

Waxyaalahan oo dhan waa wax aanan ka maqnayn noolol maalmaydka Masixiinta. Waxaa jirta hab ay Masixiinta 'dhul ku helayaan' xataa intay aduunkan ku noolyihiin. In kastoo uusan dhul la arki karo dhaxli doonin, Ilaah wuxuu xaqiijin doonaa intaan Isaga rumaysannahay oo aan addeeceyno inuu nagu istareexiyo adduunkiisa. Ciise wuxuu sheegay inay barakadaysan yihiin kuwa is hoosaysiya maxaa yeelay, waxay dhaxli doonaan dhulka.

Masixiinta waxaa kale oo ay haystaan wax ay ugu yeedhi karaan 'dhulka ruuxiyanka ah', waana qayb aan Ilaah u joogi doono oo aan ugu adeegi doonno.

Qofka Masiixiga ah wuxuu dhaxli doonaa boqortooyo ruuxiyan ah. Intuu adduunkan ku

noolyahay wuxuu wataa muuqaalka Ilaah. Ruuxa Qoduuska ah ee Ilaah ayaa ka dhex shaqaynaya noolosha qofkan. Wuxuu dhaxlaya farxad iyo nabad, xornimo iyo dhiirigal. Waxaa jira boqortooyo ruuxiyan ah oo noolosha shaqsigan ka dhex shaqaynaya inta uu Ilaah ugu adeegaya adduunkan. Wuxuu dhaxlaya 'dhulka'.

Maalin ayaa imaan doonta uu Masiixiga dhulka dhaxli doono, sida dhabta ah. Dhabtii waxaa jiri doonaan samad cuseb iyo dhul cuseb taa oo ay xaqnimo ka buuxi doonto. Dhaxalka ugu weyn uu qofka Masiixiga heli doona ayaa wuxuu yahay farxadda uu ka heli doono sara kaca lagu sara kici doono jirka nimcaysan, wuxuuna ku dhex socon doona dhulka nimcaysan ee Ilaah. Maalintaas 'dhulka aan ku tusi doono' wuu imaan doonaa annaguna waan dhaxli doonaa dhulkaasi.





***Cutubka 4aad***

# Magac weyn

(Bilawgii 12:2-3)

Ballamada Aabraam la siiyey waa kuwa aad u wanaagsan oo aan waxba la'ayn. Waxay qaadanaysa sheekada adduunka oo dhan si ay ballamadaasi ku noqdaan sida loo sheegay. Aabraam waxaa laga ballan qaaday **inuu tarmi doono oo uu quruun noqon doono.** Masixiinta oo dhan waa quruun heer sare ah; waxay heer sare ka joogaan adduunyada oo dhan, waxay heer sare ka joogaan nooloshooda xagga ruuxiyanka oo weliba waxay heer sare ka joogaan sida ay ku wada heshiiyeen inay noolol alla ka cabsi leh ku nooladaan.

Ballantaan hal hab ka badan ayay ku buuxsantay. Quruuma badan ayuu farcankoodu ku lug yeeshay Aabraam. Israa'iliinta, 12nkii qabiil ee reer Ismaciil (eeg 17:20; 18:18; 21:18; 25:13-16) iyo weliba reer Eldon naftood farcankoodu wuxuu ku lug yeeshay Aabraam. Laakiin si qaas ah ayuu Axdiga hore Israa'iil ugu tilmaamaya inay tahay quruun ka soo farcantay Aabraam. Ilaah wuu tarmiyey Aabraam ilaa uu farcankiisa noqday quruun.

Hase ahaatee, ballantani si kale ayay run ku tahay. Waxaa jirta quruun ruuxiyan ah oo ka dhallantay Aabraam, maxaa yeelay, kuwa Aabraam jacayl oo

dhan waxay xilka iska sareen inay rumaystaan midhta Aabraam, Ciise. Bawlos wuxuu Rooma 4 kaga doodaya inuu Aabraam yahay aabbaha kuwa rumaystay ee aan Yahuudda ahayn iyo kuwa Yahuudda ahba.

Taranka waa qayb ka tirsan ballanta Masixiinta la siiyey kuwa iimaanka ku adkaysan doonaan. Waa qalad in aanan tirada badan la tix gelinin. Tiradu aad bay qayma u leedahay. Maalinta uu Ruuxa Qoduuska Xerta Ciise iyo kuwa la joogay ku soo degay, kumanaan ayaa badbaadada Ciise helay, waxaa jiray qof tiriyey dadka halkaa joogay (Falimaha Rasuullada 2:41)! Maalin waliba tirada way sii kordhaysay (Falimaha Rasuullada 2:47), oo durbaba *'tiradii nimanku waxay noqotay abbaraha shan kun'* (Falimaha Rasuullada 4:4). Tirada badanaysa waa mid aad in loo tixgeliyo ah. Markuu rumaysad dhab ah jiro, markii si dhab ah hogaanka Ruuxa Qoduuska ah loogu socdo, markaasaan arki karnaa dadka dhabta ah ee Aabraam ku lut leh, rumaystayaasha dhabta ah, tiraduna way kordhaysaa. Ballantan isla sida ay u tahay qaybaha kale ee ballamada Aabraam la siiyey, aad ayay u qusaysaa Masixiinta. Qofka Masiixiga ah waxaa loo badbaadiyey inuu dadka kale ku dhaliyo hamiga ah inay sheyga keliya oo loo baahan yahay in laysku luro uu yahay badbaadada Ciise oo la asmaco. Qofka Masiixa rumaystay waa kalluunsade dadka kalluumiya. Waa inuu ku dadaalo inay dadka sidiisa noqdaan, sidaas ayuu qofka Masiixiga ah ku tarmaa.





Quruun ruuxiyan ah oo weligeedba tarmi doonto ayaa la noqonaya markuu farcankeena ku yeesho Ciise Masiix. Ilaah maanta Ilaah wuxuu Aabraam siinaya carruur ruuxiyan ah.

Aabraam waxaa kale oo laga ballan qaaday **barako shaqsiyeed.** *waan ku barakadayn doonaa'* ayuu Ilaah Aabraam ku yidhi. Waxaa jiri doonaa xag ruuxiyan iyo xag dhaqaalo oo ay ballantaan barakada u fasirmi doonto. Dhanac haddii loo eego waxay ahayd inuu Aabraam lahaado cimri dheer, maal, nabad, beer gurasho wanaagsan, carruur tiro badan. Aabraam madaama ay waxyaalahan la dareemi karo ay nooloshiisa ku dheceen, calaamad weyn ayay u ahayd uu ku ogaan karo inuu Ilaah isaga u naxariistay uuna la jiro.

Xag ruuxiyan markii loo kaco waxaa kale oo halkan ku jirtay qorshaha uu Ilaah dunida u qorsheyey, hawl laga dhex qaban lahaa dadka Ilaah, in xiriir toos ah lala lahaado qalbiga Ilaah, faham ruuxiyan ah, iyo nabad iyo farxad ka soo butaacaysa addeecista doonista Ilaah.

Barakada xagga maalka markaan ka eegno waxay ahayd mid horay loo sheegay xataa maalinta Ruuxa Qoduuska uu soo degay ka hore, maxaa yeelay, dadka Ilaah weli waxay joogeen adduunkan, siyaasaa jirtay oo quruun ayaa jirtay. Xataa wakhtigaas ballanta barakada maalka waxay ahayd mid ay waxyaala badan ku jireen oo si kala duwan

loo fasiri lahaa. Buugga Ayuub arin ayuu ka hadlay uu leeyahay sharciga arinta ballantaan loo raacaya ma ahan inuu noqdo mid marxalad kasta lagu fasiro. Axdiga Cuseb fasiraadda way is bedeleysa oo barakadu ma ahan mid aad loo fasiraha inay tahay barakada adduunka sida uu Baybalka sheegaya *'wuxuu Masiixa inagu siiyey barako kasta oo Ruuxa ka timid ee ku jirta meelaha jannada'* (Efesos 1:3). Marka la leeyahay *'baraka kasta oo Ruuxa ka timid'* sida aan uga aragnay Efesos 1:3 waxaa sharaxaad dheeraad ah looga sii bixiyey Efesos 1:4 – 14, oo sheyga xoogga la saaraya ma ahan oo keliya waxyaalaha la taaban karo sida lacagta. (Maclimiinta ku hor marka maalka ka hadla waa inay ilawbin inay istecmaalaan Axdiga Hore iyo sharciga Muuse si wax bariddooda sida saxda ah loo fahmo. Wixii aan ka ahayn aayado yar oo caan ah ma jiraan waxyaala badan oo waraaqaha Axdiga cuseb ku jiraan oo ay maclimiinta wax bariddooda ku xoojin karaan). Barakada waxaa kale oo ku jirta helidda wax kastoo aan noolosha uga baahannahay (eeg Filiboy 4:19 taa oo ka hadlaysay wax lacagta ku saabsan, Filiboy 4:18). In kastoo ay saa tahayna waxyaalaha ay Masixiinta waayan xoogga saarayaan ma ahan inay ahaato uun taajirnimada adduunka.

Aabraam waxaa laga ballan qaaday **magac sare.** Lab iyo dhadigba inta badan way jacayl yihiin inay magac wanaagsan helaan, markay helaanna waxay doonayaan inay magacaas istecmalaan oo uu ka





dhumin. Fikiradda ah inuu qofka magacba lahaanin, ama uu yahay mid ummadda ka soocmay, oo aan dadka kale qayma u lahayn waa mid aad u murug badan oo aan loo dul qaadan karin. Bilawgii 3:20 Aadan xaaskiisa magac buu siiyey, xaaladaasna inay inantaas siisay qaymo. Tani macnaheedu waxay ahayd inuu dareenkiisa siiyey iyada, wuu aqoonsaday inay tahay qof jira, wuxuuna arkay qayma ay ka leedahay boqortooyada Ilaah. Bilawgii 4:17 Enook wiilkii Qaabiil, wuxuu magaala madax ku magacaabay wiilkiisa. Waxay ahayd hab qofkaasi lagu aqoonsaedo muddo dheer oo weliba waxay ahayd in loo ixtiraamo sida mid jira. Alla ku caasintii saddexaad ee jiinsiga dadka (kaddib markay Ilaah ku caasiyeen beerta Ceeden, iyo weliba tii labaad ee wax yar ka horeysay daadkii) kuwa dhibka keena waxay leeyihiin *'Ina keena, aynu magaalo dhisannee, iyo munarad dhaladeedu samada gaadho oo aynu magac yeelannee'* (Bilawgii 11:4).

Waxyaalaha ay dadka (lab iyo dhadigba) ku raadinaya xaqdarada iyo isku kalsoonida, Ilaah wuxuu doonaya inuu iyaga ku siiyo nimco isagoo ku bilaabaya Aabraam! Magac sare!

Isla sidaa ayay ku ahayd Ciise. Markuu adduunkan joogay waxaa loogu yeedhayay 'Ciisihii reer Naazaret'. *'Waxaa loogu yeedhayaa Naasaraani'* (Matayos 2:23). Ciisihii reer Naazaret ayay ugu yedheen markuu iskutallaabta ku qodbanaa

(Yooxanaa 18:5). Laakiin wuxuu aad ugu guulaystay addeecistiisi wuxuuna helay magac. Magacaasi wuxuu ahaa mid magacda oo dhan uga sareeya si magaca Ciise – kan ay dad Isaga yasaayay ugu yedheen – waa loo wada jilba joogsan doonaa carrab kastana wuxuu qiri doonaa Ciise inuu yahay Rabbi! Ilaah ayaa Isaga siiyey magic (Filiboy 2:5-11)!

Isla sidaa ayay u tahay Masixiinta. Eebbe ayaa na doortay oo magacdeena buugga noolosha ka hore aasaaska adduunka. Markaan Ciise rumaysanayno oo aan isaga addeeceyno waxaan ku jirnaa isla marxaladdii uu Aabraam ku jiray; aad bay suurtagal u tahay in ‘magac nala siiyo’. Haddii aan ku guulaysano, Ciise magacdeena ayuu ku maragfuri doonaa Aabbaheena (Ilaaheena) hortiisa (Muujintii 3:5). Isla sida uu Ilaah magaciisa u sharfo, isla sidaas ayuu magacdeenana heer kiisa ka hooseeya ku sharfi doonaa! Heer sharaf iyo aqoonsi leh iyo amar oo dhan waa waxyaalaha ka mid ah dhaxalka Ilaah oo la siiyey Aabraam oo annaguna waa nala siiyey kuweena carruurta Aabraam ah.





***Cutubka 5aad***

# Anfaca, Macnaha, Saameenta

(Bilawgii 12:2-3)

**Xaqiiqda kale uu Ilaah Aabraam siiyey waxaa ka mid ah ballanta ah anfacaadda uu u leeyahay Ilaah.** Ilaah wuxuu yidhi, *‘…Oo waxaad noqon doontaa barako’.* Aabraam wuxuu noqon doonaa waddada ay barakada Ilaah dadka u soo mari doonto. Erayadan dhabtii waa amar: ‘Oo waxaad noqon doontaa barako!’ waa hab ay Cibraaniyiinta ku bixin jireen ballan qaas ah; taa oo ay macnaheedu tahay ‘… runtii waxaad noqon doontaa barako’.

Aabraam waa inuu Ilaah ku rumaysto iimaan. Hadduu si joogta ah u raaco wuxuu Eebbe kula hadlaya isaga, wiilka Isxaaq la yidhaahdo ayaa dhallan doona, Isxaaqna waxaa ka soo farcami doona Yacquub, Yacquubna waxaa ka soo farcami doona Israa’iil oo quruunta Israa’iilna waxaa ka soo farcami doona Ciise, Ciisena waxaa ka soo farcami doonaa nooc kastoo barako ah. Waxaan dadka kale barako ugu noqon karnaa annagoo ku dhaqmayna tusalooyinka ficilada iimaanka leh. Markay noqoto marxaladda Aabraam waxaan arkaynaa isagoo erayada Ilaah dhabta ka raacaya. In kastoo uu qaladaad galayna, wuu ku sii adkaysanayay inuu doonista Rabbiga yeelo, Ilaah buu rumaysanayay xataa markay erayada Ilaah u ekeyn wax midho

dhali doono, wuxuu rumaystay ballanta Ilaah xataa markay marxaladaha ay tusaynin inay wax rajo ah ka muuqato halkaasi, wuu ka hor tegay murugada ka yimaada markii ay waxyaala aad rajaynaysay aanay ku imaanin wakhtiga aad doonaysay gudahiisa, Aabraam wuu diiday in ay wax niyad jab ah ku dhacaan. Aabraam wuxuu dadka barako ugu noqday tusaalaha wanaagsan uu dadka ku hor dhamayay ee ma ahan inuu ahaa mid ka mid ahaa kuwa auliyada uga sareeya. Wuxuu ahaa mid wax kastoo dhacaba ku adkaysta kuna dhaqma wuxuu aaminsanaa!

Barako ayaan dadka u noqon karnaa haddii aan ku dadaalayno hor u socodka boqortooyada Ilaah. Ilaah qorsha buu lahaa markuu badbaadada ku soo dejinayay adduunka. Aabraam qayb buu ka ciyaaray qorshahan – runtii qayb weyn buu ka ciyaaray. Laakiin waxaa jirta qayb aan kulligeenba ka ciyaari karno hor u socodka boqortooyada Ilaah. Ciise ayaa xukunka haysan doonaa ilaa uu cadawga oo dhan cagahiisa hoostooda keeno. Laakiin Ciise wuxuu adduunka ku xukumaya annaga, rumaystayaasha si joogta ah Rabbiga u addeeca.

Waxaan nahay carruurta Aabraam! Barako noqo! Geesiga rumaysadka noqo! Ilaah ha ka niyad jebin si kastoo ay u jiri doonaan daahista jawaabta aad u baahnayd iyo dhibatooyin ku rafaadin doonaan. Waxaa kaloo jiri doonaan waxyaala badan oo ku niyad jebin doonaa, khatarta, murugada iyo





jinniyada! Oo waa inaad ogaatid in ballanta Aabraam la siiyey ay annaguna u qalanno: waxaa isaga lagu yidhi ‘waxaad noqon doontaa barako’.

**Ballanta kale ee Aabraam laga qaaday waa midda aan ugu yeedhi karo ballanta macnaha lahaashada.** Ballanta waxay ahayd inuu Aabraam noqon doono mid qayb  weyn oo macna leh ka ciyaari doono qorshaha Ilaah taa oo ah Ilaah wuu na barakadaynaya ama wuu na habaaraya waxayna ku xiran tahay sida aan u addeceyno doonistiisa. *‘…waan barakadayn doonaa kuwa kuu duceeya, kan ku habaarana waan habaari doonaa’* (12:3).

Aabraam waa laf dhabarka qorshada uu Ilaah badbaadada nagu siiyey. Sidaa daraaddeed qof kastoo inkira wixii noolosha Aabraam ku dhacay ama nooloshiisa nooga yimid wuxuu inkaraya Ilaah. Rumaysadka Aabraam wuxuu horay u wadaya qorshaha Ilaah eek u jira badbaadada.

Ciise wuxuu xertiisii ku yidhi, *‘Kan idin aqbalaa wuu I aqbalaa, kan I aqbalaana, wuxuu aqbalaa kan I soo diray’* (Matayos 10:40). Mid kastoo boqortooyada Ilaah u hor mariya sida uu Aabraam yeelay iyo weliba sida ay Xerta Ciise yeeshay wuxuu wakiil u yahay Ilaah. Qofkaasi Ilaah baa garab geli doonaa. Hadduu qof addoonka Ilaah wax xumaan ah u geysto wuxuu xumaynaya Rabbiga. Isla sidaana mid kastoo addoonka Ilaah magaca Ilaah ku barakeeyo, isna waa barakoobi doona. Kan

nebi soo dhaweeya magaca nebinimo wuxuu helaya abaal gudka nebiga. Mid alla kii Aabraam ku deyda wuxuu helaya abaalgudka Aabraam. Kani waa barakada Aabraam. Haddii aan noqono dad rumaysadka ku dhaqmaya isla sida uu Aabraam u ahaa nin rumaysadka ku dhaqmayay, waxaan heleyna macnaha ugu habboon oo Ilaah laga heli karo. Ilaah garabkeenu ahaanaya. Waxaa hoogay kan ina inkaari doono! Maxay barakaysan yihiin kuwa na barakadayn doono waayo, waxay heli doonaan wax alla waxaan afkeena kaga dhawaaqno, waxa aan Ilaah u samaynayno. 'Ha taabanin kayga aan subkay' ayuu yidhi Ilaah, *'oo nebiyadeydana ha u geysanina wax dhib ah'* (Sabuurrada 106:15). Ilaah si qaas ah ayuu u cadaynaya inuusan ku faraxsanayn sida addoomadiisa loo cadaadinaya, oo weliba wuxuu si qaas ah u cadaynaya sida uu uga farxo markii addoomadiisa la murweynaya. Kuwa addoomada Ilaah barakeeya oo dhan waxaa suurtagal u ah inay iyaguna Ilaah toos barako uga helaan. Markuu Abemeleek u cago jugleyey Aabraam waxaan arkaynaa inuu naftiisaba cago jugleyn helay sida ay ku dhigan tahay Bilawgii cutubka 20aad; markuu Aabraam barakeyeyna (20:16) Abemeleek iyo xaaskiisa iyo addoomadiisaba waxay naftooda barako ka heleen baryadii Aabraam (20:17-18). Barakooyin noocan ah ayaa raaci doonaan noolosha kuwa raaci doona raadka rumaysadka Aabraam.





**Aabraam waxaa kaloo laga balan qaaday inuu quruumaha kale saameen ku lahaan doono.** Ilaah wuxuu Aabraam ku leeyahay, *'… oo qabiilooyinka dhulka oo dhammu adigay kugu barakoobi doonaan'.*

Qorshaha Ilaah ayay weligeedba ahayd inay badbaadada adduunka oo dhan gaarto. Waxaa jira Ilaah keliya oo dadkana waxay ku midobeen gefka ay Ilaah ka galeen. Ilaah wuxuu leeyahay hal qorshe oo keliya oo ku saabsan badbaadada, halkaa qorshe ee badabaadada ku saabsan waxay ahayd inuu ku yimaado Aabraam. Waxayse ahayd mid loogu tallagalay quruumaha oo dhan. Xiligani Aabraam Yahuud ma ahayn; weli lama gudin isaga. Isagu wuxuu ahaa nin caadi ah oo iska sanam caabudi jiray oo Uur ka yimid. Haddiiba Aabraam la badbaaday, qof kastaa la badbaadin kara. Ballantii horay loo qaaday oo ahayd inay imaan doonto midh Aabraam uu dhali doono, barako ayaa u jirtay mid kastoo ballantaasi rumaysan doono. Barako degdeg qah ayaa u jirtay mid kastoo isla rumaysadka uu Aabraam qabay qabi doono.

Shan jeer ayaa Bilagii 1-11 lagaga hadlaya erayga 'inkaar' (Bilawgii 3:14, 17; 4:11; 5:29; 9:25. Shan jeer ayuu erayga 'barako' ka muuqdaa Bilawgii 12:1-3. Sababta uu Ilaah badabaadiyey Aabraam ku imaan doono u soo diraya waa jawaabta lagu xalin lahaa inkaarta faraha badan oo adduunka uga soo degatay saddexdii jeer ee ay dadka Ilaah ku

caasiyeen sida ku dhigan Bilawgii 3:1-7, Bilawgii 6:1-8 iyo Bilawgii 11:1-9.

Laakiin ugu dambaysta barakadaasi waxay ku imaan doontaa Ciise. Qasnooyin ay xigmad iyo fahan ka buuxaan ayaa ku jira Ciise. Waxaa isaga ku jiraan xigmad iyo xaqnimo iyo daahirin iyo badbaado. Idlaantiisa ayaan nimcaba nimca kale ayaan kaga gudbaynaa (eeg Kolosay 2:3; 1 Ko 1:30; Yooxanaa 1:16).

Kuwani waa ballamadii Aabraam laga ballan qaaday. Ilaah ayaa Aabraam ku casuumaya inuu ballamadan rumaysto uuna ku socdo dhulkii laga ballan qaaday. *'Markaasaa Aabraam tegey, sidii Rabbigu ku yidhi'* (Bilawgii 12:4). Wuxuu ku ogolaaday rumaysad. Waa isla ballamadan kuwa aan annaguna xaq u leenahay. Annaguba waxaa jirtaa qayb nagala ballan qaaday oo aan Ilaah uga adeegi doonno. Annaguba waa dareemi doonnaa taranka, barakada shaqsiyeed, magac aan ku heli doonno rumaysadkeena dhiiran, anfacaadda aan Ilaah u lahaan doonno, macnaha aan Ilaah hortiisa ku lahaan doonno, inaan quruuma fara badan aan saameen doonno. Haddaba Ilaah wuxuu leeyahay, 'horay u socda oo waan idiin sameyn doonnaa. Rumaysad iyo dulqaad, ku dhaxla ballamada'.





***Cutubka 6aad***

# Mabda'a Rumaysadka

(Bilawgii 12:4-9)

Dhinac ayaan u leexanay si aan u tixgelino ballamadii Ibraahim laga ballan qaaday, laakiin hadda waa inaan dib u soo noqona oo aan ka fekernaa nooca rumaysadka sida aan uga arkayno sheekada Ibraahim.

Waxyaalahan ayaan aragnay,

1. Rumaysadka wuxuu ku salaysan yahay muujinta doonista Ilaah

2. Rumaysadka waa mid qofka u go'an

3. Rumaysadka wuxuu inta badan xoogga saaraya ballamada Ilaah.

4. Rumaysadka wuxuu u baahan yahay dulqaad

5. Rumaysadka iyo rajada aad buu xiriirkooda iskuugu dhawyahay

6. Rumaysadka wuu ka hor imaan kara ka hor imaadyo badan. Haddaba waxyaa jiraan waxyaala kaloo dheeraad ah.

7. **Rumaysadka wuxuu dhaliyaa addeecnimo.** Bilawgii 12:4aad waxaa ku dhigan inuu Ibraahim addeecay amarka Ilaah. Addeecistan waxay ahayd tallaabada ugu weyneyd uu qaado Aabraam. Runtii ma ahayn arin fudud. Waxay ahayd inuu ka quusto waxyaalaha caadiga ah sida reerkiisa iyo qoyskiisa, shakina kuma jirin inuu la kulmi doono ka hor imaadyo fara badan waayo, ma jirto qolo nin iyaga ka mid ah si sahlan uga sabraysa. Ilaah wuxuu Aabraam ka ballan qaaday inuu dhul siin doono laakiin wakhtigaasi reer Kancaan ayaa weli deganaa dhulka Aabraam laga ballan qaaday. Ilaah wuxuu haddana ka hadlay inuu tarmin doono Aabraam si uu quruumo u noqdo, ilawse wakhtigaasi xaaskiisa Saaray waxay ahayd madhalays. Dad badan ayaa beeneyn lahaayeen ballantan uu Ilaah Aabraam siiyey laakiin Aabraam wuu rumaystay.

Waxa Aabraam addecistan ka keensiyey waa rumaysadkiisa. Rumaysadka wuxuu nagu riixa addeecis. Ma ahan wax nagula qasbaya; rumaysadka inaba nama qasbaya. Laakiin awood heer sare ah ayuu na siinaya. Sida badan ee aah Ilaah u rumaysannahay ayay u sii sahlantahay inaan Ilaah addeecno. Addeecista caadi ayay noo noqonaysa haddii ay naga dhaadhacdo inuu Ilaah in





wuxuu Ilaah ku hadlaya ay run tahay waana wax laysku halayn karo. Rumaysadka waa shey aad u awood badan. Rumaysadka qalbiguu hogaamiya. Rumaysadka waa sabaal ama erayo aad qalbiga u taabanaya oo bedelaya si aan ku qirano in wax alla wuxuu Eebbe sheego ay run yihiin. Waa inaan u jajabno oo aan raacnaa. Waa sida annagoo aanan haysan wax kale oo aan ku dooran karno. Ibraahim markuu maqlay ballamadaan wuu rumaystay. Waxay ahayd mid aanay jirin wax kale uu samayn lahaa oo aan ka ahayn inuu meeshuu Ilaah u diray u safro. Rumaysadku wuxuu dhalaa addeecidnimo. Kitaabka wuxuu noo sheegaya in Ibraahim uu yeelay isla sida uu Eebbe ku amray inuu yeelo sida ku dhigan Bilawgii 12:4.

8. **Rumaysadka waa sheyga ka hor jeeda aragga**. Ilaah wuxuu Ibraahim ku yidhi, *'… dalka aan ku tusi doono u kac.'* Laakiin Ilaah uma xaqiijinin Ibraahim dhulkan u tusi doono, Ibraahimna weligiis ma arkin dhulkan loo diraya. Markuu Bilawgii 12:5 leeyahay *'…kolkaasay u kaceen dadlkii Kancaan…'* qoraaga wuxuu nooga sheekeynaya natiijadii dhacdada. Waxay macnaynaysaa in loo diray meel **uu qoraaga Bilawgii ugu yeedhaya Kancaan**. In kastoo uu Aabraam ku toosay dhinaca uu u safri lahaa, xaqiiq uma lahayn dhulka loo diray meesha uu ku yaalo ilaa aan ka gaarno Bilawgii 13:14-17 tan aan ka arkayno

tilmaanta dhulka uu Ilaah Ibraahim u dirayay. Ilaah tallaabo tallaabo ayuu noo hogaaminaya. Wax aad ishaada ku arkaysid uma baahnid rumaysad aad ku rumaysatid inuu sheygaas yahay waxa uu yahay. Soo noqoshada Ciise Masiix uma baahnaan doonto rumaysad waayo, il kasta way **arki** doontaa Isaga. Marba haddii aad ishaada ku arki kartid dareenkaasi ma ahan rumaysad se waa arag! Rumaysadka waa iimaanka maanta la aaminaya waxa ay cid kasta ugu dambaysta aamini doonto. *'Waayo, waxaynu ku soconnaa rumaysadka ee ma aha aragga'* (2 Korintos 5:7).

9. **Rumaysadka waxaa kaloo ku jirta waxyaalaha aan noolosha caadiga ah kala kulmayno.** Aabraam looguma yeedhin inuu noqdo mid cidla ku nool ama ka baxsan bulshadiisa. Runtii saa mahayn! Waxaa isaga la safreen Xaaskiisa Saaray iyo ilma abtigiis Luut iyo shaqaala fara badan iyo caawiyayaal iyo weliba ida fara badan iyo eri cad (12:5). Rumaysadka ma ahan ka soo hor jeedka ficilada aqoonta. Rag iyo dumarba waa inay noqdaan kuwa ku ficiltama noolol maalmaydka. Rumaysadka ma ahan inuu noqdo uun mid dadka ku tilmaamaya inay yihiin kuwa diinta ku takhsuusay! Ma ahan isa soocidda iyo dhex fadhiga macmudka oo si joogta ah Ilaah loo





baryaya; waa ku noolaanshada noolosha caadiga ah iyo dulqaad fara badan markay marxalada adag qoysaskeena kala kulano intaan qontulyoonkooda u raadinayno. Waa rumaysadka aan Ilaah si dhan isugu dhiibayno si uu u maamulo noolol adduunkeena iyo masuuliyadaheena oo dhan.

10. **Rumaysadka waa inuu tixgelin hela.** Aabraam sanada badan ka hore ayuu Uur ka tegay oo uu uga hor maray dadkiisa dhulka axdiga. Wuxuu haddana u sii safraya Xaraan isagoo raacaya waddooyinkii caanka ahaa oo ku yaalay galbeedka oo ay masaafuriinta kale istecmaali jireen. Ugu dambeysti wuxuu gaaray Shekeem iyo duurkii geedihii alwaaxda ee Moreeb. Wuxuu arkay dhulkii oo ay degan yihiin Kancaaniintii (12:6). Haddana wuxuu helaya dhiirigal hor leh. Ilaah ayaa isaga u muuqday (12:7). Waa xaqiiq u caddaynaysa in wuxuu samaynayay oo dhan ay xaq ahayd.

Ilaah ma doonaya inuu calaamooyin na siiyo ka hore intaanan awooddiisa rumaysanin, laakiin wuxuu doonaya inuu na siiyo xaqiiqda markaan Isaga rumaysano kaddib. Ilaah horay buu Ibraahim ugu muuqday Uur, laakiin in muddo ah ayuusan mar dambe u muuqanin. Wuxuu mar labaad u muuqday markuu Kancaan gaaray. Waxay ahayd

mid lagu xoojinaya rumaysadkiisa. Ilaah wuxuu doonaya inaan Isaga rumaysano haddii aan calaamad isaga ka helnay ama haddii kaleba. In kastoo ay saa tahayna, markaan Isaga rumaysano oo aan rumaysad ku ficilqaadno kaddib ayuu noo soo daynaya hadiyad iyo xoojin caddaynaysa in rumaysadkeena uu yahay mid jira.

Shekeem waxay ahayd magaala waagii hore ay Kancaaniinta ay deganaan jireen. Waxayna ahayd dhex bartanka waddanka maanta loo yaqaano Israa'iil. Waa halkan meesha uu Ilaah Aabraam ugu muuqanaya oo ku siinaya muujin cuseb.

11. **Rumaysadka wuxuu na siinaya fahan dheeraad ah**. Eray cuseb ayaa halkan kaga bilawday magaca Aabraam: waa erayga 'midh'. Ilaah wuxuu yidhi, *'Dalkan farcankaagaan siin doonaa'* (Bilawgii 12:7). Waa ballantii siddeedaad oo cadaynaysa toddobada ballan oo ku jirta Bilawgii 12:1-3. Danta Ilaah waxay ku gudbi doontaa 'midh'. Erayga 'midh' sida aan horayba u sheegnay (Bilawgii 3:15) waa eray si badan loo macnayn karo. Waxaa lagu macnayn kara hal shey, 'midh'. Waxay xataa noqon kartaa eray tilmaamaya urur, 'midh' taa oo macnaynaysa midho badan. Tan waxay noo caddaynaysa in erayga 'midhta Ibraahim' ay tahay mid habab badan loo qaadan karo. Runtii waxaa jiraan afar hab oo loo macnayn karo, dhallaan, ruuxiyan, wada jir ama hal shey.





Xag dhallaan iyo xag shaqsi waxaan ku macnayn karnaa **Isxaaq**.
Haddana xag dhallaan iyo xaq wada jir, midhta waa **Israa'iil** quruunta adduunka ku taala.

Xag ruuxiyan markii loo kaco waxaan midhta ku macnayn karnaa **Ciise.**
Xag ruuxiyan iyo xag wada jir, midhta waxaa lagu macnayn karaa **kuwa Ciise rumaysan oo dhan.**

Wagaas ballanta laga qaadayay Aabraam waxay u badan tahay inuu qalbigiisa kaga fasirayay inuu wiil heli doono iyo quruun isaga ku imaan doonto, laakiin wuxuu Aabraam maskaxda ku hayay wax ka weyn ayuu Ilaah damacsanaa. Saa oo ay tahayna, rumaysadkan aad buu xagga fahanka uga barbaarayay. Aabraam muujinno cuseb ayuu ka helayay Ilaah. Isagu waxay u ahayd in kan wax haysta uu filanaya oo keliya in loo kordhiyo.

***Cutubka 7aad***

# Caadada rumaysadka

(Bilawgii 12:4-9)

12. **Rumaysadka waxaa lagu dhuujiya allacaabud iyo daahirin.** Taarikhda Aabraam waxaan ka arkayna isagoo marar badan mawlac u dhisaya Ilaah. Mawlaca ugu horayay wuxuu ku dhisay Shekeem (12:7), bacdigeedna wuxuu mid kale ku dhisay laba dhexda Beytel iyo Cay (12:8; waxaa kaloo aad eegtaa 13:4). Wuxuu haddana mawlac saddexaad ku dhisay Xebroon (13:18). Aabraam wuxuu ku deyanayay Nuux oo isna Ilaah mawlac u dhisay kaddib markii laga soo saaray doontii uu daadka kaga badabaaday (8:20). Wakhti dambena wuxuu mawlac kale ku dhisay Mooraaya (22:9). Isxaaqna wuxuu mawlac ku dhisay Bersheeba (26:25). Yaacquubna wuxuu mawlac ku dhisi doonaa Shekeem (33:20) mid kalena wuxuu ka dhisi doonaa Beyteel (35:1, 3, 7).

Mawlaca wuxuu ahaa meel neefka carafada lagu gawrici jiray. Aabraam wuxuu meelahan u istecmaali jiray markuu neef gawracaya uu Ilaah ku caabudaya. Wuxuu xoog siinayay wuxuu Qaabiil bilawbay. Qaabiil ayaa aasaasay habkaasi Ilaah lagu caabudaya gawraca neefka. Fikiradda waxay ka soo





askumatay wuxuu Ilaah sameeyey sida ku dhigan Bilawgii 3:24. Ilaah wuxuu naf goyay neef si uu u qariyo cawrada Aadan iyo Xaawa. Dhimashada neefka ayay ku awoodeen inay dedaan ceebtooda. Qaabiil wuxuu fikiraddaan ka soo xigtay Ilaah. Dhimashada neefka waxay calaamad u ahayd in gefka uu yahay wax edbin istaahila. Neefka wuxuu u dhimanaya gefka uu galay qofka neefkaas saddaqa u baxsanaya. Ilaah wuu ogolaa neefka saddaqada loo bixinayay laakiin ka hore intuusan Ciise imaanin. Saddaqada neefka la gawracaya waxay calaamad u tahay waxuu u yimid adduunka Ciise. Mawlacyada waxay ahaayeen meela lagu baxsan jiray saddaqa waaqdhaca rumaysadka leh. Waxaa kaloo ay mawlacyada ahaayeen meela lagu alla baryi jiray. Aabraam wuxuu doonayay inuu lahaado wakhtiya qaas ah uu Ilaah baryo ula hor tegi jiray. Waxaa nagu waajib ah inaan allabarinaa maalin walba, isla sidaana waa muhim in la lahaado wakhtiyo qaas ah ducooyin qaas ah Ilaah loola hortegaya iyo maalmo qaas ah oo la ducaysto.

Mawlacyada waxay ahaayeen meela muujinta Rabbiga lagu helo. Mararka badan Aabraam aad buu waaqdhaca Ilaah u aaminay oo aad buu doonista Ilaah uga doondooni jiray nooloshiisa, Ilaahna wuu la hadli jiray Aabraam. Bacdigeedna mawlicii wuxuu noqon jiray meel lagu helo muujin.

Mawlacyada waxay ahaayeen meel laysku daahiriyo. Gawraca neefka waaqdhaca wuxuu

cadaynayay in loo baahan yahay wax gefka qofka uu galay lagu bedelaya waayo, kan neefka baxsanaya wuxuu damiirkiisa ka ogaa inuu Ilaah u gefay loona cafinaynin ilaa uu waaqdhacaasi ka bixiyo. Waxaa kalo jirtay fikiradda ah inuu qofka saddaqadaas bixinaya uu ahaado mid isba isdhiibay oo Ilaah u balaqan oo nooloshoosa u bixinaya in loo gubo sida neefka loo gubaya si uu udugga noolosha u aado xagga Ilaah.

Dhisidda uu Aabraam mawlacyadaan dhisayay waxay ka ahayd inuu aaminsanaa in dhulkaasi uu maalin maalmaha ka mid ah uu noqon doono dhul qaas ah oo uu lahaan doono Ilaah. Durbaba wuxuu dhulka u bedelay dhul lagu allacaabudo! Waxay macnaynaysay allacaabudkiisa joogtada ah iyo iisu daahirinta Ilaah. Rumaysadka ma ahan wax qallalan, ma ahan fahan maskaxeed ku salaysan. Waa in Ilaah toos xiriir loola yeesha!

13. **Rumaysadka wuxuu aasaasaya siyaaro.** Waxay ahayd inuu Aabraam ku jiro safar joogta ah. Weli wuxuu u baahnaa in loo caddeeyo qaybta dhulka ka tirsan ee ay farcankiisa dhaxli doonaan. Sharaxaadda arinta way imaan doonta (eeg 13:14-17) laakiin xaatan wuxuu weli ku jira baaris. Wuxuu u guuray Bariga Beyteel, oo wuxuu xaro ka dhistay bartamaha Beyteel iyo Cay, oo haddana wuxuu dhisay mawlac labaad (12:8) si uu Ilaah jaalnimo kula yeesho.





Haddana wuu xiray xaradaasi oo wuxuu bilaabay haddana safar hor leh, oo wuxuu sii aaday koofurta hoose. Rumaysadka wuxuu abuura siyaaro. Aabraam looma ogolayn inuu dego oo uu xidid ku yeesho Shekeem ama Beytel ama Cay ama Xebroon inay noqdaan ‘dhulkiisa’.

Qofka Masiixiga ah waa mid siyaaro ku jira, waa qof safraya. Ma ahan inaan dhab ahaan safaro dhedheer oo siyaaro ah aan galno in kastoo ay Masixiinta qaarkood tan dhab u tahay. Laakiin xagga maskaxda waa inaan mar kastaba ka ahaano kuwa siyaaro ku jira, kuwa safar ku jira. Waa inaan cashar cashar wax u barana. Waa inaan hawsha Rabbiga midba mid kale kaga gudubna.

In kastoo uu mawlicii ugu horayay ee Aabraam uu yahay Shekeem, taa oo aah magaala waayihii hore jiri jirtay, mawlaca labaad magaala kuma yaalin ilawse waxuu ku yaalay buur ku taalay bartankooda laba magaala. Waxaa Aabraam hoy u ahaa teendho uu la guuri jiray; waxaa cad in qorshaha uu Ilaah ugu tallagalay ay ahayn inuu gurya dabaqyo leh uu ka dhisto magaalada u dhaweed oo ugu magac weyneyd. Wuxuu ahaa mid safar ku jira oo aan doonaynin inuu maal ku yeesho adduunkan.

Tan waa inay noo ahaato tusaalaha aan ku deyanayno oo aan kaga hor tegeyno noolosha.Waa suurtagal inuu Ilaah na siiyo guryo waweyn oo ma

guurta ah! Laakiin dareenkeena yaanan marnaba ka saarin inaan nahay kuwa siyaara ku jira, xoola dhaqato, kuwa safar ku jiraan. Adduunkan ma ahan hoygeena. Aabraam wuxuu ku noolaa wax xafiif ah oo guurta ah. Ilaah wuu na siin kara inuu na siiyo wax ka qayma badan wuxuu Aabraam haystay! Laakiin xagga xiriirka aan Ilaah la leenahay ama dhab ahaanba – Ilaah wuxuu noogu yeedhaya inaan ogaano inaan adduunka ku nahay kuwa mudda gaaban jooga.

Tani macnaheedu waa inaan mar kastaba diyaar u ahaano inuu Ilaah na noo dhiibo hawl cuseb. Hawsha uu Ilaah noogu yeedhaya waa mid midaysan oo aan lagu wareereynin. In kastoo ay saa tahayna Ilaah wuxuu noogu tallagay inaan aqoonsano doonistiisa, ku barbaarno horayna uga socono heerka aan joognay. Heer kastoo aan noolosha ka joogno heer kale ayuu noo gudbinaya. Iyadoo ay saa tahayna waa inaan digtoonaano si haddii uu Ilaah noo dhiibo hawl aanan weligeen ku fikirin ama aanan filanayn aan u calaancalin laakiin horay uga qaadano. Waxaan nahay dad siyaara ku jira ee ma ahin kuwa weligood halkan deganaan doona!

Waxaa kaloo aan halkan ka baranaynaa inaan diyaar u ahaano inaan noolosha kala kulmi doono waxyaala badan oo na dhibi doonaan. Ma ahan inaan noqono kuwa caadada dhawra oo wixii horay uun ku dhegan oo aan doonaynin inay wax cuseb ku



Wacdinta Erayga Ilaah ku salaysan: Bilawgii 12-23

tallaaba qadaan. Haddii ay hawsha aan Ilaah u hayno iyo habka aan ku shaqayno ay yihiin kuwa 100% ah sida ay wax ahaan jireen tobban sannoo la soo mooday ama xataa shan sannoo la soo mooday, ma isku sheegi karno inaan nahay kuwa la socda Ilaah. Haddii aan ku sii socono inaan sameyno oo keliya waxyaalaha iisu eg iyo sida ay wax ahaan jireen, oo ay hadda iyo weligeedba tahay – waxay tani caddaynaysa inaanan diyaar u ahayn hababka cuseb uu Ilaah doonaya inuu noolosheena kaga shaqayo. Waa inaan (haba yaraatee Ruuxa qoduuska ah ee Ilaah ku soconaa) sida mid safraya oo teendooyinka ku hoyda, ee yaanan noqonin mid isa soocay oo dabaqyada maguurtada ah oo ugu quruxsan ku nool. Waxay tani noo sii macnaynaysaa inaan ogolaano in noolosha ay sheyba shey kaloo cuseb kaga gudbeyso – ilaa aan jannada ka galayno.

***Cutubka 8aad***

# Ka hor imaadyada Rumaysadka

(Bilawgii 12:10-20)

Noolosha rumaysadka waa mid ay ka hor imaad fara badan lagala kulmaya. Ku dhawaan isla markuu dhulka tegayba wuu ka sii safray! Rumaysadkiisa ayaa ka hor imaad la kulmay. Saaray waxay ahayd madhasho (11:20); dhulkii Kancaan ahaana waa la teganaa (12:6). Haddana waxaa yimid ka hor imaad kaloo hor leh. Muddo dheer ma uusan joogin Kancaan markay abaarta qabsanaysay (12:10). Markuu Ilaah nooga yeedhaya qayba ka tirsan noolosha, yaanan la yaabin haddii aan la kulano ka hor imaad doonaya inaan ka noqono waxyaalihii uu Ilaah noo caddayay inay doonistiisa tahay. Aabraam dhinacaan ayaa loogu yeedhay laakiin waxay u egtahay inay Kancaan ahayn meel wanaagsan oo la tegi karo.

1. **Cabsi ayaa gashay Aabraam.** Wuxuu la kulmay cunta la'aan daran (12:10). Maxaan samaynaynaa haddii aan wayno caafimaad iyo waxyaalaha kaloo noolosha ugu muhimsan? Aabraam wuxuu samaynayay doonista Eebbe, wuxuuna samaynayay shaqada Ilaah, laakiin isla markiiba waxuu la kulmay masiibo weyn taa oo ahayd inay cunto la'aan ku dhacday.





Wuu awooday inuu ku adkaysto aaminaadda Ilaah. Amase ahayn wuu ku tallaaba qaadi karay inuu ficiltamo oo uu siduu cunto ku heli lahaa falkeeda galo, laakiin haddusan qumaati uga fiirsanin waxaa dhici kartaa inuu ka leexdo hawsha uu Ilaah ugu yeedhay. Runtii tan waa mid inta badan aan noolosha kala kulano. Wuu ka leexday doonista Ilaah si uu awooddiisa iskuugu badbaadiyo. Ilaah uguma yeedhin inuu Masar aado ilawse waxaa loogu yeedhay inuu Kancaan aado, Aabraam isla markaas unbuu lugta soo dhigay Kancaan. Laakiin cabsi darran ayaa ku jirta.

2. **Aabraam wuxuu ku dhaqmay hab aan ragnimo ahayn**. Wax waaya arag ah uu Kancaan u lahaa ma jirin weli, oo weli wuxuu ku sii socdaa nooloshan noocan ah. Gurmad doon ahaan wuxuu dareensan yahay inuu marxaladda wax ka qabto, waxay u egtahay inuu Masar aadi doono taa oo laga yaaba inay cunto badan jirto. Laakiin fikiraddaan ma ahan mid doonista Rabbiga ku jirta.
3. **Aabraam wuxuu gaaray heer uu been sheego**. Saaray aad bay u qurux badnayd (12:11). Masariinta, siyaasiinta iyo boqorada aad bay u jeclaayeen inay naago badan yeeshaan hal mar – qoys naago keliya ah, Aabraamna cabsi baa gashay oo naftiisu u baqay (12:12). Waa mid la yaab leh maxaa yeelay, dhiirigal weyn ayuu ku aaday

Kancaan oo wuxuu aaminsanaa in laga dhigi doono quruun weyn, laakiin hadda wuxuu u malaynaya inuusan muddo toddobaadyo ka badan noolaan doonin! Si kastoo ay ahaatada tani ma ahan mid la yaab leh, maxaa yeelay, Masixiinta oo dhan way u sahlan tahay inay Ilaah ku aaminaan nooloshooda weligeed ah ee saa uma ahan markay marxalado daran kala kulmaan safarka nooloshooda!

Wuxuu xaaskiisa kula taliyey inay been sheegto oo ay tidhaado iyadu waa walaashiis (12:13). Waxay ahayd run nuskeeda maxaa yeelay, Aabraam iyo Saaray waxay wadaageen aabbo laakiin kala hooyo ayay ayaayeen. Saas oo ay tahayna taasi been bay ahayd. Waa haddana marxalad wuu qofka u malaynaya inuu isku filnaan karo uuna ku fikirayay oo keliya sida uu ninka uga qayma badan yahay dumarka – isla sida uu adduunka ka ahaan jiray waagii hore. *'Waxaad ku tidhaahdaa, Walaashiis baan ahay; si ay iigu roonaadaan adiga aawadaa…'* (12:13) ayuu yidhi Aabraam. Wuxuu dhib gelinayay nabadgelyada Saaray iyo weliba daahirsanaanteeda laakiin waxyaalahan oo dhan uma eko inay wax welwel ah ku hayaan. Mugdi ayaa ka saarnaa waxyaalahan markii loo kaco xagga noloshiisa, waxayna ahayd heerka adduunka uu Aabraam ku noolaa, habka loola dhaqmay (iyo habka Saaray loola dhaqmay!)





ragga addoomada ahaa. Xaata Aabraam oo ah aabbaha rumaystayaasha oo dhan halkan kuma uusan dhaqmin sida laga filanayay.

4. **Aabraam wuxuu ku dambeyey jago been ah.** Runtii quruxda Saaray waa la dareemay (12:14) Aabraamna marxaladduu sii xumeeyey oo waxay noqotay si aanay noqon lahayn hadduusan been sheegi lahayn. Waxaa loo kaxayay guriga Farcuun (12:15), waxayna ku socotay in lagu darro tidhadii dhilooyinka uu haystay Farcuun. Aabraam wuu ku faraxsanaa inay saa noqoto (12:16) oo iskuma welwelinin marxaladda ay ku jirta Saaray.

Laakiin aad bay u xuntahay inuu qof ku jiro jaga uusan u qalmin. Waa arin aad u xun inaad ku jirtid marxalad aadan raali ka ahayn waayo, damiirkaada caadi ma ahan oo waxaad dareemeysa inaadan xaq ku dhaqmin. Aad bay u fool xuntahay inaad joogtid meel aadan ka tirsanayn oo aad ku nooshay hab aad hubtid inaynan kuu wanaasanayn, iyo weliba meel aad ka filanaysid wax aan xaq ahayn.

Aabraam jago xun ayuu iska dhiibay maxaa yeelay, ma uusan doonaynin inuu runta ka sheego xiriirka uu Saaray la lahaa iyo xiriirka uu la lahaa Ilaah.

In kastoo ay saa tahayna **Ilaah waa aamin.** Ilaah tallaabuu qaaday, wuuna gacan siiyey wuxuu sameeyey Aabraam. Ilaah weligiis ma rogrogmado

xaata markay kuwa uu adeegsado ay waddada xaqa ah ka leexdaan. Ilaah wuu ka saaray mugdigii u ku jiray Aabraam. Madaama uu Aabraam iska saari karin jagadii uu is dhigay, Ilaah ayaa u xaliyey, laakiin xalkaasi wuxuu ku yimid Aabraam oo ceebtiisa oo dhan banaanka la soo dhigo oo niyad jaba. Aabraam waa laga tuuray heerka uu joogay!

Masiibooyin fara badan ayaa u yimid Farcuun wuxuuna aad ugu malayay inay masiibadaasi u soo gaadhay Aabraam daraaddiis. Durbaba runta ayaa soo baxday (12:17-19) Aabraamna waa la diray (12:20). Ma jirin wax uu qof iskiisa u sameyey oo marxaladdaan ku saabsaneyd. Maraha qaarkood markaan marxalad aad u xun oo aan iska badbaadin karin ku jirno, Ilaah wuxuu keenaya marxalad naga dhigta kuwa dibadda loo saaro! Eebbe wuxuu nag adoonaya inaan ka toobad keenno gefka aan ka galnay oo dhan laakiin haddii aan toobad keeni wayno, Ilaah wuxuu hagaajinaya marxalad dibadda noo soo tuurta ee laakiin si aad u fool xun. Wuxuu saa u yeelaya dantiisa awgeed, sababtoo ah aad buu u jecelyahay inuu na adeegsado.

Aabraam wuxuu dib ugu noqday agagaarka Beytel (13:1-4). Ilaah aad buu u caawiyey Aabraam. Uma uusan silcin sida uu isagu iisu silcin lahaa. Ilaah ayaa naxariistiisa uga hor yimid dhibkaasi oo dhan oo Aabraam iyo Saaray iyagoo aanay wax dhib ah soo gaarin ayay Masar ka baxeen.





Markuu Ilaah sida la yaabka leh ugu ficiltamay dabadeed Aabraam wuxuu ogaaday muhimadda ku jirta inuu cafis ka helo Ilaah oo uu xiriirkii hore uu Ilaah la lahaa dib u soo celiyo. Sidaa daraaddeed wuxuu dib ugu noqday meesha uu marka ugu horaysay uu Ilaah kula kulmay, wuxuuna dib ugu dhawaaqay magaca Yahweh (13:4). Ilaah ayaa mar dhaw isaga la hali doonaa (13:14).

Kulligeenba waan ognahay sida aan u naxno markaan ku jirno marxalad deganaasho la’aan ah oo aan dhex marno marxalado welwelinaya rumaysadkeena. Markuu rumaysadkeena uu aasaas yahay waa nagala ogolaan kara, laakiin Ilaah wuxuu doonaya inaan dhib kastaba wax kaga barano wuxuu yahay – waa tijaabinta rumaysadkeena. Haddii aan waddada xaqa ah ee Ilaah ka leexano, Ilaah weligiisba wuu nala istaagi doona ee laakiin natiijada waxay noqonaysa mid xanuun badan. Way wanaagsan tahay inaan rumaysadkeena ku adkeysano oo xaata markay dhibaatooyin naga hor yimadaan aan rogrogmasho ka gelin rumaysadkeena.

***Cutubka 9aad***

# Heerka weynaanta iyo heerka yaraanta

(Bilawgii 13:1-13)

Aabraam rumaysad ayuu ku addeecay Erayga Ilaah. Laakiin, sida aan u jeednaba ka hor imaad fara badan ka hor imaanaya kaamilnaanta qorshaha Ilaah. Saaray wax ilma ah maleh, dhulkii ballanta waa la degan yahay, Aabraamna waa da'ciif. Haddaba waxaa soo baxday macaawino, dhib weyn ayaa kala dhex taagan xiriirka Aabraam iyo Luut.

Aabraam wuxuu ka safray Masar oo wuxuu u safray Negef, qayb lama degaan ah oo ku taalay Koofurta Kancaan (13:1). Aabraam waa nin taajir ah, oo isaga iyo Luutba waxay leeyihiin ido iyo eri cad fara badan, shaqaala iyaga u shaqaya (13:2). Aabraam si tartiib ah ayuu xoolahiisa u qumiyey dhinaca woqooyiga, oo ugu dambeysti wuxuu ka dhacay Beytel (13:3-4), taa oo uu ku yaalay mawlicii uu horay u dhisay. Kaddib markuu si aan xaq ahayn ugu ficiltamay Masar, hadda wuxuu doonaya inuu dib u noqdo oo xiriirkiisa iyo kan Ilaah dib u cusbooneyso.

In kastoo uu Ilaah Aabraam ku yidhi ka tag reerkaada (12:1), Luutna aad buu ugu aamin qabay ballanta Aabraam la siiyey oo sidaa daraaddeed wuxuu go'aan ku gaaray inuu Aabraam raaco.





Amarkii Ilaah oo ahayd inuu Aabraam talla goostao reerkiisa la'aanto qumaati looma raacin. Laga yaaba Aabraam inuu la sugayay wakhti ku habboon oo uu reerkiisa ka maarmi karo. Durbaba wuxuu dhib ka dhacay sida ay laba qabiil oo kala duwan ay isku meel ugu noolaan karaan (13:5). Xoola dhaqata kasta waxay isku deyday inay daaq wada wadagaan laakiin dhib ayaa ka dhashay waayo, waa lagu heshii waayay daaqda (13:6). Daaqdii waa lagu tuntay oo way dhamaatay biyihiina waa yaradeen. Waxay tani keentay inay cid kasta iskeeda iisu dibirto (13:7), waxaaba ka sii darneed, Kancaaniintii ayaa eegayay rafaadkooda (13:7 qaybta 1aad)!

Aabraam wuxuu marxaladdaan ku ogolaaday qalbi deeqsi leh; Luut wuxuu u egyahay ay baqiilnimo ka buuxdo. Noolosha rumaysadka lagu noolyahay waxaa ka mid ah jacaylka walaaleheen aan jeclaanayno, oo Aabraam mar labaad ayuu ku dhaqmaya sida qof Ilaah aaminsan oo addeecsan.

Tixgeli **heerka weynaanta Aabraam**.

1. **Waa Aabraam kan keenay tallada in heer saaxibtinimo lagu wada hadlo** (13:8). Aabraam ayaa qaaday tallaabada ugu horeysa. Markay wax na dhex maraan annaga iyo walaalaheena ama kuwa aan aad iskaga dhawnahay xagga xiriirka aan Ilaah la leenahay waxaan is weydinaa: yaa qaadaya tallaabada ugu horeysa ee waxa na

hor yaala lagu xalin lahaa? Habka ugu xun, ama habka ay kuwa aan Ilaah aaminsanayn ku dhaqaaqi karaan ayaa waxaa ah mid ay arinta oo dhan faraha ka baxdo oo ay ka sii xumaataba sida ay horaantii wax ahaayeen. Habka uu Ibraahim wax ku xaliyey ayaa waxay ahayd hab dhiiranaan ay ku jirto waayo, wuxuu ku tallaaba qaaday inuu ku ficiltamo sida ay wax ku samaan lahaayeen.

2. **Aabraam wuxuu sameeyey hab ay saaxibtinimo ku jirto oo ficil wax tar leh ka dhallanaya** (13:8). Walaaltinimada ayaa isaga aad u taabatay. 'Waxaan nahay walaalo!' ayuu yidhi Aabraam. Kancaaniintiina way u dhawayeen Aabraam iyo Luutna waxay wakiila u ahaayeen Ilaah. Walaaltinimada u dhexeysay ayaa aad uga weyneyd wax kastoo uu Aabraam ku fikiray. Rumaysadkeena wuxuu ku salaysan yahay aad u qaymaynta walaalaha kale ee aan isku iimaanka nahay.
3. **Aabraam wuxuu ogaaday inay saaxibtinimo ku kala tagga uu maraha qaarkood yahay hab jacayl lagu muujiyo.** Markay nabad ku wada deganaashaha ay wax tari wayso, maraha qaarkood waa sax in aan la duminin saaxibtinimada iyo jacaylka laakiin in cid kasta la siiyo xornima ay go'aankeeda ku gaarto (eeg Faalimaha Rasuullada 15:39, iyo weliba 1 Korintos 7:12-15).





4. **Aabraam wuxuu ku ficilqaaday deeqsinimo aad u weyn** (13:9). Wuxuu Luut ku yidhi, 'qaado dhulka aad u aragtid inuu ku anfici doono. Aniguna waan ku faraxsanaan doona waxa aad ii soo reebto'. Kani waa ficil ay deeqsinimo iyo naxariis ku jiraan. Waa iimaanka uu leeyahay kan ku caawiyey Aabraam inuu go'aankan gaaro. Ninka rumaysadka leh wuxuu ogyahay inuu Ilaah baahidiisa oo dhan ka dherjin doono; wuu u qalmaa inuu deeqsiile noqdo.

Haddana tixgeli **maskax yaraanta Luut**.

1. **Waxaa Luut hogaaminayay aragga isha ee ma ahan iimaan**. Luut dhinacyaduu eegay (13:10). Ma ahan ballanta Rabbiga tan waxtar u keentay ee waxay ahayd wuxuu ku helay dareenka ishiisa! Qaybta hoose ee Badda Caas oo ku jirta dooxada webiga Yordan aad bay cagaar u ahay; waana dhinaca uu doortay Luut! Agagaarka Badda Caas waxay ahayd meel aad u quruxsan oo beer falid ku fiicnayd.
2. **Wax deeqsinimo ah uu Luut muujiyey ma jirin**. In kastoo uu Aabraam ahaa walaalka Luut ka weynaa, Luut aad uma xushmaynaynin walaalkiis ka weyn. Isagaa iisu doortay wixii wanaagsanaa (13:11). Ma jirin wax haba yaraate ee deeqsinimo ah oo Aabraam loo qabay. Iimaan kan ugu weyn

ayaa deeqsiile lagu noqdaa. Iimaanka yar wuxuu dadka ku hogaaminaya wax isla jecli.

3. **Luut waxaa soo jiitay quruxda magalooyinka halkaa ka dhawaa**. Ma ahan oo keliya inuu u guuray dooxada Yordan; wuxuu u sii leexday dhinaca koofurta xagga magaalooyinka dhinaca koofurta ka jiray. Kani waa marka labaad oo magalooyin looga hadlaya Axdiga Hore (eeg 4:17); waxay ka soo farcameen Haabiil. Ilaa wakhtiganna looma arkaynin inay ahaayeen kuwa ay wax barako ah ku jirta. Hadda Bilawgii 13:12 wuxuu noo sheegaya inay inaba ahayn wax roon. Luut laakiin dantiisa ma ahan waxyaalaha ku saabsan xiriirka Ilaah lala leeyahay iyo khatarta uu kala kulmi doono meelaha uu doortay. Luut wuxuu helay nabadgelyada magaalada isaga u dhaw oo uu isku halayn karo; durbaba waxaan arki doonnaa isagoo ku nool Sodom (19:1). Laakiin nimanka halkaa degan waxay ahayeen kuwa aan xaq ahayn (13:13). Luut inaba kuma uusan fikirin sida uu uga hortegi lahaa khatarta baabi'in karto xiriirka uu Ilaah la leeyahay.

Labaduba (Luut iyo Aabraam) waxay ahaayeen kuwa rumaysan ballamada. 2 Butros wuxuu ka hadlaya *'Luut oo xaq ah'*. Haba ahaatee, Aabraam wuxuu ahaa nin rumaysadkiisa ficilgeliyey marxalado fara badan kaga hor tegay. Luut wuxuu





ahaa nin ficil gelin waayay wuxuu rumaysnaa. Wuu rumaysnaa ballamada Aabraam laga ballan qaaday, iyadoo ay saa tahayna, rumaysadkan ma ahayn wax nooloshiisa iyo dabiicaddiisa wax ka taraysay iyo weliba tan kuwa isga ka dhashay amaba fikiradda uu ka qabo maalka iyo taajirnimada.

Natiijada labada qiso waan aragnay sida ay noolosha Aabraam u qusaysa. Aabraam durbaba Ilaah ayaa barakeeyey. Waxaa dhici kartaa inuu qayb dhulka ka mid ah u daayay walaalkiis Luut, laakiin isla marka ay dhul qaybsashada dhamaatayba Ilaah ayaa la hadlay Aabraam (Bilawgii 13:14-18) oo siiyey xaqiiq cuseb oo ballamada ku saabsan. Ma jirto wax calaamad ah oo noo sheegaya in uu Ilaah ula dhaqmay Luut sida uu ugu dhawaa oo ula dhaqmay Aabraam. Luut wuxuu helay adduunka laakiin wuxuu ku dhawaa inuu nafsaddiisa baabi'iyo; Aabraam waxaa laga yaabaa inuu wax gefay laakiin wuxuu hadiyad ahaan u haystay xiriirka uu Ilaah la leeyahay.

Durbaba Luut wuxuu fahmay in dhulkii agagaarka Badda Caas ku yaalay uusan nabad ahayn sida uu filanayay. Waxay isaga la ahayd meel quruxsan oo cagaaran laakiin durbaba waxaa soo weeraray boqoradii ka yimid bariga. Oo durbaba gobolkaas oo dhan waxaa lagu baabi'in doonaa dab iyo salfar xaga samada ka yimid. Maanta agagaarkii Sodom waxay ku dedan tahay Badda Caas xagga kofurta, oo si aanay weligeed biyo u helin ayay biyo u

leedahay! Aabraam deeqsinimadiisi dhiiranaanta uu ku deeqay waxay u keentay barako; baqiilnimadii Luut wax ay u dheeftay ma leh.





***Cutubka 10aad***

# Saddex ballan ayaa dib loo xoojiyey

(Bilawgii 13:14-18)

Kaddib markuu deeqsinimo kuladhaqmay Luut, Aabraam wuxuu helay hadiyad ah dib u cusboonaysid aqoonta uu aqoonay Ilaah. Horaan ballanta Ilaah waxay Aabraam ugu timid Uur (eeg 12:1-3). Dabadeedna waxaa timid sharaxaad ballamada la sharaxaya markuu Aabraam joogay Sheekem (12:7). Waxaan arkayna inuu Ilaah mar saddexaad qiraya waxyaalaha Uu u samayn doono Aabraam (13:14-17). Dhulkii Kancaan wuxuu ahaa dhul ay ka buuxeen mawlacya lagu caabudayay ilaahyada (sanamyo) kuwa aanan Ilaah aqoonsanayn. Aabraamse wax ka quseeya sanamyadan ma jirto; wuxuu dhisaya mawlacyadiisa kuwa uu u dhisaya inuu ku caabudo Ilaah runta ah oo wax kasta uumay. Dantiisa ma ahayn inuu iimaan kala duwan isku mushquuliyo. Qorshahiisa wuxuu ahaa inuu horay u wado boqortooyada 'Ilaaha Ibraahim', Ilaaha iyo Aabbaha Rabbigeena Ciise Masiix.

Saddex shey ayaa ku xiran ballantan la xoojinaya.

1. **Dhaxliddii dhulka.** Dhulkan horay ayaa loo sheegay (12:1, 7), laakiin hadda si dheeraad ah ayaa loo sii sharaxaya. Aabraam wuxuu joogaa xagga waddanka buuraha oo u

dhaweed Beytel. Isagoo buurtaas fuula ayaa kor laga tusay sawirka dhulka si uu u fiiriyo ilaa iyo halka uu araggiisa ku egyahay. Dhulka oo dhan waxaa iska leh Ibraahim iyo farcankiisa (13:14-15). Madaama uu Luutna eegayay qayb dhulka ka tirsan (13:10), waxaa dhulka ka tirsan qaybta uu Aabraam u ogolaaday Luut inuu lahaado! Ilaah wuu tirtiray masiimadii mar dhaw uun ku dhacday Aabraam. Niyad jabka uu baniaadmig niyad jebiyey waxaa loogu bedelay dhiirigalka Ilaah. Erayga 'weligiin' oo ballanta Aabraam la siiyey la socota (13:15). Israa'iil iyo waxa agagaarkeeda ku yaala oo dhan waxaa la siiyey oo weligood haysan doonaan Aabraam iyo farcankiisa. Ilaah awood buu u leeyahay inuu si joogta ah axdi naga qaado. Markay ragga iyo dumarka na niyad jebinayaan, Ilaah awood buu u leeyahay inuu nooga abaal mariyo waxyaalaha nagula yidhi iyo waxyaalaha ay nagu samaynayaan markay naga hadlayaan. Ilaah wuxuu mar labaad noo qiraya danta uu ka leeyahay noolosheena.

Habka uu Aabraam dhulka ku helay kuu ahaa? Wuxuu ahaa qof mar kastaba marti ah oo siyaara ku jira intuu adduunkan joogay (eeg Cibraaniyada 11:10, 13-16). Siba dhulka wuu helay maxaa yeelay, wuu ku farxay dhulka. Masixiinta waa la siinaya dhulka. Ma ahan inaan ka sheekeynaya





lahaanshaha adduumeed. Ballanta waxaa ku jirta macna ruuxiyan ah. Ma xadayno wax ay dad kale iska leeyihiin! Ma ahan inaan dadka kale ku fara xumeyno sida aan u istecmaalayno adduunka Ilaah. Saa oo ay tahayna barakada Ilaah waan heleynaa. Waan dhaxlayna dhulka – xaata haddadan aan noolnahay! Wax kasta annagaa iska leh. Wax kasta Ilaah baa habayay si uu noo barakeeyo. Dadku way na barakeeyaan haddii ay yihiin Bawlos, Abolloos ama Keeyfas (1 Korintos 3:22). Adduunyada waxaa loo uumay jirta inay na barakeyso. Haddii aan Ilaah ku qanacsannahay oo aan ku stareexeyno Isaga, wax kastoo uu uumayna waa ku stareexeyna! (1 Korintos 3:22). Noolosha way na barakeysaa. Wax kastoo na qabsadaba, wax kasta waxay u bedelmayaan wanaag, haddii aan nahay kuwa qasdiga Ilaah loogu yeedhay.

Dhulka wuxuu ahaa tilmaan lagu garan lahaa wax mustaqbalka imaan lahaa. Markii loo eego xagga lahaanshaha adduunka *'…oo dhaxalna kama uu siin, xataa meel uu cagtiisa dhigo…'* (Faalimaha Rasuullada 7:5).

2. **Tidhada 'midhta'.** Waxaa halkan laga sheegaya Dad iyo dhul. Bilawgii 12:1-3, 7 ayaan ka fahmayna in dad badan ay ka tirsan yihiin kuwa ka faa'idi lahaa ballamada Aabraam la siiyey. Waxaa aad halkan looga muujinaya midhta Aabraam: waxay noqon doonaan kuwa aan la tiro koobi karin, isla

sida aan u tiring karin siigada adduunka (13:16). Midhta Ibraahim waxay noqon doonta mid tiradeeda ay xad dhaaf tahay.

Masixiinta, kuwas oo ah midhta Ibraahim, ayaa ka mid ah dadka ay tiradooda fara badnaan doonto. Weli ma aanan arkin dhamaadka dhacdooyinka! Marka aan ugu dambaysta arkin doono urur fara badan oo ah dad isku iimaan ah oo ah kuwa oo ku barakoobay ballamadii Ilaah isla sida Ibraahim. Amakaag ayaa nagu dhici doonaa markaan aragno tirade faraha badan ee rumaystayaasha ah. Tirade aad bay u badnaan doontaa oo waxay noqon doontaa wax maskaxdeena ka weyn, *'Oo bal eeg, waxyaalahaas ka dib waxaan arkay dad faro badan, oo aan ninna tiring Karin…'* (Muujintii 7:9). Reer adduunnimada waxaa ka qayma badan reer jannaadnimada. Wax reer adduun ah oo samada laga aqoonsan doono ma jiraan. Waa dhici karta inay dadka ku faanan waddaninimadooda, qabiilkooda, magaca reerka, dhaqankooda, inta ay ku noolyihiin adduunkan. Laakiin maalinta xisaabta wax noocan ah oo faa'ido lahaan doono ma jiraan. Waxa keliya oo qiima lahaan doona ayaa waxay tahay inaan ka tirsannahay kuwa la badbaadiyey oo carshiga Ilaah hor fadhiisan doona.

3. **Muuqaalka mustaqbalka**. Waxay ahayd in Aabraam uu bilawbo inuu iimaan ku rayrayo dhaxalka uu heli doono, xaata inta uu nooloshan ku jira! *'Bal ka coo ku dhex soco dhulka dhererkiisa iyo ballaadhkiisa; waayo, adigaan ku siin doonaa'* (13:17). Wuxuu bilawbay inuu rumaysto casumaadda uu Kancaan si dheeraad ah ku fahmi lahaa.





Wakhtigan ka hore degaankiisa wuxuu ahaa woqooyiga, Shekeem, iyo bartanka dhulka oo u dhaweed Beytel. Hadda wuxuu sii aaday koofurta hoose, oo wuxuu Xebroon ka dhistay degaankiisa muddada ah (13:18). Aabraam ma joojinin mawlac dhisiddiisa. Waxaan horay u aragnay mawlacyadii uu horay u dhisay (Bilawgii 12:7, 8; 13:4). Wuxuu hadda mid kale ka dhisaya Xebroon (13:18). Woqooyi, dhexe, koofurta – dhulka oo dhan ayuu ku soo celinayay Ilaah.

Waa inaan fahanno in ballanta ay ahayd mid ay wada dhaxli doonaan Aabraam iyo farcankiisa. Shaqsi ahaan Aabraan iyo weliba midhaha Aabraam. Aayadda 17aad waxaa qoran, *'…adigaan ku siin doonaa'*. Farcanka Ibraahim lagama sheegin halkan. Waa dhaqanka Baybalka inaan ku rayraynno mustaqbalka xaata inta aan weli noolnahay! Tan waa midda aan ugu yeedhi karno mustaqbalka oo nala jooga. Waxay ahayd Aabraam inuu dhulka Israa'iil ku dhex socdo oo uu ku farxo waxyaalaha uu Ilaah fulin doono. Isagu aad bay ballantaan dhab ugu ahayd oo wuxuu dareensanaa inuu helay dhaxalka laga ballanqaaday durbaba. In kastoo uu dhabtii wax kastoo uu Ilaah ka

ballanqaaday helin waxay u dhawdahay inuu helay durbaba. *'…iyagoo aan helin waxyaalihii loo ballan qaaday…'* (Cibraaniyada 11:13) haddii sida saxda ah loo eego, wuu arkaya, wuu soo dhaweynaya, wuuuna bilaabaya inuu ku farxa (Cibraaniyada 11:13). Ibraahim si qaas ah ayuu barako uga heli doonaa Ilaah. Tani waxay ku xiran tahay in la rumaysto mustaqbalka. Waa ku dhaqashada mustaqbalka, hab aad dhab u ah sida annagooba jannada ku jirna intaanan dhabtii gelin jannada.

Ilaah wuxuu rumaysta kasta ku leeyahay, *'Bal kac oo ku dhex soco dhulka dhererkiisa iyo ballaadhkiisa; waayo, adigaan ku siin doonaa'* (13:17).





***Cutubka 11aad***

# Afar boqor oo ka hor jeedda shan boqor

(Bilawgii 14:1-16)

Aabraam wuxuu ku dhaqmay iimaan heer sare ah (12:1-9), laakiin intuu iimaanka ku dhaqmayay ka hor imaadyo fara badan ayuu noolosha kala kulmay oo xaata nooloshiisa ayaa khatar gashay (12:10-20). Aad buuna xiriirkiisa iyo Luut dhibaata ugala kulmay (13:1-13). Laakiin Ilaah aamin buu ahaa oo ballamadiisi ayuu dib u qiray oo u sii sharaxay (13:14-18). Hadda waxaa haddana Aabraam ku soo food haysa marxalad kaloo cuseb oo ah inuu xaliyo.

Waayihii Aabraam, abaaraha 2,000 oo sanno dhallashada Ciise ka hore waxaa dhacday marxalad ah inay afar boqor oo Mesobotaamiya ka yimid (sida ku dhigan 14:1) ay col ku qadaan shan boqor (sida laga sheegaya 14:2) kuwa oo boqortooyo ku lahaa koofurta Badda Caas. Shantan boqortooyod waxaa xukumayay boqorka galbeedka oo la odhan jiray Chedorlaomer, boqorka Elam, muddo dhan 12 sanno. Dabadeedna waxay samaysteen bahaysi (14:3) oo markii la joogo sanadka saddex ii tobnaan waxay col ku qadeen Chedorlaomer (14:4). Natiijaduna waxay ahayd inuu dagaal ka dhex dilaaco afar boqor iyo shan boqor.

Boqorada qalbeedka uu hogaaminayay Chedorlaomer ayaa dagaal ku qaaday Kancaan wuxuuna ku guulaystay inuu xukumo afar qabiil oo deganaa galbeedka Badda Caas (14:6), dagaalkaas wuxuu ku sii balaartay koofurta hoose ee El-Baraan. Waxay haddana u sii leexdeen bartamaha woqooyiga iyo bariga oo waxay haddana ku guulaysteen inay xukumaan laba boqortooyo oo ku yaalay dhinaca koofurta (14:7). Marka iyada ah waxay ku sii dhawayeen koofurta Badda Caas oo shantii boqor ee Kancaanna way baxeen iyaguna si ay u dagaaltamaan; afar boqor oo la dagaaltamaysa shan boqor (14:8-9). Markay dhacdooyinkan dhacayeen Luut wuxuu ku noolaa Sodom, dagaaladuna waxay ka dhacayeen agagaarka degaankiisa.

In kastoo ay saa ahayd, degaanka koofurta Badda Caas ku yaalay waxaa ku wareegsanaa Dooxo Siddiim, oo markuu degaalka weeraray Kancaaniinta, boqoradii Sodom iyo Gomoorah way la carareen askartooda, niman badan ayaa ku dhaceen Dooxadii dagaalada. '*Haddaba Dooxo Siddiim waxaa ka buuxay boholo waaweyn oo dhoobo ah; oo boqorradii Gomora iyo Sodom way carareen, oo halkaasay ku dhaceen, intii kalena waxay u carareen xagga buurta*' (14:10).

Halkan ayey Luut iyo Aabraam sheekada kala qabsanayaan. Hantidii boqorada waa la qabsaday, oo xaata Luut waa gacan galay (14:11).





1. **Adduun jacaylkii Luut wax tar ma leh** (14:12). Waxaan xusuusanaa markii laysku qabsaday dhulka, Luut waxaa loo ogolaaday inuu dhaxal ahaan u qaato Dooxadii Yordan uu. Aabraamna waxaa u soo hartay dhulkii buuraha lahaa ee lama degaanka ahaa. Isaga naftiisa ayaa begga u galay Sodom. Marka hore waxay u ekeyd doorasho wanaagsan qaybta uu Luut xushay, laakiin hadda waxaa cad inay qaybta uu qaatay ay tahay tan ku taala koofurta Badda Caas uu dagaalka qabsaday.

Waxaa jiraan laba siyaabo oo aan ku garan karno in ku noolaanshaha adduunka ay tahay sida hal bacaad lagu lisay hadduuna nala jirin Ilaah. Waxaa jiraan **habka sahlan** iyo **habka adag**
Habka sahlan waa inaan rumaysano Ilaah! Ilaah si joogta ah ayuu nooga waaninaya inaynan wax faa'ido ah ku jirin qasnadaha adduunka. Il biriqsi ayaad wax kasta ku wayni kartaa. Dagaal ayaa burburin kara rajadeena oo dhan. Wax kastana way qiima beeli doonaan; aboor iyo mirir ayaa baabi'in karaan maalkeena oo dhan. Duugada ayaa noo soo dhici karaan oo xadi karaan waxa aan asturanay oo dhan (Matayos 6:19). Waxaa dhici kartaa haddii asturkeena nagala qaadin in annaga nala qaado oo uu maalka aan keedsanay uu adduunka ku haro sida nacaskii taajirka ahaa oo aan ka akhrinayno Luukos 12:13-21 uu fahmay.

Haddii aan rumaysano Ilaah, waan awoodi karnaa inaan dhaqaalayno maalka adduunka, laakiin haddii aan habka sahlan waaya arag ku noqon wayno waxaa jira habka adag. Taasna waa fahmidda ay fahmayno inay nabadi ku jirin maalka iyo taajirnimada adduunka. Hab adag ayaan waaya arag kaga noqonayna. Luut waxay u ahayd inuu habka adag wax ku fahmo.

2. **Dhacdadan waxay ka hor imaad u tahay nabadda Aabraam** (14:13). Wuxuu ku noolaa meel u dhaw Xebroon taa oo ahayd meel ay ka buuxeen *terebinths*[1]. Aabraam wuxuu ku noolan jiray hoy mudda ah oo ku yaalay meel la yidhaahdo Terebinthtii Maamre. Xiriir saaxibtinimo ah ayuu la lahaa saddexdan qabiil (Maamre, Eschol iyo Aner).

Laakiin hadduu Aabraam u malaynayay inuu ku istareeci doono hooska geedahaasi gobolkaas ku yaalay, saa ma aanay noqon! Durbaba waxaa u yimid addoon u keenay farinta ah in Luut xabsi ku jiro.

Qofka Ilaah talla saartay uma jirto nabad joogta ah. Waa run oo way jirta nabadda Ilaah, laakiin

[1] Waa geeda aan aad u dheeranaynin laakiin laamahooda aad bay u kala baxaan wuxuuna leeyahay hoos ku hirasho leh.





nabadda Ilaah ma ahan noolol sahlan. Waxay na baraysa oo keliya inaan Ilaah u noqono oo aan inaan si joogta ah Ilaah xiriir wanaagsan ula lahaano waana inaan marxalad kastoo aan noolosha kala kulana aan Isaga ugu mahad celinaa. Haddii aan hab adduun ku fasirno Ilaah ‘nabad ma keeno ilawse wuxuu keena seef’. Waxaa laga yaaba inuu qalbigeena nabad qabo, oo aan Ilaah nabad la leenahay laakiin ma jirto ballan in aan adduunka ku noolaan doonno noolol sahlan oo farxad leh.

3. **Dhacdadan waxay ka hor imaad u tahay deeqsinimada Aabraam** (14:13). Waa la yaab ee Aabraam muxuu dareemay isla marka uu maqlay farinta ku saabsan Luut? Way sahlan tahay inaan ku fikirno jawaabto ah ‘wuu istaahila!’. In kastoo ay saa tahayna Aabraam wuxuu dareemay inuu ku qasban yahay inuu caawiyo Luut (14:13). Hadduu wax uqdad ah u qabay Luut ma ahan wax qalbigiisa muddo dheer ku jira. Si degdeg ah ayuu ku ficiltamaya, oo wakhti, dadaal iyo xoog iyo wixii maal ah uu lahaa ayuu istecaamalya si uu Luut u badbaadiyo (14:14-16). Wuxuu deeqsinimo ugu deeqaya walaakiis ay isku iimaan yihiin kaa oo si xun ula ficiltamay!

Bawlos wuxuu sheegaya in haddii ay suurtagal tahay aan qof kasta nabad kula noolaano. Maraha qaarkood suurtagal ma ahan. Aabraam uma

arkaynin odayaasha iyo hogaamiyayaalka agagaarkiisa jooga inay yihiin kuwa nabad lagula dhaqmi karo. Laakiin, Bawlos wuxuu leeyahay ma ahan inaan aargudasho sameyno. Marar badan oo si fool xuma ah naloola dhaqmay, ma jiraan wax aan ka qaban karno, laakiin Ilaah ayaa ficiltami doona. Markuu Luut si deeqsi la'aan ah ula dhaqmayay Aabraam, Aabraam ma jirin wax uu sameeyey. Luut si xun ayuu ula dhaqmay Aabraam, laakiin Aabraam wuu u daayay si uu u sameeyo waxa la quman Luut. 'Carada Ilaah fursaddeeda sii', ayuu nagu amraya rasuul Bawlos. Inta badan markii si xun naloola dhaqmo waxaan isku deynaa inaan ku jawaabno awooddeena. Aabraam wax aar gudasho ah uu sameeyey ma jirin. Durbaba Ilaah ayaa ficiltamay oo Luutna wuxuu ogaaday inay wax faa'ido ah ku jirin baqiilnimada.

Aabraam waxba uma arkin ficilka sharka ah uu Luut sameeyey; wuxuu sharka kaga hor yimid wanaag. Waa inaan gaarno heer aan addeeceyno Rooma 12:17-21. Way sahlan tahay inaan jeclaano fikiradda ah inaan sharka ku jawaabno wanaag. Aabraam aad buu uga helay fikiraddaas; waa habka uu arkay inay wanaagsan tahay in lagu noolaado.





***Cutubka 12aad***

# Malkisadaq

(Bilawgii 14:17-24)

Aabraam wuxuu galay khatar iyo rafaad badan si uu u badbaadiyo Luut. Wuxuu dib u noqonaya isagoo daalay oo niyad jabsan, laakiin Ilaah ayaa u haya habka ay niyadda ugu dhismi lahayd.

1. **Aabraam wuxuu la kulmaya wadaad sare oo qaas ah oo Ilaah u adeega** (14:17-18). Malkisadaq wuxuu ahaa boqorka Saaleem, magaalada gadaal dambe loogu yeedhi doono Yerusaalem. Ugu dambeysti fahamka Ilaaha runta ah ayaa ka dhashay Saaleem; waxaa dhici kartaa runta Ilaah ku saabsan waxay xidid ku lahayd taarikhda waagii Nuux. Boqorkan waxaa loo magacaabay inuu isaga ka metelo magaalada Saaleem, Ibraahimna wuxuu boqorkan ku xisaabay inuu yahay macalinkiisa xagga waxyaalaha Ilaah.

'Heerka' wadaadnimadiisa waxay ahayd mid qaas ah. Wadaadnimadiisa ma ahayn mid uu dhaxlay sida ay u ahayd wadaaddada kaloo laga sheegaya Bilawgii, ma jiraan wax taarikh ah oo dhashiisa ka sheekeynaya. Isagu waa mid aan aabba lahayn hooyana lahayn (Cibraaniyada 7:3) sida ku dhigan

buugga Bilawgii (laakiin fikiradda ma ahan inuusan lahayn waalid dhalay!).

Saaleem macnaheedu waa ‘nabad’. Magaciisa rasmiga ah, Malkisadaq, waxuu ka macna yahay ‘boqorka xaqnimada’. Sidaa daraaddeed isagu waa ‘boqorka nabadda’ maxaa yeelay, wuxuu xukumayay magaala magaceedu yahay nabad, wuxuuna ahaa boqorka xaqnimada shaqsi ahaantiisa. Wuxuu isku darsaday xaqnimo iyo nabad noolosha dadkiisa uu kula noolaa iyo shaqsi ahaantiisba.

Waan arkayna sababta uu Axdiga cuseb Ciise ugu yeedhaya wadaadka sare ee ugu weyn markii la raaco heerkii Malkisadaq. Isla sida uu Malkisadaqba ahaa, Ciise waa boqorka nabadda iyo weliba boqorka xaqnimada. Isla sida ay Malkisadaq u ahaydba, Ciise wadaad sarenimada ma ahan wax uu dhaxlay, laakiin waa wadaad sarenimo qaas ah oo uu jirin mid ka horeyey ama ka dambayn doono.

Aabraam aad bay niyadda ugu dhisan tahay la kulanka uu ninkan sharafta leh ee Malkisadaq la kulmaya. Kaddib markuu la kulmay ka hor imaad fara badan isagoo dagaalka ka soo noqonaya, Malkisadaq ayaa soo dhaweeyey isaga. Waa sawir rasmi ah oo noo cadaynaya sida uu Ciise caawimaadeena u noqonaya markaan u baahannahay. Kaddib markaan soo marno wakhti dhib badan oo jarrabaad badan, Ciise naftiisa ayaa





na soo booqanaya. Wuxuu na siinaya dhiirigelin oo wuxuu nagula hadlaya waxyaalaha Ilaah. Ciise waa wadaadkeena sare ee naxariista badan isagoo nooqu imaanaya heer qaas ah; ma jiro mid Isaga la mid ah.

**2. Aabraam waxaa lagu nasiyey kibis iyo khamri canab laga hagaajiyey.** Malkisadaq wuxuu ogyahay in Aabraam uu dagaal ka yimid uu ku badbaadinayay Luut oo waddada xaqa ah ka baxay. Wuxuu ogaa inuu Aabraam daalan yahay oo weliba gaajaysan yahay. Durbaba wuu ka hor yimid oo wuxuu u keenay kibis iyo khamri la barxay (biyaha laga badiyey) si uu xoogiisa dib ugu soo noqdo. Runtii cabbitaankan ma ahayn kan nagala waaninaya ee aan ka akhrisanayno Maahmaahyadii.

Ciise markuu noo imaanaya wuxuu naga hor keenaya kibis. Isagu naftiisa ayaa ah kibista noolosha. Isagaynu ku noolnahay; Isagaa qalbigyadeena dherjiya. Taasina macnaheedu waa ‘Isagaan rumaysannahay’. Qayb kastoo nooloshiisa iyo hawshiisa ka tirsan annagay noo tahay. Waxaan Isaga ug dhegeyna sida qof aad u gaajaysan oo cunto helay.

Ciise wuxuu noo yahay cabbitaan. Aad buu noo xaraad bixiyaa. Wuxuu noogu imaanaya wanaag iyo macaan oo dhan oo ay ka buuxaan ballama. Dib ayaa u xoogaysanaynaa markuu isu keen muujiyo oo hadiyaddiisa ayuu nagu shubaya.

3. **Waxaa Aabraam u ducayay Malkisadaq** (14:19). *'Ilaaha ugu sarreeya, eel eh samada iyo dhulkaba ha barakadeeyo Aabraam'* Ilaah wuxuu Aabraam ka ballan qaaday inuu barakadeyn doono. Haddana waxaan arkayna barakada oo ku imaanaysa nin qaas ah oo wadaad sare ah oo ka yimid magaala qaas ah oo la yidhaahdo 'Nabad'. Isla sida uu Malkisadaq yeeleyba, Ciise mar kastaba wuu noo ducaynaya. Wuxuu nala jacayl yahay ayuu nooga codsanaya Aabbaha. Ma ahan inuu baryootamaya ama uu codsanaya laakiin waxaa jiraan waxyaala uu doonaya inaan lahaano. Si joogta ah ayuu noogu duceynaya; weligiis ma seexdo sida ay nebiyada qabiilka Haaruun ay u seexdeen. Weligiis shaqada ma joojiyo sida ay nebiyadii Laawiyiinta ahaa u joojiyeen. Weligiisna ma dhinto. Weligiis ma qaldamo. Wuxuu ku ducaysta iimaanka runta ah iyo naxariista dhabta ah. Masiixi kasta wuxuu ku noolyahay ducada Ciise.

4. **Melkisadaq wuxuu Aabraam u tilmaamay weynaanta Ilaah markuu istecmaalaha erayada sida 'Ilaaha ugu sareeya'.** Kani waa magaca ay dadka Saaleem degan ugu yeedhaan Ilaah. Kama hadlaan El Shadday ama Yahweeh; magaca ay Ilaah ugu yeedhaan waa '*El Elyon'*. Waa magac guud kaa oo istecmaalaya erayga *'El'* ('Ilaah') laakiin waxay leeyihiin eray kale oo ay Ilaah ku macnaynayaan. Saddex jeer ayaa laga istecmaalay Bilawgii 14:18, 19, 20 mar afraadna waxaa lala istecmaalay Yaaweh, 'Yaaweh Ilaaha ugu sareeya', sida ku





dhigan 14:22. *El Elyon* waxaa lagu macnayn kara 'Ilaaha ugu sareeya'. Malkisadaq iyo dadkiisaba way ogayeen inay jiraan waxyaala kale oo 'ilaahya' iskuugu yeedhaya ama 'wiilasha ilaah'. Kuwani ma ahan 'Ilaah' Kan rasmiga ah ee was kasta uumay se waa malaa'igo iyo ruuxya wasakh ah kuwa oo huwan jir aanan la arkaynin oo maraha qaarkood loogu yeedha 'ilaahya'. 'El Elyon', 'Ilaah ugu sareeya', waxay macnaynaysay in Ilaah Malkisadaq uu yahay Ilaaha keliya oo ka sareeya wax alla wixii kale oo doonayaan in la caabudo. Fikirada 'ka sareenta' waxay soo bandhigaysa awoodda sare ee wax kasta lagu xukumaya. Ilaaha Malkisadaq waa Rabbiga; Isagaa wax kasta ka sareeya.

5. **Melkisadaq wuu aqbalay meel tobnaadkii Aabraam** (14:20b – 23). Markii uu u ogolaaday Luut inuu xusho qaybta la quman iyo inta dhexdooda, Aabraam wuxuu ka welwelayay goortuu wax dhaxli doono. Haddana welwel hor leh ayaa ku dhallan doona maxaa yeelay, wuxuu diidi doonaa inuu wax maal ah ama hadiyad kastoo ay ahaataba taa oo uga imaan doonto boqorada xukumaya dhulka xaqdarada badnaa sida Sodom (14:21-24). In kastoo ay saa tahayna welwel uu ka qabo hormarka noolosha kama aysan hor istaagin inuu zakadiisa bixiyo. Meel tobnaadka waxa uu haystay oo dhan ayaa waxuu siinayay Melkisadaq. Maxaa ku sababay inuu Aabraam saa yeelo? Ma ahayn sharciga Muuse. Wakhtigan sharciga Muuse ma jirin. Waxaa Aabraam hogaaminayay Ruuxa

Ilaah. Markuu Ruuxa Ilaah na hogaaminaya, sharci kasta waan oofinaynaa xataa kan aanan jirin! Masixiinta way bixinayaan zakadooda oo xataa wax zakada ka badan hadduu hogaamiyo Ruuxa Ilaah.

6. **Mahad celintii uu Aabraam Ilaah ugu mahad celinayay way ballaaratay.** Hadda wuxuu istecmaalaya erayada 'Ilaaha ugu sareeya'. Aabraam wuxuu ogyahay inay erayada *El* iyo *Elyon* oo ah Ilaaha ugu sareeya ay isku macna yihiin. Aabraam wuxuu istecmaalaya Yahweeh Melkisadaqna wuxuu istecmaalaya El Elyon laakiin Aabraam wuxuu istecmaalaya erayada isku xiran sida *Yaahweeh, Ilaaha ugu sareeya'* (Bilawgii 14:22). Wuxuu isku keenay laba eray! Waaya aragga uu u lahaa hawsha wadaadnimada uu Melkisadaq ku noolaa ayaa ku sii hogaamisay inuu Ilaah aad u sii fahmo.





***Cutubka 13aad***

# Shakiga iyo xaqiiqda

(Bilawgii 15:1-6)

1. **Rag iyo dumarba dadka Ilaah u adeega waa suurtagal inay shaki la kulmaan.** Aabraam dhiirigal weyn ayuu ka helay Ilaah, saa ay tahayna nooloshiisa shaki baa ku jiray. Durbaba wuu helay jawaabta ducada uu Malkisadaq u duceeyey. Bilawgii 15:1 waxay xiriir la leedahay Cutubka 14aad. Welwel weyn ayaa ka jiray xagga nabad gelyada iyo lahaashada maalka, iyo shaki laga qabay ballamada oo ay oofintooda aad da'iif u tahay. Wuxuu haddana la kulmay dhib yar oo qabiileysi ah taa oo iyaduna khatarteeda lahayd maxaa yeelay, wuxuu ku waynin lahaa maalka uu haystay. Malkisadaq ayaa isaga u duceyey. Dhacdada aan ka arkayna Bilawgii 15:1 waa natiijada baryada uu Malkisadaq baryay Ilaah. Ilaah ayaa Aabraam u muuqday oo mar kale u qiray xaqiiqda ku jirta labada shey ee uu aad uga baahan yahay inuu xaqiiq u helo inuu ballamadaasi loo oofin doono. 'Waxaan ahay gashaankaaga', ayuu Ilaah ku yidhi Aabraam. Aabraam hadda dhaw ayuu dagaal ka kimid. 'Hadiyadaada iyo mushaarkaada waxay ahaan doonaan kuwa sare'. Erayga Mushaar waa mid caan aah oo inta badan aan ka istecmaalno noolosha caadiga ah sida mushaarka la siiyo markuu qofka shaqa qabto. Mar dhaw ayuu

Aabraam ka welwelsanaa maalka uu lahaan doono. Ilaah arintaasna wuu uga jawaabay.

In kastoo ay saa tahayna xataa nimanka ugu iimaanka badnaa ee Ilaah u adeegayay waxay adeegooda runta ah kala kulmayaan shaki in runti waxa ay samaynayaan uu Ilaah kula garab jiro iyo in kale. Isla markii laga shaki bixiyey welwelkiisi in yar dabadeed, Aabraam wuxuu noqday mid hubniin la'aan ah. Waxay u egtahay in inta badan uu Ilaah wakhtig dheer ku qaato ka jawaabidda waxyaalaha qaarkood ee aan u baahan nahay waxayna nagu dhallinaysa niyad jab aad u weyn. Ilaah ballama layaab leh ayuu siiyey Aabraam, hase ahaatee, fullintooda muddo dheer ayay qaadanaysa. Aabraaham waa dhiban yahay (15:2). Aabraam wuxuu yidhi, '*Sayidow, Rabbiyow, maxaad I siin doontaa?'* Muddo dheer ayuu Ilaah Aabraam ka ballan qaaday inuu quruun ka dhigi doono, laakiin xataa cunug curud ah ma helin! *'…reerkaygana waxaa dhaxli doonaa Eliiceser'*. Miyey dhici kartaa tani? Aabraam waa yaaban yahay oo wuxuu is leeyahay, miyey dhici kartaa inuu Ilaah cunug aan korsado I  siiyo? Dhabtii waa maxay waxa aad I siin doontid Rabbiyow? Markay natiijada wuxuu Ilaah naga ballan qaaday naga daahdo inta badan waxaan u jeesanaa waxaala ka qiima yar wuxuu Ilaah noogu tallagalay. Wuxuu diyaar u noqday inuu helo addoon ah wiil la korsaday (15:2-3). Wax kastoo ay ahaataba diyaar buu u yahay Aabraam haddiiba ay tahay habka uu Ilaah isaga ku siinaya farcan.





Laakiin run ahaantii fikiradda uu Aabraam qabo oo ah inuu u malaynaya in Eliiceser uu ahaan doono kan isaga dhaxli doono waa mid ka qiima yar wuxuu Ilaah Aabraam ugu tallagalay.

2. **Ilaah wuu yaqanaa sida uu ku cusboonaysin lahaa ballankiisa.** Marka ugu darnayd uu Aabraam damacsanaa inuu qaato wax ka qiima yar wuxuu Ilaah ugu tallagalay ayuu  Ilaah ayuu Ilaah u soo dejiyey muujin cuseb. Eliicesar ma ahan farcanka laga ballanqaaday. Midhta la ballanqaaday waxay ka soo baxaysa jidhka Aabraam.

Tan waa marka afraad ee ballan la siiya. Midda ugu horaysa waxaa lagu siiyey Uur (12:1-3), dabadeedna shekeem (12:7). Ilaah ayaa mar saddexaad Aabraam ballan siiyey kaddib markay Luut kala tageen (13:14-17). Tani waa dhacdada afraad uu Ilaah qorshahiisa u bandhigaya Aabraam (15:4-5).

Ilaah wuxuu og yahay cabirka waxyaalaha aan u gegsan karno. Aabraam wuxuu joogaa heerka ugu sareysa uu ku niyad jebi lahaa oo in yar ayuu baroorasho la yaab leh la kicin xataa kaddib markuu Ilaah isaga u qirtay siin doono daafacid iyo maalba. Ilaah wuxuu haddana ula yimid waxyaala dheeraad ah oo hubsiinyo siinaya Aabraam inuu heli doono wuxuu ka ballan qaaday.

**3. Ilaah ballanta ma cusboonaysiyo oo keliya laakiin wuxuu ballanta ku sii ballaariya xiiriirka aan Isaga la leenahay.** Ilaah wuxuu bixinaya caddayn dheeraad ah oo ku saabsan sida uu farcanka Aabraam dhaxli doono ku imaan lahaa. Ma ahan xaalad ku imaan doonto addoon uu korsado; wiilka iyo kan Aabraam dhaxli doono wuxuu ahaan doonaa mid uu Aabraam naftiisa aabba u ahaan doono (15:4). Arinta tirade ku saabsan ayaa halkan xoogga laga saaraya. Aabraam bannaanka ayaa loo bixiyey oo waxaa lagu yidhi xiddigaha tiri. Runtii inta xiddig oo cirka ku taala ma uusan tiring Karin. Waxaa loo sheegay in farcankiisa uu sida xiddigahaasi ay u badnaan doonaan (15:5).

Ilaah wuxuu sii raacaya isla habkan uu ku daahinaya ballamadiisa ilaa uu kan laga ballan qaaday uu gaaro heer uusan mar dambe sugi karin, laakiin waa hab wanaagsan. Daahinta uu Ilaah ballamadiisa naga daahinaya way noo wanaagsan tahay maxaa yeelay, wuu nagu sifeynaya waxayna naga dhigaysa kuwa aad iyo aad Isaga u doondoonta uguna dhawaada si joogta ah. Haddii ay ballamada Ilaah si sahlan noogu yimadaan annagoo aan barya badan dabadeed helin, waynu ilawbeyna meesha ay nooga yimideen.

4. **Rumaysadka dhabta ah sahal kuma lumo.** Erayga cuseb ee xagga Ilaah ka imaanayay ayaa dib u xoojinayay iimaanka Aabraam. Erayga Ilaah ayaa ku filnaa Aabraam. Sida uu u qaadanayay uguna





dhaqmayay wuxuu Ilaah ku hadlay isla markiiba waa la fahmayay. Aabraam Ilaaha ugu sareeya ayuu rumeeyey waxaana isaga loogu xisaabay taasi xaqnimo. Waa qalad in loo malayo in Aabraam bartankan lagu aqoonsaday xaqnimadiisa. Ma ahan in xaqnimada Aabram ay tahay mid uu Ilaah **marka ugu horaysa** bartankan ku aqoonsaday. Iimaanka Aabraam wuxuu ku soo bilawday Uur, rumaysadka uu ballamada Ilaah oo badbaadada ku saabsan Erayga Ilaah ku rumaystayna waxay askumatay marka ugu horaysa uu Erayga Ilaah maqlay Aabraam.

Qasab wuxuu Ilaah hortiisa xaq ku noqday markuu joogay Uur iyo weliba Xaraan. Qoraalka aan ka akhrinayno Bilawgii 15:6 ayaa noo caddaynaya inuu Aabraam mar kale addeecaya Ilaah. Ma ahan macnaha inay Aabraam u ahayd marka ugu horaysa uu Ilaah rumeyey; haddii ay saa ahaan lahayd waxay burburin lahayd fikiraddii aan ka akhrinay Bilawgii 12 – 14.

Waxaa naloo sheegaya wuxuu iimaankan joogtada ah u taray Aabraam. Aabraam wuxuu iimaanka joogtada ah uu Ilaah ku addeecay ku helay xaqnimada Ilaah. Iimaanka dhabta ah wuu ka saramaraya shaki kasta. Bartankan Aabraam wuxuu qiraya in iimaanka uu muddada dheer hasytay uu ahaa mid run ah, weligiis jiri doona oo ah aamin la aamino Ilaah. Waa nooca iimaanka kaa oo ka saramaray shaki kasta. Rumaysadka Aabraam

wuxuu ahaa mid mar kastaba u keenayay xaqnima – waa isla sida ay u ahayd Haabiil iyo weliba Enook iyo Nuux laakiin tani waa meesha ugu habboon oo aan ku sheegi lahayn in iimaanka la saarto ballanta Ilaah ay tahay mid lagu xisaabaya xaqnimo. Iimaanka Aabraam waa mid ka saramaray shaki kasta. Iimaanka lagu badbaado waa xaqiiqda laga leeyahay ballanta Ilaah. Aabraam wuu lahaa iimaankan ilaa iyo wakhtiga aan ka akhrinayno Bilawgii 12:4 haddaanay ka horaynin. Laakiin way ku habboontahay inaan **halkan** kaga hadalno xaqnimada Ilaah ee qofka dedda maxaa yeelay, Aabraam wuxuu caddayay in iimaanka lagu badbaado uu yahay ballanta ku jirta Erayga Ilaah, waana iimaan aan rogmaynin oo dib uga sara kici karo shaki kasta oo jira.





***Cutubka 14aad***

# Iimaanka xaqa lagu noqdo

(Bilawgii 15:6)

Bilawgii 15:6 waxay ka mid tahay erayada Kitaabka ugu waweyn. Waxaa soo xigtay rasuul Bawlos (Rooma 4:3, 9, 22; Galatiya 3:6) iyo Yacquub (Yacquub 2:23). Waa laf dhabarka xiriirka Ilaah lala yeesho, iyo weliba aasaaska baraka kastoo ku salaysan ku noolaanshaha iimaanka.

1. **Badbaadada waxay ka aasaasmaysa ku deeqidda ku dedidda xaqnimada.** Aabraam *'…Rabbiga wuxuu rumaystay; Ilaahna taas wuxuu ugu tiriyey xaqnimo'* (15:6). Tani waa wadnaha Injiilka. Dhibaatada keliya oo na haysata ayaa waxay tahay dembiga ayaan ku dhallanaa, si caadiyan ah ayaan dembiilayaal u nahay, oo dembiga caada ayuu noo yahay.

Ma jiraan wax aan awooddeena ku samayn karno oo aan ku baabi'in karno marxaladda dembiga ee nagu jirta, dabiicadaha dembiga, dhaqanka dembiga, waxyaalaha noo yaala ee dembiga ah.

Dib u habaynta ma ahan shey nagu filan; waxyaalihii aan horay ugu soo dhaqannay ma tirtirayso oo weliba xataa noolosha heer kale kaga gudbidda ma ahan mid aan weligeed guul ku

gaarayno. Waxa aan u baahannahay waa in nala dedo.

Waa inaan Ilaah hortiisa xaqnimo noogula tiriya xataa haddii aan nahay kuwa aan hore ii gadaal midba lahayn. Tani waxay aad ugu dhawdahay sheyga nala siinaya markaan rumaysano ballanta Ilaah uu na siinaya oo badbaadada ku saabsan, ku saabsan Ciise ama (sida uu Aabraam u macnayn lahaa) ku saabsan midhta Aabraam.

Waa arintan tan uu rasuul Bawlos wax barid badan ka bixiyey. Wuxuu ka hadlay xaqnimo rumaysad oo keliya lagu heli karo (Rooma 1:17). Badbaadadu waxay aasaasmaysa markuu Ilaah na siiyo hadiyadda xaqnimada taa oo aan inaba annaga naga imaanaynin oo laakiin si buuxda xagga Ilaah ka timadda.

2. **Xaqnimada Ilaah ee na dhawraysa waa mid uu Ilaah noo kasay ee ma ahan wax aan kasbanay.** Dad badan ayaa u malaynaya inay isku badbaadiyaan Ilaahna uu dadaalkooda xoojiyo, laakiin haddii aan qumaati u hubsano in xaqnimada aanay ahayn wax haba yaraate ee aan annaga kasbanayno, waxaan fahmayna inayan xaqnimadu ahayn dabiicaddeena midnaba intaanan badbaadin ka hore iyo ka dambaba.
Taasna waa is hoosaysin naga dhigaysa kuwa istaahila inay Ilaah hor tagaan. Runtii xaqnimada ma ahan caadadeena ama dabiicaddeena inaba.





Xaqnimada waa tan Ilaah, waa dabiicadda qoduuska ah ee Ilaah taa uu noogu tallagalay wakhtiga ka hore intuusan xataa wax isbedel ah noolosheena ku samaynin.

Oo weliba markuu Ilaah dabeecadaheena qaarkood ka shaqayo oo uu noolosheena isbedel ku dhaco, ma ahan is bedelkaas waxa aan xaqnimada Ilaah ku heleyno. Horay ayaa naloo siiyey xaqnimadaas. Waxaan mar kastaba ku awoodna inaan Ilaah hor staagno xaqnimada uu wakhtiga ka hore noogu tallagalay.

3. **Waa rumaysad oo keliya kan aan ku heleyno xaqnimada na dedeysa.** Aabraam wuxuu rumaystay Ilaaha ugu weyn oo isaguna xaqnimo ayaa loogu tiriyey. Waa rumaysadkiisa uu Ilaah rumaystay oo keliya kan uu xaq ku noqday ee ma jiraan wax kaloo uu Aabraam ku helay xaqnimada Ilaah.

4. **Ku tallagalka jiray wakhtiga ka hore ma ahan natiijo ku timid addeecista Ilaah.** Runtii sabab kastoo lagu rumaysan karo ayaa jirtaa inuu Aabraam sanam caabud ahaa marka ugu horaysay uu Ilaah u yeedhay. Qoyska Aabraam waxay caabudayeen ilaahya kale laakiin Ilaah Aabraam oo keliya ayuu kula hadlay gudcurkii sanam caabudka ee ku yaalay Mesabotamiya.

Bilawgii waxba kama sheegaya wax addecis ah uu Aabraam Ilaah addeecay uu ku mutay inuu xaqnimada Ilaah helo. Baybalka ma dhahaya 'Aabraam Ilaahan ugu weyn buu **addeecay** oo taas ayaa isaga xaqnimo loogu tiriyey', waxaase qoran *'Aabraam wuxuu **rumaystay** Ilaaha ugu weyn waxaana taas loogu tiriyey xaqnimo'.* Rumaysadkiisa ayuu ku mutay inuu xaqnimada Ilaah helo; ee ma ahayn addeecis uu Ilaah addeecay midda uu ku badbaaday.

5. **Xaqnimadan naloo aqoonsaday wakhtiga ka hore ma ahayn wax ku jiray sharciga Muuse.** Sharciga Muuse maba jirin wakhtiga dhacdooyinkan! Waana arinta uu Bawlos kaga hadlaya Galatiya 3:15-18.

Sharciga Muuse wuxuu yimid afar qarni kaddib markii Aabraam uu helay xaqnimada Ilaah. Haddaba sidee baad addeecista sharciga xaq loogu noqon lahaa hadduuba sharciga Muuse jirin marka uu Aabraam xaqnimada Ilaah helayay?

6. **Xaqnimadan wakhtiga ka hore naloo qorsheeyey ma ahan mid waxyaalaha lagu helay ay ka mid ahayeen gudniinka quruuntii Israa'iil.** Tani waa sheyga uu rasuul Bawlos kaga waramaya Rooma 4:9-10. Aabraam wuxuu xaqnimada Ilaah helay ka hore intuusan xataa buryaqabnimada ka bixin.





Doodad rasuul Bawlos ee aan ka akhrinayno Rooma 4:9-10 waxaa loo istecmaali karaya calamooyin kale iyo xaflada kale. Aabraam isagoo buryaqab ah ayuu helay xaqnimada Ilaah. Oo wuxuu haddana xaq lagaga dhigay xili aanay jirin wax baabtiiska ku saabsan, isagoo ay odayaal caleema saarin, iyadoo aanay jirin cashada Rabbiga ama miiska Rabbiga, isagoo aan aadin meel lagu ducaysanaya.
Haddii ay calaamooyinkan iyo xafladahan ahaan lahaayeen kuwa lagu helo badbaadada, Aabraam ma ahaan lahayn mid lagu deydo maxaa yeelay, waxyaalahan mid ka mid ah uu soo maray ma jirin markuu helayay xaqnimada Ilaah. Laakiin Aabraam waa mid looga deyan karo badbaadada oo wuxuu noqday aabbaha rumaystayaasha oo dhan.

Erayada aan akhrinay ma dhahayaan, 'Aabraam waa la guday oo saasuu ku helay xaqnimada Ilaah'. Erayada ma dhahayaan, 'Aabraam waa la baabtiisay oo saasuu ku helay xaqnimada Ilaah'. Ma jiran mid calaamooyinkan ama xafladahan ka mid ah oo aan Ilaah kaga heleyno xaqnimadiisa.

Aabraam ayaa ah kan lagaga deyan karo noolosha xaqnimada Ilaah lagu helaya! Waa uun rumaysad sheyga la sheegay la sheegay inuu yahay waddada ay xaqnimada Ilaah ku noqonaysa mid aan leenahay.

Rumaysad oo keliya oo ay wax xaflad ah la soconin ayaan ku heleynaa xaqnimada Ilaah. Rumaysad oo

keliya oo ay la socon Yahuudi noqoshada ayaan ku heleynaa xaqnimada Ilaah.

7. **Haddaba rumaysadku muxuu yahay? Waa kalsoonida aan ka haysano ballanta Erayga Ilaah.** Ma ahan isku kalssoonaanta aan isku kalsoonahay, laakiin waa kalsoonida aan ku leenahay Ilaah iyo Eraygiisa.

Aabraam iskuma kalsoonayn laakiin mar alla markuu erayga Ilaah maqlo wuxuu hubay in wuxuu Ilaah yidhaahdo ay run tahay xaqna tahay, oo wuu awooday inuu mustaqbalkiisa oo dhan ku dul diso runta ku salaysan wuxuu Ilaah yidhi.

Rumaysad ayaan leenahay markaan ku kalsoonahay 'midhta Aabraam' Ciise Masiix. 'Rumaysad' ayaan leenahay markaan rumaysanayno wuxuu Ilaah yidhaahdo, annagoo rumaysan inaan Ilaah hortiisa xaqnima ku leenahay xataa haddii uu qalbigeena dembi ku jira. Xaqnimada Ilaah waxaan ku helnay qof uu Ilaah noo soo adeegsaday, midhta Aabraam.

Aabraam naftiisa mugdi buu kaga jiray xaqiiqdan laakiin maanta cadayn weyn baan u leenahay wuxuu Ilaah asturka noogu haya. Xaqnimada nala siiyey waa tan Ciise Masiix. Durbaba markaan rumaysano midhta Aabraam, Ciise, waa nala siinaya xaqnimada oo dhan ee Ciise ku jirta oo ah adeecista Ilaah.



*Wacdinta Erayga Ilaah ku salaysan: Bilawgii 12-23*

Ilaah wuxuu noo arkaya inaan qodusiin nahay isla sida uu Ciise yahay. Run ayay noo noqonaysa isla marka aan aqbalayno Ciise inuu yahay badbaadiyaheena. Markaan Ciise rumaysanayno, rumaysadkeena ayaa nagu xiriirinaya Ciise oo waxaan noqonayna kuwa lahaada xaqnimadiisa.

***Cutubka 15aad***

# Fiijinta Haadda

(Bilawgii 15:7-11)

Aabraam wuxuu soo bandhigay welwelkiisa (Bilawgii 15:2, 3), sidaa daraaddeed Ilaah wuxuu bilawbay inuu ballan macaawino ah la galo Aabraam. Way jirta ballan aan horay uga soo aragnay buugga Bilawgii. **Ballanta waa inay tahay mid ay dhaar la socoto.**

**Axdiga wuxuu u kala baxaa saddex nooc:** Axdiga ku waajibka ah inuu addoonka sayidkiisa addeeco, axdiga deeqsida uu sayidka addoonkiisa ku deeqaya iyo axdig laba af leh taa oo ah mid u dhexeysa laba isku awood ah.

Bilawgii waxaan ku aragnay axdiga deeqsiga oo ay adduunyada nebi Nuux ku heshay (6:18; 9:19, 11, 12, 13, 15, 16, 17) haddana waxaa jiraa axdi kaloo deeqsi ah uu Ilaah siinaya midhta Ibraahim taasoo uu u soo marinaya Ibraahim (eeg 15:18; 17:2, 4, 7, 7, 9, 10, 11, 13, 13, 14, 19, 19, 21, kuwaas oo erayga Axdi laga istecmaalay).

Axdigii Nuux wuxuu ahaa mid uu deeqsinimo ku helay. Horay ayaan u soo aragnay waxyaalaha axdiga deeqsiga leh lagu garan karo.

1. Wuxuu leeyahay ballan
2. Wuxuu leeyahay dhaar





3. Axdiga deeqsiga leh waxaa jira qof ka faa’idaha. (Nooc kale oo axdiga deeqsiga ku salaysan ayaa jirta, Axdiga sharciga, waxaa jira qof lagu ‘edbinaya’ qofkaas ama marxaladaas ayaa sharcigaas loo hagaajiyey, waa qof ku waajiban inuu ku dhaarto inuu sharciga dhawri doono.
4. Axdiga deeqsiga leh waa mid aanan sharuud ku xirnayn
5. Axdigan waxaa lagu heli kara hadiyad ahaan.
6. Waxaa dhici kartaa inay oofinta axdiga muddo qaadato waayo, ilaa ay dhaar ka dhacdo wax natiija ah lama helaya.
7. Axdiga deeqsiga waxaa dhici kartaa inay la socoto calaamad ama nooc shey oo lagu garan karo.
8. Axdiga deeqsinimada wuxuu ahaa mid maraha qaarkood ay ku jireen nooc dhiig daadis ama waaq dhac neef la gawracaya.

Hab dheeraad ah ayaan arimahan u eegeyna, annagoo la xiriirinayna axdigan la siinaya Aabraam. Haddii aan si kooban ku sheegno sheekadu waa tan. **Axdiga waa ku xirnaashada Ilaah toos loogu xiran yahay ama xiriir joogta ah lala leeyahay Ilaah.** Masixiinta waxay Axdi la leeyihiin Ilaah.

***Cutubka 16aad***

# Axdi iyo Dhaar

(Bilawgii 15:12-21)

Xiriirka axdiga ku yimaada waa hadiyad nooc dhaar noogu timaada. Markuu Ilaah qof ama urur axdi la gelaya, waxay micnaheedu tahay inuu dhaaranaya ama uu dhaaran doono. Masiixi kasta wuxuu axdi xiriir ah kula leeyahay Ilaah kaa uu ficilkiisa ku yimid dhiigga Ciise Masiix.

Ilaah wuxuu iisu dhiibaya inuu Masiixi kasta dhaar la galo. Wuxuu rabaa inuu Masiixi kasta ku yidhaahdo, 'hadda waan ogahay inaad iga cabsanaysid; runtii waan ku barakadn doona'.

Waxaan Bilawgii 15-22 ka arkayna in hal axdi uu ku fidaya qayba kaloo buugga ka tirsan. Ballanta waxay marka ugu horaysa timid markay dhadooyinka joogeen cutubka 12aad. Dhabtii ma jiro ballan **cuseb** oo ku jira cutubka 15aad. Bilawgii 15aad waa bilawga axdi, laakiin ma lahan calaamad lagu garan karo axdigaasi mana jirto dhaar lagu wada hadlay.

Calaamadda axdiga waxaan ka heleynaa Bilawgii 17aad; axdiga ay dhaarta la socota ayaa ugu dambaysti halkan lagu bixinaya (kaddib markuu Aabraam addecistiiga ka gaaray heer sare) sida ku dhgan Bilawgii 22aad. Ma jirto luuqad dhaar oo ku





jirta waxyaalaha Aabraam lagu yidhi ka hore intaanan la gaarin Bilawgii 22:6-17.

Ilaah wuxuu hadiyad ahaan Aabraam u siinayay dhaar. Wuxuu iisu diyaarinayay inuu yidhaahdo 'magacayga ayaan ku dhaartay e…runtii waan ku barakadayn doonaa'. Ilaah markuu dhaaranaya waa mar uu gaaray go'aanka kama dambaysta ah inuu fuliyo wuxuu horay soo ballan qaadayay. Axdiga ma lumi doono marba hadduu Ilaah dhaarto.

Mawduucan waxaa lala xiriirin kara oo lala akhrin kara dhaartuu Ilaah Nuux ugu dhaartay taa oo aad ka heli kartid Bilawgii 1:11 ama dhaartuu Ilaah nebi Daa'uud u dhaartay taa oo iyaduna laga heli karo Samuu'eelka 2aad cutubbada 12-13.

Fikirado dheeraad ah oo axdiga iyo dhaarta ku saabsan waxaa laga heli kara Bilawgii 15:12-21. Waxyaalaha aan aragnay waxaa ka mid ah,

1. Axdiga wuxuu ku bilawday xusuusin
2. Axdiga waxaa ku jiray wax la oofin lahaa
3. Axdiga waxaa loogu tallagalay inuu dhiirigelin keeno
4. Axdiga wuxuu ku bilaabanaya waaqdhac
5. Kan helaya ballanqaadna waa inuu dhawra waaqdhaca

**6. Masuuliyadda fulinta Axdiga waxaa iska Ilaah.** Ilaah wuxuu Aabraam ku dhalliyey hurdo culus. Waxay na xusuusinaysa Bilawgii 2:21. Ilaah hurdo culus ayuu Aadan ku riday intuusan u keenin Xaawa.

Waxay caddayn u tahay in Aadan uusan Xaawa ku helin wax dadaalkiisa oo dhacdada oo dhan waxay ahayd mid uu Ilaah awoodiisa iyo doonistiisa ku sameeyey.

Aadan lagalama tashanin uumista Xaawa. Dhacdada ku jirta Bilawgii 15:12 waxay la mid tahay tan. Waxay na ogaysinaysa inay ballanta tahay mid ay fulinteeda si dhan u xilsaarantahay Ilaah. Inaba ma ahayn qorsha uu Aabraam ku lug lahaa. Wuu hurdayay markuu Ilaah farintaan ka helayay!

Aabraam wuxuu ku qasbanaa oo keliya inuu raaco hogaanka Ilaah. Hawsha fulinta axdiga waxay si buuxda u saaran tahay Rabbiga. Jaqda iyo mugdigan daran waa jiritaanka Ilaah markii la barbardhigo tan ku dhigan Baxniintii 14:20, Sharciga Kunoqoshadiisa 4:11, 5:22, 23, 1 Boqorada 8:12 iyo 2 Taarikhdii 6:1.

**7. Waxaa Axdiga ku jira ku wacyoonta waxa imaan doona.** Haddii aan ka akhrino Bilawgii 15:13-16, waxaan fahmayna in Aabraam loo wacyooday sida taarikhda mustaqbalka Israa'iil ay noqon doonto.





Ilaah markuu doonaya inuu ficil galo wuxuu si guud u iftiimiya waxyaalaha tilmaamaha waxa dhici doono. Nebiyada hawshooda waa sii sheegidda dhacdada dhici doonto.

Ilaah waxba kuma ficilqaado isagoo aan nebiyadiisa u caddaynin waxyaalaha dhici doonaan. Eeg Caamoos 3:7 oo leh, "Sida xaqiiqada ah Sayidka Rabbiga ahu waxba ma samayn doono, inuu qarsoodiga u muujiyo addoommadiisa nebiyada ah mooyaane".

Sharciga Kunoqoshadiisa 18:9-10 waxay ka digtay nimankii reer Kancaan ee ruuxaaniga qabay kuwaa oo dhacdooyinka mustaqbalka ku sheega ruuxyada sharka ah.

Inta badan waxaa dhacdaa inuu Ilaah dadkaas nebi run ah ka dhex kiciyo si uu dadka ugu wacyoodo waxyaalaha saxda ah uu Ilaah samayn doono (Sharciga Kunoqoshadiisa 18:22).

Nimanka sida Elisha inta badani way fahansanayeen mustaqbalka (2 Boqorada 6:12). Yexesqeel wuu yaqaanay Yerusaalem muddo dheer ka hore intuusan weligiis tegin halkaas (Yexesqeel cutubka 8-11).

Nebiyada maraha qaarkood qarniyo badan intaanay nimankas caan noqon ka hore ayey ogayeen

magacda nimanka hawsha boqortooyada Ilaah loo istecmaali doono (1 Boqorada 13:2; Ishacyaah 44:28; oo haddana eeg Faalimaha Rasuullada 9:12).

Muuse boqorkii Masaryiinta ayuu u tegay isagoo og wuxuu Ilaah samayn doono (Baxniintii 3:19-25). Imaatanka Ciise uu ku imaan doono Yahuudnimo, oo weliba inuu qaas ahaan uga dhallan doono qabiilka Yuuda, inuu ahaan doono farcanka Daa'uud, inuu ka dhallan doono Maryan oo bikra ah kuna dhallan doono magaaladii Betilaxaam, horay ayaa loo sii sheegay dhacdooyinka oo dhan intaanay dhicinba.

Qof kastoo Masiixi ahna horay ayuu u sii ogtayay inuu Ciise sharafta Ilaah ku imaan doono oo il kastana way arki doonta Isaga. Qorshooyinka waweyn ee Ilaah oo dhan intaanay dhicin ayaa horay loo muujiya.

Xataa shaqsi ahaanba, waan rajayn karnaa inaan horay u aragno muuqaalka waxyaalaha uu Ilaah nala rabbo inaan Isaga ugu adeegno. Markuu isbedelka nooloshiisa la kulmayay Sauloskii reer Tarsoos horay ayuu u ogaa waxa ay shaqadiisa noqon doonto iyo wuxuu ku wacdin doono (Faalimaha Rasuullada 22:21); oo weliba wuu ogaa waxyaalaha dhici doono maalma dabadood (Faalimaha Rasuullada 22:17-18)!





**Maragfur – '*Aniga naftayda anoo og inaan ku takhsuusi doono cilmiga sayniska ayaan helay dareenka ah inaan nooloshayda oo dhan aan ku dhamayn doono wacdinta Erayga Eebbe bedelkii aan cilmiga sayniska ku adeegi lahaa. Sanado dabadood waxaan aad u dareemay inuu saldhigayga ahaan doono waddanka Keniya*'.**

***Tobban sanno ayay Bawlos ku qaadatay inuu erayga gaarsiyo kuwa aan Yayuudda ahayn (Faalimaha Rasuullada 13:2-3 waxay ahayd tobban sanno markuu u adeegidda Ilaah ogolaaday kaddib). Ilaah ayaa Keniya I keenay 13 sanno markaan muujinta Ilaah helay oo ahayd inaan Ilaah ugu adeegi doono halkaa – oo weliba hab aanan la filanaynin ayaan hawshaas ku bilaabay.***

***Sanad ka hore mar aan xagga aaday aniga oo Nayroobi dhex socda ayaa waxaan Ilaah ka helay muujin xoog badan oo ahayd inaan ku noolaan doono meel u dhaw jid la yidhaahdo Argwings Khodek.***

Muujintaas way noqotay sida uu Ilaah horay ii tusay. Sannad bacdigeed waxaan imid Nayroobi anigoo aan wax shaki ah ka qabin hawsha uu Ilaah ii soo diray. In muddo ah ayaan ku noolaa meel u dhaw Argwings Khodek.

Ugu dambaysti waan ka guuray meeshi tilmaanta ahayd, laakiin ilaa marka aan maragfurkan bixinayay jidkaas si joogta ah ayaan ugu soconayay. jidkaas sannad ka hore ayuu Ilaah I tusay intaanan Nayroobi imaanin oo aan ogaanin inuu jiro jid magacaas loogu yeedho!

Wacyoonta haddii ay yartahay iyo haddii ay weyntahayba waxay ku dhisan yihiin hababka uu Ilaah waxyaalihiisa ku sameeyo. Aabraam waxaa loo sheegay inuu farcankiisa aadi doono waddan ay dad qariib ah leeyihiin (Bilawgii 15:13) halkaas ayayna addoomo ku noqon doonaan (15:13).

Sannado kaddib arintaan way fushay waxayna ku noqotay Yuusuf oo dalka Masar addoon ku noqday. Aabraam waxaa kale oo loo sheegay in laga samata bixin doono addoonnimadaas (15:14).

Qarniya kaddibna arintaas way noqotay; reer binu Israa'iil waa laga samata bixiyey Masar. Aabraam waxaa kaloo loo sheegay wax shaqsiyan mustaqbalkiisa ku saabsan (15:15). Abaaraha wakhtiga ay dhacdooyinka dhici doonaana waa la ogaysiyey (15:16).

**8. Hadduu Aabraam si joogta ah ku rumaysto ballanta Ilaah, Ilaah dhaar buu la geli doonaa Aabraam.** Haddii aan ka akhrino Bilawgii 15:17, Ilaah (oo ku yimid dab ololaya) ayaa dhex maray waaqdhici la gawracay oo la gogoyey. In kastoo ay





adagtahay si loo micneyo, runtii habka waa habka uu Ilaah dhaartiisa ku hergelinayey.

Wuxuu ku hadlaya hab muujin ah oo calaamadaysan si loo arko in maalintaas hubaal uu fuliyey dhaartiisa. Dhaar ma jirto ilawse waxaan ka arkayna Bilawgii 22:16-17. Laakiin Ilaah wuxuu metelaya wuxuu samayn doono.

Dhex maridda uu dhex maray neefafka la gawracay waa hab xafladaas sadaqabixinta ah lagu samayn jiray waagi hore. Waa hab uu Ilaah ku dhaaran jiray taa oo ku leeyahay 'aniga aan laba u kala go'o sida neefkan haddii aan ballantayda xajin waayo'.

Waxay tani la mid tahay xafladda laga sheegaya Yeremyaah 34:18. Ilaah wuxuu Aabraam siinaya dhaar uu axdigiisa ku cuslaynaya. Weli ma hergelin, laakiin hadda hadiyad ahaan ayaa loo bixinaya.

**9. Ballanta way sii balaaranaysa.** Sida aan uga akhrinayno Bilawgii 15:18-21 ballantan waxay u egtahay inay la mid tahay tii horay loo bixiyey, laakiin Ilaah ayaa bixinaya waxyaala dheeraad ah oo ballantaas ku saabsan. Weli waxay taagan tahay ballan, ee ma ahan dhaar.

**10. Kuwa ka faa'idi doono waa farcanka Ilaah** (15:18). Kuwa farcanka Aabraam loogu yeedhi doono oo dhan way u fulli doonta ballantaas – isla marka ay dhaarta Bilawgii 22:16-17 la bixin doono.

Ficilgalka arintaan waxaan kala kulmi doonnaa qaybaha dhiman ee sheekada noolosha Aabraam ku salaysan. Fullinta waxyaalaha ballantan iyo bixinta dhaarta waxay si buuxda ku soo bixi doonaa markay addeecista Aabraam gaarto heer sare oo laga rajaynaya inay gaarto (22:1-18). Durbaba (Bilawgii 17:1-27) waxaa nala siin doonaa horudhaca calaamadda axdiga taa oo ah gudniinka.

Axdiga cuseb waa mid axdi kale garab socda heer kastoo uu joogaba.

1. Ballanta waxaa ku jirta axdi
2. Masiixi kasta wuxuu ku jira xiriir uu Ilaah nala gelaya axdi ku saabsan ballamada uu naga qaaday oo ah inuu na barakadayn doono. Luuqadda Cibraaniga waxaa lagu yidhaahdaa ‘gelidda nasashada’.
3. Kuwa ka faa’idaha waa rumaystayaasha iyo farcankooda (kuwa iyaguna rumaysan doonaan (Faalimaha Rasuullada 2:39).
4. Dhiigga waaqdhaca waa kan Ciise Masiix.
5. Hadduu Ilaah axdi noogu dhaarto, axdigaasi ma lumi doono
6. Wakhti ayay qaadanaysa gelidda nasashada
7. Callaamadda axdiga waa baabtiiska iyo cashada Rabbiga.
8. Waxay ficilgal noqonaysa markaan si joogta ah dhiigga Ciise Masiix qaymeyno.





***Cutubka 17aad***

# Dulqaad la’aanta

(Bilawgii 16:1-16)

Muddo dheer ayey Saaray cunug dhalin, sidaa daraaddeed Aabraam oo ay shaki iyo welwel ka buuxsameen, wuxuu ka shakinaya in runtii ‘midhta’ dhaxli doonta ee laga ballan qaaday ay tahay mid ka dhallan doonto Saaray (xaaskiisa).

Qof kastoo ku jira sheekada Bilawgii cutubka 16aad waxay ahaayeen kuwa gef ku dhaqad ah. Ilaah oo keliya ayaa ficilkiisa xaq ahaa.

1. Midda ugu horaysa tix geli, **wareerka ku dhacay saddexda ruux ee sheekada ka qayb qaatay** (16:1-4).

Saaray waxay iisu aragtay qof gef galay. Weligeed cunug ma dhalin (16:1), dhaqamada badidoodna naagta madhalaysta ah dhibaatooyin fara badan ayay la kulmi jirtay. Wax alla wuxuu Ilaah ballan qaaday way u ahaatay Aabraam.

Aabraam wuxuu weliba ka hadlay inuu aadoonkiisa u qaato sida wiilkiisa iyo weliba kan dhaxli doona isaga (15:2). Waxay u ekeyd inuu ka raja beelay Saaray. Waxayna u ekeyd inuu Ilaahna ka soo hor jeeday iyada waayo, waxay tidhi, “…*Bal eeg*

*imminka, Rabbigu waa ii diiday inaan dhalo…'* (16:2).

Ceeb, iinlawenimo, niyad jab, kalsooni la'aan – dareemadan oo dhan ayaa soo kordhay oo waxay sii kordhiyeen uun dhibatooyin is is afgarasho la'aan. Saaray waxay haysatay gabadh reer Masar ah, Haagaar taa oo ay u haysatay shaqaala ahaan, taa oo iyada la joogta ilaa waagii ay safar u aadeen Masar (12:10-20).

Aabraam waxaa loo sheegay inay 'midhta' jidhkiisa ka soo bixi doonto (15:4). Waayahaas dhaqan bay ahayd inuu nin naag madhasha ah qaba uu addoontiisa u tago si ilma uga dhallo.

Marxaladdaasi waxay keeneysay inay naagtii madhashada ahayd ay cunugga ay addoonta dhashay qaadato oo ay tii dhashayna ay cunug la'aan ahaato – wax dood ahna kama aanay keeni karin waayo, dhaqanay ahayd. Sidaa daraaddeed Saaray waxay Aabraam kula talisay inuu u tago addoontiisa Haagaar si uu cunug u helo.

Saaray waxay ku ficilqaadday dareen la'aan, aragti la'aan, u jeedo la'aan iyo sugnaan la'aan. Waxay lahayd uun, *'…mindhaa iyadaan carruur ka heli doonaaye…'* (16:2).

Aabraam naftiisa qalad buu galay maxaa yeelay, *'…codkii Saaray buu maqlay'* (16:2). Markii hore





wuxuu ka hogaan qaatay Ilaah; laakiin hadda waxaa hogaan u ah naagtiisa. Aadan isla sidaa ayuu sameeyey waayo, waxaa qoran,

*'oo markii naagtii aragtay in geedkii cunto ku wanaagsan yahay, oo indhaha u roon yahay, oo uu yahay geed loo doonayo in caqli lagu yeesho, ayay midho ka qaadatay, oo cuntay; ninkeedii la joogayna wax bay ka siisay, oo isagiina wuu cunay'* (Bilawgii 3:6).

La talinta naagta way wanaagsanaan kartaa eeg Xakiinnada 13:23 maxaa yeelay, waxaa dhigan, *'Laakiinse afadiisii waxay ku tidhi, Hadduu Rabbigu doonayo inuu ina dilo, inagama uu aqbaleen qurbaan la gubo iyo qurbaan hadhuudh ah, oo waxyaalahan oo dhanna inama uu tuseen, oo haatanna inooma uu sheegeen waxyaalo caynka ah'* laakiin ma wanaagsana in lagu dhaqmo go'aankooda iyadoo aanan laga fiirsanin.

Bedelkii uu rumaysadkii ku adkaysan lahaa Aabraam wuxuu bilaabay inuu damaca jidhka ku socdo (sida uu rasuul Bawlos kaga warama Galatiya 4:23). Bedelkii uu dulqaad lahaan lahaa wuxuu bilaabay inuu ku dhaqmo xaqdarro. Waxay u ekeyd inuu Ilaah samayn doonin wax qaas ah si midhtaas loo helo oo Aabraam wuxuu go'aansaday inuu awooddiisa ku ficiltamo.

Haagaar waxay ahayd addoomad reerka Aabraam la nooleyd sannada badan. Inay Aabraam la seexato waxay fasiraysay inay u ahayd naag gargaar ah (16:3). Ficilkan gabadh addoon ah wuxuu u ahaa ‘sharaf weyn’! Aabraam wuxuu raacay talladii afadiisa Saaray oo wuu qaatay Haagaar (16:4).

Haagaar way uuraysatay. Laakiin waxay bilawday inay ku madax adkaato Saaray. Waxay iisu qaadatay inay xilka kala wareegtay Saaray oo uu Aabraam rajadiisa oo dhan ku fullin doono iyada.

**2. Dulqaad la’aanta waxay qof kasta u keeneysa dhibaato.** Ficiladan oo dhan waxay ku hoobteen xanaaq. Saarayna waxay bilawday inay aargudasho bilawdo

Waxay tani haddana dhallisay inay Saaray eedeyn bilawdo. Waxay eedeynaysa Aabraam – in kastoo ay ugu horaynti fikiraddeeda ahayd! Shaki kuma jiro oo Aabraam wuxuu sugayay dhallashada wiilkiisa (laakiin sidee bay wax noqon doonaan haddii ay gabadh u dhallato?) oo wuxuu u malaynaya in ininka ay Haagaar dhalli doonto uu yahay kan laga ballan qaaday.

Ma ahan isaga, Saaray iyo wiilkeeda dhallan doona ee Isxaaq waxa uu ka fikiraya laakiin isagaa isku maqan oo wuxuu ku fikiraya Haagaar iyo wiilka ay dhali doonto Ismaaciil! Waa mid aan la inkiri kerin in hadduu u malayo inuu Ismaacill yahay wiilka





laga ballan qaaday inay Haagaarna ay noqonayso hooyada sharafta leh ee ay ku imanayaan farcankaas Aabraam laga ballan qaaday.

Fikiradda ah inuu cunugaas ahaa doono mid ay Saaray lahaan doonto (16:2) ma ahan mid suurtagal ah. Saaraynа waxay noqotay mid qadka laga tuuray. Aad ayay u xanaaqsan tahay Saaray oo waxay diyaar u tahay inay Ilaah ka tuukto inuu inkaartiisa ku soo dejiyo ninkeeda. Sida qoran ee ay ku dhawaaqday waa tan, *‘…Rabiigu aniga iyo adiga ha ina kala xukumo’* (16:5).

Tani way sii dhalinaysa xilqaad darro markii laga eego xaga Aabraam. Oo isagii wuxuu yidhi, *‘…Bal eeg, midiidintaadii gacantaaday ku jirtaaye; waxaad doonto ku samee. Saaraynа si adag bay ula macaamilootay, kolkaasay midiidintii ka carartay horteeda’* (16:6). Tanna waxay Haagaar u keentay silicid badan. Aabraam ma rabbo inay arintan inaba isaga khusaysо – laakiin tani waa xil diid.

Natiijadeeda waxay noqonaysa inay Saaray sii qooqdo Haagaarna ay sii silicdo. Saaray si fool xumo ah ayay u cadaadisay Haagaar taas oo sababtay inay Haagaar ku cararto Masar (16:6aad qaybta labaad). Qaybtaas aayadda waxay leedahay sida tan, *‘Saaraynа si adag bay ula macaamilootay, kolkaasay midiidintii ka carartay horteeda’*

**3. Meesha ay xaqdarrada ku badato, intaas in kaban ayay nimcada Ilaah ku badataa.** Ilaah naxariis dadka kula dhaqmaa xataa markay dadka oo dhan kaa soo horjedaan oo ay kuugula dhaqmayaan wax nacasnimo ah.

Naxariis ayey ahayd markuu Ilaah Haagaar la kulmayay (16:7) aayadda waxay leedahay, *'Oo malaa'igtii Rabbigaa heshay iyadoo ag joogta il biyo ah oo cidlada ku taal, oo ishuna waxay ku tiil jidka Shuur'*. Malaa'igta Ilaaha ugu sareeya waa Ilaah naftiisa oo hab muuqaal ku imaanaya.

*'Ninna ma arkin Ilaah marnaba…'* (Yooxanaa 1:18), laakiin waxaa jiray shey la arki karo oo metelaya Ilaah. Naxariista Ilaah ayay ahayd markuu Ilaah Haagaar la hadlayay (16:8). Malaa'igaha Ilaaha ugu sareeya si naxariis leh ayay ula hadashay Haagaar ilaa ay sheekadeeda ku aamintay malaa'igta una sheegta dhibka ay soo martay oo dhan. Malaa'igta iskuma aanay deyin inay ogaato qoftan tan ay tahay iyo wixii dhib ah oo qabsaday.

Naxariista Ilaah ayay ahayd markay malaa'igta Haagaar u sheegeysay waxa ay samayn lahayd (16:9). Haagaar waxaa lagu amray inay ku noqoto oo ay addeecdo Saaray wax alla wixii ay Saaray iyada ku samayn doontaba.

Naxariista Ilaah ayay ahayd markuu Ilaah Haagaar siinayay ballanta ku saabsan barakada uu wiilkeeda





heli doono (16:10-12). Waxay filanaysa wiilkeeda, midhta Aabraam, inuu noqon doono quruun weyn oo weliba farcankeeda waxay u badnaan doonaan sida carada xeebta. Hase ahaatee, wiilkeeda ma ahan kan uu Ilaah ballanqaaday. Midhta runta ah ee Aabraam waa wiil ay Saaray dhalli doonto. In kastoo ay saa tahayna ballanta Haagaar aad bay ugu dhawdahay wixii ay rajaynaysay iyadoo ah naagta Aabraam.

Tani waxay u egtahay ballanta midhaha badan ee laga ballan qaaday Aabraam. Waxay heli doontaa wiil (16:11). Wuxuuna ahaan doonaa mid duur ku jir ah oo meeshuu rabba ku noolaan doono, wuxuu rabbana samayn doono, oo weliba cid walboo uu la kulmo wuu la coloobi doonaa (16:12).

Naxariista Ilaah ayay Haagaar Ilaah ugu mahadisay xiriirka cuseb ay la yeelatay Ilaah. Isla sida uu Aabraam Ilaah ugu mahad celiyey awooddiisa *'El Elyon'* (14:22) oo dhigan sida tan,
*'Laakiin Aabraam wuxuu boqorkii Sodom ku yidhi, Gacantaydaan kor u taagay oo waxaan ku dhaartay Rabbiga, kan ah Ilaah ugu sarreeya, eel eh samada iyo dhulka'*. Haddana waxaan inoo muuqata inay Haagaar Ilaah ugu mahadinayso aragga uu arkay marxaladda ay ku jirtay (Isagu waa Ilaaha wax arka) maxaa yeelay,

sida ay tidhayba, *'Oo waxay magicii Rabbigii la hadlay iyada u bixisay, Waxaad tahay Ilaaha wax*

*arka, waayo, waxay tidhi, Weliba miyaan halkan ka arkay kan I arka?'* (16:13). Meesha iyada ah ee uu Ilaah iyada kula kulmay waxaa loo bixiyey *Beer-Lahai-Roi* (16:14) micnaheedu waa 'ceelka kan nool oo I arka' (16:14). Waxay dhashay wiil Ismaciil la yidhaahdo (16:15). Wuxuu dhashay kow ii tobban sanno kaddib markuu Aabraam Kancaan gaaray (16:15-16).

In kasto ay ku jirtay xaalad ay ku wareegsanayeen, nacayb, masary, taxaddir la'aan, naxariis darro, dulqaadasho la'aan iyo caasinimo joogta ah, nimcada Ilaah ayaa soo gashay noolosha gabadhii midiidinta ahayd, wuxuuna tusay naxariistiisa. Dhacdadaas wixii ka dambayay weligeed ma aanay ilawbin wixii ay noolosha kala kulantay. Waxay ogaatay inuu Ilaah yahay kan keliya oo naxariistiisa ku dhaqqalaynayay wakhtigan oo dhan. Caasinimada Ilaah lagu caasinayay way sii badanaysay laakiin nimcada Ilaahna aad bay u sii badanaysay.





***Cutubka 18aad***

# Atkaynta Axdiga Ilaah

(Bilawgii 17:1-8)

Ilaah aad buu uga xumaaday sida nacasnimada ah uu Aabraam u xajin waayay rumaysadkiisa ku saabsanaa ballanta Ilaahna wuxuu bilawbay inuu Haagaar la shaqayo bedelkiisa.

Farxaddarrada Ilaah waxay dhalisay aamusnaan muddo ah. Afar iyo tobban sanno ayaa ka soo wareegatay intuusan Aabraam Ilaah ka helin muujin kaloo weyn oo ku saabsan qorshaha Ilaah (eeg 16:16; 17:1). Ugu dambaysti markuu Ismaciil 13 jir ahaa ayuu Ilaah hadlay mar kale.

Ilaah weli axdi dhaar leh ayuu la gelaya Aabraam. Axdiga deeqsinimada ayaa ah xiriirka uu Ilaah nagu siinaya axdi dhaar leh. Ballantana si xoog leh ayaa loo atkayn doonaa si ay u noqoto wax la fuliyey oo aan mar dambe la rogi karin.

Saasoo tahayna, wakhti dheer ayaa u dhaxeyey markay marxaladda Haagaar dhacday iyo marka uu Ilaah muujinta kaloo ugu weyneyd siiyey Aabraam. Ilaah wuxuu ka xumaaday wuxuu Aabraam ku falaaday oo muddo dheer ayuu aamusnaa intuusan Aabraam dib ugala hadlin atkaynta ballamadiisa.

**1. Axdiga Ilaah wuxuu u baahan yahay in la ‘atkayo’.** Dhaarta axdiga lagu cuslaynaya waad mid deeqsi lagu helaya. Ilaah si joogta ah ayuu u macnaynaya ballantiisa. Xafladdii axdiga waa la fuliyey.

Laakiin axdiga si buuxda uma fulin waayo, weli ma jiraan wax dhaar ah oo la bixiyey. Halkan Ilaah wuxuu ka sheegay inuu atkayn doono axdiga. Erayga ku jira 17:2 waa Cibraani oo waxaa lagu macnayn kara ‘lahaasho’ laakiin macnaha guud waa ‘geyn’ waxoo dhanna waxaan ku macnayn karnaa deeqsi.

Haddii aan ka eegno 17:7 waxaan fahmayna inuu jiro eray kale oo lagu macnayn karo ‘atkaynta’ ama sababidda wax inay dhismaan. Atkaynta axdiga waa heer deeqsiga lagaga dhigaya mid jira. Ilaa hadda axdiyada waa la bixiyey ilawse weli lama ‘lahaanin’ (eeg Cibraaniyada 11:33).

Waa run oo axdiyada waa ku talagal. Ilaah khiyaana ma yaqaano sidaa daraaddeed axdigan waa wax dhab ah. Laakiinse weli ma lumin oo sida uu Ilaah yidhi way noqon doontaa. Ballamada waxaa lagu dhaxlaa rumaysad iyo dulqaad, waxaana lagu gefaa rumaysad darro iyo dulqaad la’aan.

Madaama uu Ilaah ka hadlaya inuu axdi dhisi doono taasi waa cadayn sida aan uga akhrinayno Bilawgii 22:22 waxaa jira hal axdi oo noolosha Aabraam oo





dhan lagaga sheegaya. Axdigaasi waa mid deeqsi leh, laakiin lama dhisin.

Halkan waxaa ku jiraan laba shey oo caddaynayaan inuu Ilaah khiyaanalow ahayn (Cibraaniyada 6:18), Axdiga iyo dhaarta. Ilaah khiyaano kama ahayn markuu axdiga bixinayey; runtii waxay ahayd wax uu ku tallagal dhab ah ku ficilqaaday. Laakiin haddii ballantii la galay ay noqoto mid dhaar la raaciyey ballantaas ama axdigaas wuxuu noqday mid la xoojiyey ama dhisan!

Marka ugu horeysa uu Ilaah axdig bixinaya axdigaasi waa deeqsi; markuu Ilaah ku dhaarto inuu axdigiisa oofin doonana axdigaas waa mid shabadaysan oo aan lumi doonin. Intuu Ilaah Aabraam horay ula socdo si uu u xaqiijiyo si uu Aabraam ugu guto dantiisa, halkan waxaa soo galay eray aan la filanaynin oo dhiirigelin leh, iyo weliba cod lama filaan ah oo xooga saaraya muhimadda ay leedahay in doonista Ilaah lagu nolaado.

2. **Ilaah wuxuu bixiyaa eray lama filaan ah markuu Aabraam dhiirigelinayey uu xusuusinayey inuu yahay *‘El Shadai’* ( Ilaahaha Qaadirka ah)** (17:1).
*El Shadai* waa magaca ugu weyn oo ay Ilaah ugu yedheen Aabraam, Isxaaq, Yacquub (eeg Baxniintii 6:3). Haddii macnaha guud ee erayadaan loo guda galo waxaad fahmaysa inay tahay ‘Ilaaha awoodda badan ee na caawiya markaan liidana oo aan ku

jirno marxalad daran', 'waa Ilaaha ugu awoodda weyn ee caawiya kuwa liita'. Sida aan uga akhrinayno Bilawgii 17:1, Aabraam waxaa laga ballan qaaday wiil, laakiin wiilkaasi weli ma dhalanin. Aabraam aad buu u da' weynaaday. Magacaas waxaa loo istecmaala marxalad aad u liidata oo macaawino u baahan. Ilaah wuxuu ballanqaadaya inuu ahaan doono El Shadai (Ilaaha Qaadirka ah).

Marxaladaha kale eraygan loo istecmaalay waxay ahayeen kuwa aad tan uga duwanayn. Bilawgii 28:3, Yacquub xaalad daran ayuu ku jiray taa oo ku sababtay inuu hoygooda ka cararo. Ilaaha Qaadirka ah (El Shadai) waa kan awooda inuu barakeeyo.

Bilawga 35:11 waxaan arkayna Sayid dhibbaysan oo weliba marxalad aad u xun ku jiray; waxay ahayd inuu la kulmo walaalkiis oo horay ugu caga jugleyey inuu dili doono. Bilawgii 43:14 waxaan arkayna marxalad kale oo ku qasbaysay Yacquub inuu Beenjamiin ka khuusto.

Wuxuu horaan uga khuustay Yuusuf (amaba waa sida uu ku fikiraya). Haddan waxay u egtahay inuu Beenjamiinna ka khuusan doono. Sidaa daraaddeed wuxuu leeyahay 'Ilaaha Qaadirka ah naxariis ha kuu galo'. Bilawgii 48:3 waxaan ku dhigan khiso sheegeysaYacquub oo sakaraad ah oo ka hadlaya mar uu marxalad noocaas ah ku jiray oo uu Ilaaha Qaadirka ah u muuqday isaga. Bilawgii 49:25





Yacquub wuxuu bixinaya barakadiisa ugu dambeysay intuusan dhiman.

Wuxuu ka hadlaya Yuusuf wuxuuna uga hadlaya mar horaan isaga ay dhibaata uga timid xaga reerka iyo weliba xaga naagta Botiifa – laakiin 'Ilaaha Qaadirka ah ayaa…ku barakadayn doona'. Waxaa muuqata sawri xariirsan oo ah sida loo istecmaalay erayada *El Shadai* (Ilaaha Qaadirka ah). Macnaheedu waxaa weeyaan 'Ilaaha aad u awoodda badan ee u gurmada dadkiisa marxaladda darran ku jira'.

**3. Ilaah hab uusan weligiis horay ugu dhawaaqin ayuu xoogga ku saaraya muhimadda ku jirta xaqnimada.** Axdiga wuu sii dhismaya inta uu shaqsiga axdiga lala galay xaqnimada ku sii dhaqanaya. Aabraam waxaa lagu amray inuu Ilaah xaqnima joogta ah ku hor joogo (17:1qaybta kowaad). Hor joogidda Ilaah waxay macnaynaysa inuu qofka ku dhaqmo xaqnimo joogta ah si ay xataa dadka uu la noolyahay nooloshiisa uga arkaan Alla ka cabsashadiisa iyo ku dhaqashada sharafta. Xaqnimada waxaa loola jeeda inuu qofka ku noolaado noolol aan waxyaala sahlan lagu eedeyn karin. Ma ahan in qofka uu yahay mid aan inaba iin lahayn. Laakiin waa inuu ku noolyahay noolol aan waxba uqdad ah lagaga sheegan Karin, daacadnimo, rogrogmasho la'aan.

Wax noocan ah uu Ilaah horay Aabraam u weydiyey ma jirin. **Nimcada Ilaah iyo naxariista Ilaah waxay ahaayeen wax uu Aabraam horay u dareemay ka hore intuusan Ilaah Aabraam ku amrin inuu ku noolaado waxyaalahan waweyn ee hadda la weydinaya**. Laakiin hadda waxaa yimid waxyaala waweyn ee looga baahan yahay inuu Aabraam ku noolaado! Aabraam hadduu doonaya in axdiga uu Ilaah ka ballan qaaday helo waa inuu ku noolaado noolol xaq ah uu Ilaah raali ka yahay oo qayb kastoo nooloshiisa ka tirsan waa inay ahaato mid toosan ee daacad ah.

**4. Waxaa si dheeraad ah Aabraam u dhiiri geliyey muujinta waxyaalaha dheeraadka ah uu Ilaah u qorsheyey isaga.** Ku dhismashada rumaysadka waxay dhalinaysa ku dhismadda muujinta Ilaah. Marxaladii uuraysashada Haagaar kaddib, waxay u ekaan kartaa Aabraam inuu noqday mid aan saa ugu dhaqmaynin rumaysadka. Laakiin Ilaah sida aan wax u aragno uma arko. In kastoo ay jireen niyad jab badan iyo da'iifnimo, Aabraam weli wuxuu ku socdaa ballamadii Ilaah. Xataa qaladaadkiisa waa kuwa natiija u ah ballamada Ilaah oo aan nooloshiisa laga oofinin.

Bilawgii 17:2-9 Ballantii taranka ku saabsanayd ayaa haddana lagu celiyey (17:2; eeg 13:16; 15:5). Ballaarin dheeraad ah ayaa la bixinaya. Aabraam wuxuu aabba u noqon doonaa quruuma badan 17:4-6). Ilaah wuxuu Saaray u niyeysan yahay wiil, ee





ma ahan farcanka Ismaciil (eeg 17:16). Baraka waxay ku sii ballaaratay dunida oo dhan waxayna ku fulli doonta farcan bawdaha Aabraam ka soo bixi doona (eeg 12:3; Rooma 4:16 – 17).

Aabraam wuxuu noqon doonaa qof cuseb madaama la siiyey awood aan caadi ahayn. Magaciisa waa la bedeli doona si ay calaamad ugu noqoto cusbooneysinta awooddiisa (17:5). Dadka Ibraahim waxay ku sii fidi doonaan mustaqbal dheer oo imaan doona. Axdiga waa inuu ahaado mid weligiis jiri doona (17:7-8). Tan waxay noo sheegeysa inay jiraan arimo axdiga ku lifaaqan oo ka weyn Ibraahim iyo reerkiisa oo aan ahayn kuwa muddo gaaban ku kooban. Waxa aan halkan kula xarbinayno waa ku talagal xagga Ilaah ka yimid oo weligiis jiri doona. Flidda ballamada Ilaah waxay ku xiran tahay Aabraam oo ku noolaado noolol heer sare ee Alla addeecis leh. Qaybta ugu weyn ee ballantan waa mid loogu tallagalay in Aabraam lagu dhiiri geliyo.

Ilaah wuxuu nagu dhiiri gelinaya inaan ka taba galno dhaxalkeena, isagoo noo xaqiijinaya awooddiisa iyo sida uu u doonaya inuu kuwa liita caawiyo oo weliba wuxuu nahor keenaya weynaanta muujinta. Dabadeedna waa inaan Isaga ku hor joogno nool aan eed lahayn. Noolosha sida joogtada ah xaqa ku dhaqata waxay nagu hogaaminaysa wax alla wuxuu Ilaah noo niyeysan yahay. Tani Aabraam run bay u ahayd; oo weliba

waxay run u ahaan doontaa carruurta Ibraahim, kuwa Ciise rumaysan.





***Cutubka 19aad***

# Gudniinka

(Bilawgii 17:9-14)

Aabraam wuxuu nooloshiisa ka jooga heer uu Ilaah isaga weydinaya waxyaalaha waweyn inuu oofiyo. Heer sare ayaa laga gaarsiyey xiriirka uu Ilaah la leeyahay iyo ku dhaqashada xaqnimada. Waa inuu Ilaah hortiisa xaq ku ahaado. Hab kale ayaa hadda loo tusinaya addeecistiisa. Axdiga inta badan wuxuu leeyahay calaamad lagu garto, Ilaahna wuxuu doonaya inay jirto calaamad lagu garto axdigan uu Aabraam la dhiganaya.

Arinta socota ayaa waxay tahay axdigan ayaa horay loo sii wada. Xiriirka wuu jira, axdiyana waa la galay. Hadda waxa la bixinaya horudhaca callaamadda axdiga. Ilaah wuxuu fulinaya axdigiisa. Oo hadda wuxuu ku socda heerka uu ku dhaaran lahaa inuu axdiga fulin doono. Masixiinta oo dhan waa carruurta Ibraahim. Waxaan raacsannahay tallaabada Aabraam. Annaguna waxaan axdi kula jirna Ilaah. Waxaana noo muuqdaan calaamadaha axdiga. Ilaah wuxuu doonaya inuu annaguna nagu yidhaahdo ‘hadda waan arkay inaad iga cabsanaysaan’ oo waxaanna si deeqsi ah idinku shubaya barakooyinkeyga aad ku geli doontaan nasashada oo waxaad dhaxli doontaa ballamada Ilaah.

Waxaa jirtay hal axdi oo Aabraam lala dhigtay sheekada ballantaas ku saabsan iyo sida lagu bixin doono oo lagu dhaxli doono waxay ku faafsan tahay cutubada Buugga Bilawgii 12-22. Inta badan axdiga wuxuu leeyahay hal calaamad ama ka badan oo axdiga lagu garto.

Waxay noqon kartaa kaansa roobeedka, waxay noqon kartaa Sabtida. Axdiga uu Ilaah Aabraam la dhigtay waxaa calaamad u ah gudniinka, waa qalin yar oo yuubka/buryada la goynaya.

Tan waxay ahayd hawl Aabraam lagu amray inuu yeelo, iyadoo sharuud looga dhigay inuu sameeyo si uu u dhaxlo ballamada. Ilaah wuxuu Aabraam ku leeyahay 'hadda adiguna waa inaad axdigayga xajisa, adiga iyo farcankaaga qarniyada dambe imaan doona oo dhanba'. Xajinta qayb ka tirsan axdiga waxay macna u tahay  amarka laga bixiyey 17:2. Waana inuu Ilaah hortiisa ku noolaado noolol xaq ah uu Ilaah raali ka yahay. Waxay haddana cadayn u tahay inuu xajiyo amarka kale ee durbaba loo xilsaari doono inuu xajiyo.

Waa in la gudaa isaga iyo wixii dhadig ah oo reerkiisa ka tirsan oo dhan oona laga dhigo heer u yaala farcanka danbe oo dhan. Waxaa laga yaaba inay meeshani tahay halka aan ku ogaan lahayn inuu Aabraam inaba ku noolayn sharciga Muuse. Bawlos ayaa arimahan aad uga faala bixinaya haddii aan ka akhrino Galatiya. Wuxuu sheegaya in





Aabraam uu noolaa afar (4) qarni Muuse ka hore oo sidaa daraaddeed inaba suurtagal ma ahan inuu Aabraam ku badbaaday ama uu xaq ku noqday dhawridda sharciga Muuse.

Masixiinta isla heerkaas ayay ku jiraan. Waxaan dib ugu noqonaynaa nooloshii Ibraahim ee ma ahan tii Muuse. Waxaan nahay carruurta Ibraahim xaq ayaana nagala dhigay, noolol ayaa nala siiyey, waxaa naloo xaqiijiyey badbaadada aan xaga Ilaah ka haysano oo waxaa nagula hogaaminaya xaqnimada Ilaah iyadoo aan hoos imaanaynin sharciga Muuse. Dhabta jirta ayaa waxay tahay Ibraahim wuxuu haystay **hal** sharci uu dhawrayay kuna dhaqmayay, waxaa lagu amray inuu ku noolaado kuna dhaqmo noolol xaq oo aan eed lahayn Ilaahna raali ka yahay. Waxay ahayd inuu Ruuxa Qoduuska ah ee Ilaah ku ogaado sida uu Ilaah hortiisa xaq ugu ahaan lahaa; Ibraahim inaba uma baahnayn inuu sharciga Muuse xaq ku noqdo ama uu xiriirka uu Ilaah la leeyahay ku wanaajiyo;

marka keliya oo sharciga Muuse loo baahnaa waxay ahayd markay quruunta Israa'iil isaga la socotay taa oo ay ku jireen dad xaqnima ku dhaqmayay. Erayga Ilaah wuxuu leeyahay, *Sidaynu u og nahay, sharciga looma samayn nin xaq ah, laakiin waxaa loo sameeyey sharcilaawayaasha,*

*iyo caasiyiinta, iyo cibaadalaawayaasha, iyo dembiilayaasha, iyo kuwa aan qoduuska ahayn, iyo*

*kuwa nijaasta ah, iyo kuwa aabbahood dila, iyo kuwa hooyadood dila, iyo gacan-ku-dhiiglayaasha, iyo kuwa sinaysta, iyo khaniisiinta, iyo kuwa dadka xada, iyo beenlowyada, iyo kuwa beenta ku dhaarta, iyo hadday jiraan wax kaleeto oo ka gees ah cilmiga runta ah* (1 Timoteyos 1:9-10).

Waxyaalaha uu Ilaah u baahnaa oo dhan waxaa lagu soo koobay hal shey: 'I hor joog oo xaq ku dhaqo'! Ugu horaynta Ilaah wuxuu Aabraam u sheegay ballamadiisa. Ilaah wuxuu Aabraam ka rajaynaya inuu rumaysto ballamadaas.

Haddana waxaan arkayna Ilaah oo Aabraam kala hadlaya hab noolaydka looga baahan yahay inuu ku noolaado. Sida ay dhacdooyinka iskuugu xigaan waa muhim. Nimca ayaa ku soo hor martay; amarada Ilaahna ga nimcaday ku xigeen. Doonistayda ku soco oo xaq noqo ayay ahayd amarka la siiyey. Tani waxay ahayd uun hab noolayd oo Aabraam uu weligis helin. Wuxuu Ilaah maanta nagu amraya inaan ku dhaqano ma ahan sharciga Muuse. Waxaan nahay carruurta Aabraam. Doonista Rabbiga waxay noogu imaanaysa si kooban oo toosan sida tan uu Aabraam helay.

*'Samaada'* (Matayos 5:48) ayuu leeyahay Ciise, isagoo ka hadlaya amarka jacaylka laysku jacayl yahay jacaylka Ilaah. *'Igu jira'* (Yooxanaa 15:4) ayuu leeyahay haddana Ciise. Haddii aan ka akhrino Rooma 13:9 waxay leedahay sida tan, *'waayo,*



*Wacdinta Erayga Ilaah ku salaysan: Bilawgii 12-23*

*amarradan la yidhi, waa inaanad sinaysan, waa inaanad qudh gooyn, waa inaanad waxba xadin, waa inaanad wax damcin, oo haddii amar kale jirana, waxaa lagu sookoobay hadalkan, waa inaad deriskaaga u jeclaataa sida naftaada'.*

Waxaan sharciga ku oofin karnaa oo aan hal shey ku oofin karnaa hogaanka Ruuxa Qoduuskaku. Aabraam muddo dheer ayuu nooloshan ku noolaa. Intuuna xataa sharciga Muuse imaanin ayuu Ruuxa Qoduuska ah ee Ilaah u hogaansamay. Anshaxa sharciga waxaa la oofin karaya oo keliya markii Ruuxa Qoduuska ah ee Ilaah lagu socdo.
Amar kaloo dheeraad ah wuxuu ahaa in Aabraam iyo reerkiisa oo dhan la gudo. Waa muhim in la ogaado in gudniinka uu Axdiga Ilaah **halkan** ka soo galay sheekada. Gudniinka wuxuu calaamad u yahay waxyaalaha ka dhacaya heerkan ay dhacdooyinka joogaan.

**1. Gudniinka wuxuu calaamad u yahay ballamada axdiga.** Ilaah ayaa ugu yeedhay, *'Waxayna calaamo u noqon doontaa axdiga ina dhex yaal aniga iyo idinka'* (17:11). Axdigan wuxuu ahaa mid u dhexeeyey Ilaah iyo Aabraam. Ballamada Axdiga uu Ilaah bixiyo waxay calaamad u yihiin waxyaalaha uu Ilaah samayn doono intaanay noqonin calaamado caddaynaya waxyaalaha baniaadmiga ku waajibka ah inay sameeyaan.

Qaansa roobeedka waxay calaamad u ahayd inuu Ilaah mar dambe daad soo diri doonin. Gudniinka wuxuu ahaa calaamad uu Ilaah ku cadaynayey balanta axdiga ah inuu Aabraam cusboonaan noolosha uga imaan doonto, awood dheeraad ahna waa la siin doona si ay iisu xoojiyaan waxyaalaha uu Ilaah ballan qaaday inay dhici doonaan. Gudniinka waa Ilaah oo nimcadiisa uga dhex shaqaynaya lab iyo dhadigba iyadoo ay nimcadaas ku helayaan 'midhta Ibraahim', waa uun nimcada Ilaah kaddib marka ay noqonayso calaamad ah inay baniaadmiga ku ficiltamaan.

**2. Gudniinka wuxuu ahaa qayb ka tirsan ficilgalka uu Aabraam ku ficiltamayey.** *'waa inaad axdigayga xajisaa'*, ayuu yidhi Ilaah (17:9). Marka hore markuu Ilaah ballamada bixinayey, Aabraam wuu hurdayey (15:12) ama ahayn wuu kushuucsanaa oo baryuu Ilaah kula hadlayey (17:3), laakiin waxaa jirtay wax ku waajib ahay inuu sameeyo.

Waxay ahayd in ballanta axdiga uu yahay mid uu Ilaah hogaaminaya. Ilaah ayaa wada fulin doona. Laakiin intuusan fullinin waxaa jiraan waxyaala uu Ilaah uga baahan yahay Aabraam inuu oofiyo tanna waxay ahayd mid ka mid ah waxyaalaha Aabraam looga baahnaa inuu oofiyo. Gudniinka marka ugu horeysa waa in la ogaado inay tahay hab uu Ilaah nimcadiisa ku deeqaya lab iyo dhadigba, laakiin waxay ahayd inuu Aabraam naftiisa is gudo. Aadan





qalitan yar ayuu maray isagoo hurdaya (Bilawgii 2:21) laakiin Aabraam hurdo kuma jiri doono marka buryaqabkiisa laga goyn doono. Isagoo raba ayey ahayd in ficilkaas lagu sameeyo.

Qofka Masiixiga ah wuxuu ku xiran yahay axdiga baabtiiska biyaha. Ma ahan laba ficil oo iisu eg ama is garab jooga laakiin kulligoodba waa calaamad fulin axdi lagu cadeynaya waxayna wada tilmaamayaan midhta Aabraam kaa oo ah Ciise. Hal sabab oo ku waajibeysa inuu Masiixi kasta baabtiiska oo ah calaamad axdi fulintiisa tilmaamaysa waxay tahay addeecista la adeecaya amarkaas. Ilaah wuxuu rabbay ficilgalka iyo adeecista Aabraam, oo gudniinka wuxuu ahaa waxyaalaha midkood oo Aabraam looga baahnaa inuu sameeyo.

### *Cutubka 20aad*

# Shabadda badbaadada Ibraahim

(Bilawgii 17:9-14)

Gudniinka wuxuu calaamad u ahaa waxyaalihii ku dhacay Ibraahim markuu sagaashan ii sagaal jir ahaa, iyo markuu Ilaah hawshiisa horay u watay si uu Ibraahim u siiyo dhaar uu uga dhaaranayey inuu Ibraahim barakadayn doono.

Gudniinka wuxuu calaamad u ahaa:

a. Nimcada iyo Ballamada Ilaah
b. Waxay tijaaba u ahayd addeecista Ilaah la addeecaya.

**3. Gudniinka wuxuu calaamad u ahaa dhibatooyinka baniaadmiga.** Madaama ay calaamadda ku lifaaqnayd qayb jidhka baniaadmiga oo taranka loogu tallagalay aad buu muhim u ahaa. Wuxuu farta ku fiiqaya dhalmada iyo wixii dhalma lagu dhaxlaya. Waxay tilmaamaysa caasinimada la dhaxlay.

Fikiradda guud ee gudniinka laga qabo ayaa waxay tahay arin ku lifaaqan nadaafadda. Haddii fikiraddan guud xag ruuxiyan loo fasiro gudniinka wuxuu calaamad u yahay inay jirto nadaafad xumo aan ka dhaxalnay jiinsiga baniaadmiga taa oo ahaanaysa mid ruuxiyan ah ee ma ahan uun in dhinaca jidhka oo keliya laga eego.





Gudniinka wuxuu noo sharaxaya inay jirto nadiifin ‘qalbiga’ lagu nadiifinaya, waxayna ahayd in qofka aan qalbiga ka gudnayn inuu yahay kan ku sugan masiibada baniaadmiga suganaysa.

**4. Haddaba, gudniinka, Ilaah wuxuu doonaya inuu baniaadmiga siiyo qalbi cuseb si uu u awoodo addeecista Ilaah la addeecaya.** Waa kuwa qalbiga laga guday kuwa awooda inay addeecaan Ilaah.

Gudniinka waxaa baniaadmiga ka dhigaya daahir. Waana sababtan tan ka dhigtay inaan erayada noocaas ah aan uga akhrino Yeremyaah 4:4 oo leh, *‘Rabbiga isu guda…’* Ibraahim markuu soo xusuustay maalinta uu Ilaah isaga ku amray ficilkan, wuxuu xusuustay inay ahayd maalinta uu Ilaah isaga ku yidhi, *‘I hor soco…oo iin la’aan ahaw’*.

Qof qalbi cuseb leh, uun cuseb noqday, ayaa lagu dhejiiyey inuu yahay mid dadka xukuma oo nadaafad la’aanta oo dhan saaran tahay. Qofkaas diyaar buu u yahay inuu addeeco Ilaah. Gudniinka wuxuu calaamad u ahaa dhallasha cuseb.

5. Laakiin ma ahan ‘dhallashada’ caadiga ah; **Gudniinka waxuu weliba ka hadlaya bedelaad joogta ah.** Ilaah wuxuu Ibraahim siiyey magac cuseb markuu sannada badan ku jiray rumaysadka.

*'Magacaada wuxuu ahaan doonaa Ibraahim'*, ayuu yidhi Ilaah (17:5). Magaca cuseb waxaa ku jiray macna ah inuu wakhtigaasi Ilaah Aabraam siinayey awood uusan weligiis lahaanin.

Waxaa la siinayey awood cuseb uu ku dhallo Isxaaq oo ahaa cunug muucjiso ah. Ilaah wuxuu Aabraam korkiisa ka dhigayey awoodda uu ku ahaan lahaa 'Ibraahim' – aabbaha kuwa badan. Gudniinka wuxuu ka hadlayey isbedelka noolosha, laakiin uunkaas cuseb waxay ahayd inay lahaato isbedelo aad u weyn iyo awoodsiinta inta uu wakhtiga sii guranayey.

6. Gudniinka wuxuu ka hadlayey **Sida uu Ilaah u jeclaaday inuu u imaado inuu caawiyo kuwa magacda cuseb leh iyo kuwa uunka cuseb noqdeen.** Waxaan ahay 'Ilaaha Qaadirka ah' erayadan waxay ahayeen yeedhid baniaadmiga loogu yeedhaya cusboonaanta noolosha. Ilaah diyaar buu u yahay inuu ka dhex shaqeeya kuwa doonaya inay xiriirka ay Isaga la leeyihiin heer sare kaga garaan rumaysadkooda.

Ibraahim markuu soo xusuustay gudniinkiisa waxuu haddana xusuusanaya xaaladda uu ku jiray markuu Ilaah isaga ka ballan qaaday inuu ku caawin doono cusboonaanta noolosha. Erayada 'Ilaaha Qaadirka ah' waxay Ibraahim xusuusinayaan inuusan ahayn oo keliya mid awood leh; wuxuu si dheeraad ah u haysta Ilaaha ah kan awoodda badan oo ah





caawiyaha kuwa liita, Ilaaha awoodda badan ee ficiltama marka awood dheraad ah loo baahan yahay.

7. Gudniinka wuxuu ahaa **yeedhis dadka loogu yeedhaya addeecista ay Ilaah addeecayaan.** Ibraahim ma awoodo weligiis inuu ilawbo inuu Ilaah isaga ula yimid ballama la cusboonaysiyey in kastoo uu ka leexday iimaankiisa markuu xiriir la yeeshay Haagaar.

In kastoo ay saa tahayna, wakhtiga ballanta la cusboonaysiyey waxay ahayd wakhtig addeecistana mid qaas ahaan in loogu dhaqmo ay tahay. Waxay ahayd inuu Ibraahim ballanta xajiya (17:9, 10).

Waxay ahayd in la gudo uuna soo wada xusuusta wax allaate wuxuu Ilaah isaga u xilsaaray wakhtigan. Hadduusan addeecis lahayn gudniinka wuxuu noqonaya mid aan inaba macna lahayn. Ilaah ayaa isaga ku deday xaqnima, oo weliba ka dhigay qof cuseb, awood cusebna siiyey, laakiin waa waxyaalahan oo keliya ficilka Ibraahim looga baahnaa inuu Ilaah ugu adeegno sida uu uga adeegi jiray si ka weyn.

**8. Gudniinka wuxuu calaamad u ahaa ficilka badbaadada ee ku imaan doona Isra'iil.** Gudniinka wuxuu ka mid ahaa waxyaalaha calaamadda u ahaa dad qaas ah noqoshada dabadeedna quruun. Farcanka Ibraahim oo ahaa

kuwa ugu horeyey waxaa lagu tilmaamayey gudniinka. Tani waxay tilmaan u ahayd muhimadda ay quruunta ka leedahay taarikhda Badbaadada. Badbaadada waxay ku timid Yahuudda. Ibraahim waxaa lagu amray inuu gudo mid kastoo xiriir la leh qoyska Ibraahim. Waxay ahayd inuu gudo lab kasta (17:10), kuwa oo ay ku jiraan addoomada iyo kuwa martida ah (17:12, 13). Badbaadada waxay ku imaanaysa farcanka Ibraahim.

Gudniinka wuxuu ahaa mid lagu garanayey bulshada Ibraahim. Dhexdooda ayey ahayd inuu ka soo baxo kan ay barakadiisa adduunka oo dhan saamayn ku yeelan doonto. Gudniinka ma ahayn sida Baabtiiska biyaha (iyo hababka kale) oo wuxuu ahaa mid dadka lagu biirinayey qoyska adduunka, wuxuuna ahaa mid ku yimid farcanka Ibraahim iyo dabadeedna quruunta Israa'iil.

**9. Gudniinka wuxuu tilmaamayey in uu habka Badbaadada Ibraahim ku imanaysa ay ahayd habka keliya ee lagu helaya badbaadada.** Qof walboo doonayey inuu fahmo waxaa lagu dhihi jiray, 'Ishaarada farcanka Ibraahim ku dhacday ayaa ah habka keliya ee badbaadada lagu helaya oo lagu noolaan xaqnimada'. Tan ayaa Ibraahim ka dhigtay aabbaha rumaystayaasha oo dhan. Waxay Ibraahim u caleema saartay inuu ahaado kan badbaadada lagaga deyanaya, iyo kan ay rumaystayaasha rumaysadkooda ku cabirayaan. Ilaah wuxuu marka ugu horaysa Axdi la galay Ibraahim.





Dadka kalena axdigaasay isaga xiriir kula yesheen haddii aanay ahayn kuwa reerkiisa ka tirsan. Gudniinka ayaa iyaga fahansiiyey wax kasta: 'raaca waddada Ibraahim'. Waddadiisa badbaadada - ayaa ahayd habka lagu badbaadi lahaa iyo weliba habka keliya oo lagu cusbonaan lahaa si loo dhaxlo ballamada

**10. Gudniinka wuxuu shaqsi ahaan shabad u ahaa Ibraahim.** Ibraahim ahaan waxay hubnaasho ka siisay badabaadada uu helay. Ibraahim waxaa lagu yidhi, 'Tani waxay caddayn u tahay in wax alla wixii ku qabsaday ilaa hadda ay wax quman ahayeen. Tani waa habka badbaadada. Ku adkayso rumaysadka dhaxalkana waad heli doonta e'. Axdiga cuseb wuxuu noo sheegaya inuu gudniinka ballangal ku noqday rumaysadka uu Ibraahim lahaa (Rooma 4:11). Xagga noolosha Masixiinta shabaddan waxaa lagu fasiri kara ku shubidda Ruuxa Qoduuska ah ee lagu shubaaya rumaystayaasha (Efesos 1:13, 14).

Marka ugu horeysay ee gudniinka la caleema sarayey waxay ahayd wax aanan la bedeli karin oo qaas u ahaa Ibraahim oo keenayey badbaadada. Midda tan la midka ah oo rumaystayaasha maanta loogu tallagalay ma ahayn gudniin (gudniinka wuxuu shabad badbaado u ahaa oo keliya Ibraahim ma jirin qof kale oo gudniin shabadda badbaadada loogu dhigay). Ma ahayn baabtiiska biyaha kaa oo

aan runtii shabad u ahaani karin badbaadada. Shabadda waxaa Ruuxa Ilaah naftiisa. Gudniinka wuxuu Ruxa qoduuska ah kula jira baabtiiska. Marka Ibraahim la siinayey shabadda gudniinka waxay dedday xaqnimadiisa, waxayna calaamad u noqotay dhallashadiisa cuseb, wuxuuna ugu yeedhay addeecis heer sare ah. Dhacdada isla hawshaas ka qabanaysa noolosha Masixiinta waa shabadda Ruuxa Qoduuska ah ee Ilaah. Masixiinta mar dambe uma baahno gudniin. Qofka Masiixiga ah wuxuu leeyahay gudniin xaga qalbiga ah. Wuxuu qalbi gudan ka haysta Ciise wuxuuna haysta shabadda Ruuxa Qoduuska ah ee Ilaah.





***Cutubka 21aad***

# Taajirnimada Naxariista

(Bilawgii 17:15-27)

Dadka Baybalka sheedadooda la soo jeediyey oo dhan waxaa aad kuu soo jiidanaya sheekada Saaray ee aan buugga Bilawgii ka akhrisanayno. Ilaah wuxuu inta badan ku hawlsanaa Ibraahim. Marka ugu horaysay Ibraahim iyo Saaray waa qasab ballanta way u wada dhaxaysay ee ahayd inuu cunug dhexdooda ka soo bixi doono, ilawse eray qaas ah oo Saaray lagu yidhi ma jirin.

**1. Ilaah ayaa u naxariistay Saaray.** Inteena badan waxaa na soo martay marxalad ah inaan dareemeyno inuu qof kastoo dhan uu Ilaah barakadaynaya ee ma ahan annaga! Waxaa dhici kartaa inuu Ilaah ku shaqaynaya hab ka gedisan sida aan u malayneyno.
Waxaa jiraan habab qaas ah uu isu key muujinaya si aan ku ogaano inuu nala jiro laakiin waxaan u egnahay inaan noqonay kuwa uu Ilaah gaar ka maray. Tan ayaa ahayd marxaladda ku dhacday Saaray. Waxay ula ekayd inay wax kastama u samaanayeen Ibraahim oo wax xaggeeda ka socday ma lahan.

Ilaah dhabtii waa ku saxan yahay sida uu ballamadiisa u bixiyo oo markii siba loo eego si kala gedisan ayuu dadka ula dhaqmaa. Muddo ka

badan labaatan sanno ayuu Ilaah Ibraahim ballama siinayey oo uusan xataa hal siinin Saaray! Sanada yar kaddib ayuu Ibraahim bilaabay inuu ka hadlo sida uu u korsan lahaa wiil! Wuxuu ku fikirayey inaysan Saaray weligeed dhalli doonin oo wuxuu go'aansaday inuu korsado Celiezar, kaa oo ahaa nin isaga ugu adeegayey sida wiilkiisa (15:2). Sannada kaddib Saaray aad bay uga rajo beeshay wiilka la ballanqaaday waayo, waxay aragtay intaanay wiilkaas weligeed heli doonin waxayna ahayd fikiraddeeda inuu Aabraam la seexdo Haagaar si uu uga ilma dhalo (16:2).

Ibraahim wuxuu jiray sagaashan iyo sagaal (17:1), Saarayna waxay ahayd saddeetan iyo sagaal jir (17:17). Ilaah wuxuu u muuqday Ibraahim oo wuxuu ugu yeedhay inuu ku noolaado addeecis heer sare ah (17:1, 2). Ibraahim wuxuu tan ku jawaabay si farxad iyo rayrayn leh (17:3) dabadeedna Ilaah wuxuu ballaariyey ballamada uu Ibraahim la gelayey. Ballamada Ilaah dib bay u cusbonadeen. Midhta Ibraahim waxay noqon doontaa quruun dad badan leh (17:4). Ibraahim waxaa la siin doonaa awoodda uu ku ahaado aabbaha midhtaasi (17:5). Midho dhal cuseb ayaa jidhkiisa soo geli doonta (17:6). Boqora ayaa ka tirsanaan doona farcanada Ibraahim oo barakada la ballanqaadayna waxay ahaan doontaa mid weligeed jiri doonta (17:6, 7). Dhulka Kancaan oo dhan waxaa la siin doonaa farcanadiisa (17:8). Dabadeedna Ilaah ayaa Ibraahim u yeedhay si uu u siiyo xaqiiqda ballmada





uu la gelaya Ibraahim, gudniin ayaa lagu bilaabay nin kastoo bulshada Ibraahim ka tirsan (17:9-14). Hadda waxaa Ibraahim halkan ugu jirta farin dheraad ah oo muddo aad iyo aad u dheer dabadeedna waxaa timid farin faa'ido u ah Saaray (17:15,16)! Ilaah ma ahan oo keliya inuu Ibraahim waqlalayse Saarayna wuu waqlalay; wixii hadda ka dambaysa looguma yeedhi doono Saarayse waxaa loogu yeedhi doonaa Saarah.

Magacyadan waa laba hab oo kala duwan oo lagu macnaynaya 'Suldaanad'. Waxay u egtahay inuu Ilaah lahaa 'inay ahaan doonto Suldaanad'! Fikiradda Ilaah way ka saraysa fikirad kasta oo weligiis dadka oo dhan isku si wax ugama ballanqaado. In kastoo ay saa tahayna markaan daremeyno inuu Ilaah mudda gaaban dhinac naga maray, ballantiisa markay fusho waa tan ugu sareysa ee aan heli karno. Dhabtii Saarah waxay heshay ballanta ugu weynayd oo xataa tan Ibraahim ka sareysay. Muucjiso aad u weyn ma ahan inuu oday boqol jir ah naag uurayo uu dhalo wiil, laakiin qof kastoo maqla inay naag sagaashan jir ah uuraysatay ayaa ah kan muucjiso la kulmay! Ilaah wuxuu Saarah ka dhigay mid aad u dulqaadata laakiin markuu ugu dambaysti Ilaah u ficil galay Saarah wuxuu sameeyey wax aanan caadi u ahayn iyada.

Taasi waxay ahayd dhacdo ka weynayd dhacdooyinka Ibraahim ku dheceen ama Haagaar

ama uu qof kale weligiis maqlay. Ilaah si sharaf leh oo ay awoodi ku jirto oo ay weliba naxariis ku jirto ayuu kaga shaqayey noolosha Saarah iyo Ibraahim. Ilaah wuu u cafiyey iyada nacasnimadeeda iyo dulqaad la'aanteeda ay ku go'aansatay inay midiidinteeda hoos geyso Ibraahim, oo in kastoo ay qaladaad sameysay ballanta way u timid iyaga iyo Ibraahimba.

**2. Ilaah wuxuu u naxariistay Ibraahim.** In kastoo uu rumaysad la'aantis Haagaar ugu tegay, Ilaah wuu u naxariistay isaga. Muddada dheer uu Ilaah Ibraahim ka aamusnaa waxay ahayd farxaddarada uusan Ilaah ku farxin ficilka uu Ibraahim sameeyey, laakiin waxyaalahaas oo dhan waa loo cafiyey, oo Ilaah fursad kale ayuu siiyey Ibraahim si uu hawshii lala rabay u ficil geliyo.

Ibraahim wuxuu tan ku jawaabay duca iyo qosol (17:17). Wejigiisuu dhulka dhigay isagoo farxad iyo rayrayn ay ka buxaan oo la yaaban hababka Ilaah uu kula dhaqmay isaga. Wuxuu la qoslaya farxad iyo yaab. Waxaa kor loogu farxad sharaf iyo guul leh. Isagoo da'diisa oo dhan sugayey ugu dambaysta ballantii mar dhaw ayey fuli doontaa.
Saa ay tahayna Ibraahim si buuxda diyaar uguma ahayn inuu soo dhaweeyo jawaabtan degdegta ah oo noqotay natiijada rajooyinka. Wuxuu la qabsaday inay wax walba ahadaan siday ahaan jireen, maxaa yeelay, weli fikiraddii qaldanayd ee ahayd inuu Ismaciil yahay kan ballanta Ilaah lagu oofinaya





ayaa maskaxdiisa ku jirtay. Sidaa daraaddeed markii lagu ballamiyey inay Saarah wiil dhali doonto, Ibraahim wuxuu leeyahay, '*Waxaan jeclaan lahaa inuu Ismaciil hortaada ku noolaado!'* (17:18). Ibraahim waxaa aad maankiisa u gashay fikiradda ah inuu Ismaciil yahay 'midhta', oo inaba diyaar uma uusan ahayn inay ballanta ku timaaddo Saarah.

Wuxuu u bartay dabiicadda ku qancidda wax ka yar wuxuu Ilaah isaga u qorsheyey. Ma diiddana fikiradda ballanta Ilaah ee ah inay Saarah wiil dhalli doonta laakiin madaama uu isku dardarsamay wuxuu doonaya inuu Ismaaciilna ahaado midhta qorshaha ka tirsan.
Ilaah wuxuu halkan ka dhiibtay laba jawaab. Tan ugu horeysa ayaa waxay tahay 'waxaan ku dhawaaqay ma bedelaayo' **(Erayga Cibraaniga ee halkan lagu turjumay waa 'Haah' sida uu uga dhigan yahay turjumaadda Baybalka ee la yidhaahdo *New International Version* (NIVga) oo turjumaad kalena wuxuu ka yahay 'maya' sida ay ugu dhigan tahay New *Revised Standard Version* (NRSVga)!** Macnaha guud ee halkan ku jirta ayaa waxay tahay 'waxaan ku dhawaaqay ma bedelaayo!' Xaaskaaga Saarah ayaa kuu dhali doonta wiil, waxaadna ugu yeedhi doontaa Isxaaq (*"Wuu qoslaya").*

Isagaan Axdigayga ku fulinaya (17:19). Jawaabta labaad waxay ku saabsanayd Ismaciil. Ibraahim aad

buu Ismaciil ula dhacay oo rajadiisa oo dhan waxay ku wareegsan tahay Ismaciil. Ismaciil wuxuu ahaa wiilka keliya uu Ibraahim weligiis helay uuna haystay saddex iyo tobban sanno. Ismaciil ma in la inkiraa? Waa su'aal aan gadaal kaga hadli doono (eeg Bilawgii 25:12-18, iyo cutubka Bilawgii ugu dambeeya) laakiin Ilaah durbaba jawaab ayuu ka bixiyey arintan. Ilaah wuu barakadayn doonaa Ismaciil laakiin Ismaciil ma ahaan doono kan uu farcankiisa Ciise ku imaan doono, kaa oo ah midhta Ibraahim (17:20). Axdiga waxaa lagu oofinaya Isxaaq (17:21).

Ilaah heerkaas sare ayuu ugu naxariistay Ibraahim oo Ilaah wuu u fuliyey rajooyinka uu Ibraahim lahaa qaarkood. Ilaah mustaqbal wanaagsan ayuu u haya Ismaciil. In kastoo uu ficilkii uu Ibraahim Haagaar la seexday ay qorshaha uu Ilaah Isxaaq u leeyahay ay bedeli doonin, Ilaah wuxuu danaysan yahay inuu wax kasta wanaag kaga dhex shaqaya. Bilawgii 17:18 waxaa lagu jawaabi doonaa wax ka weyn waxyaalaha aan ku arkayno riyooyinkeena. Dadkii Ismaciil weli way jiraan. Quruumaha Carabta ee aan maanta arkayno waa farcanka Ismaciil. Ma ahan oo keliya inay quruunta Israa'iil maanta jirto, laakiin dadkii Ismaciilna weli way noolyihiin! Hadduu Ilaah qorsha gooni ah u leeyahay badbaadada Israa'iil oo dhan (Rooma 11:25, 26), runtii Ilaah qorsha ayuu u haya reer Ismaciil oo iyaguna way badbaadi doonaan! Haddii Israa'iil la barakadayn doono kuwaas oo lagu





jeclaaday awowayaashoodi hore (Rooma 11:28), runtii dadka Carabta ahna waa la barakadayn doonaa, waxayna noqdeen kuwa loogu naxariisanay oo lagu jeclaanaya Ibraahim daraaddiis madaama uu isagu u duceyey iyaga.

Naxariista layaabka leh ee Ibraahim waxaan arkayna iyadoo lagu arkaya natiija aan weligeed loo malaynin. Markuu wakhtiga kuwa aanan Yahuudda ahayn idlaado (Rooma 11:12), kuwa reer Ismaciilna halkaas way joogi doonaan iyaguna. Muujinta way idlaanaysa (17:22) oo Ibraahimna wuxuu horay u wadaya shuruudooyinkii lagu siiyey gudniinka uu gudi lahaa kuwa bulshadiisa ka tirsan oo dhan ((17:23) iyo kuwa guriga Ismaciil (17:24, 25). Cutubka wuxuu ku xirmaya arin ku saabsan addeecistiisa joogtada ah oo meel walba laga dareemaya (17:26, 27). Waa cutub aan ku arkayno xigmadda iyo naxariist Ilaah. Ilaah wuu awooda inuu wax kasta kaga dhex shaqeeyo wanaag. Wuu ka sara mari kara qaladaadkeena iyo nacasnimadeena oo dhan. *'Waayo, Ilaah kulli wuxuu ku wada xidhay caasinimo inuu u wada naxariisto kulli'* (Rooma 11:32).

***Cutubka 22aad***

# Ficil gelinta ballanta

(Bilawgii 18:1-15)

Wakhti xilli kuluul la joogo ayey kuwa ajinebi ah soo booqdeen tuulada Ibraahim (18:1). Wuxuu iyaga ku salaamay heer sharaf leh, isagoo iyaga ku ordaya oo muujinaya sida uu qalbi furan ugu soo dhaweynaya iyaga (18:2). Wuxuu iyaga ka codsatay inay muddo sii joogaan (18:3) wuxuuna diray in baaquli biya ah loo keeno si uu martida ugu caqo miidho, isagoo iyaga ku toosinaya geed ay ku harsan lahayeen (18:4). Way ogoladeen codsigiisa, oo inta ay nasanayeen Ibraahim wuxuu kutaliyey in cunto loo diyaariyo martida. Inta ay martida fadhiday bilcaanta waxay ku mushquulsanayd kariska cuntada martida (18:5-6).

Neef yar oo xayawaanada ka mid ah ayaa la gawracay si loo helo hilib martida loo kariyo (18:7) saacado dabadoodna martidii waa loo bixiyey cuntada. Ibraahimse lama uusan cuntaynin iyaga. Ibraahim iyaguu u garab taagnaa sida addoon ahaan ee ma uusan ahayn sida mid iyaga ka tirsan oo la cuntayn lahaa (18:8). Waxay ahayd hab lagu muujinayey qalbiga Ibraahim oo ahaa mid deeqsi iyo is hoosaysin leh. Marka ugu horeysay uu martida arkay ma uusan hubsanin dadkan kuwa ay





yihiin. Malaa’iga ayuu u adeegayey isagoo aanan ogayn (Cibraaniyada 13:2).

Haddii isbedel yar la suubiyo (biyaha waxay noqon karaan kuwa gacmaha lagu maydhan lahaa bedelkii cagaha, neefka la gawracayna wuxuu ahaan kara eray ee ma ahan weyl) aadi ayey u tahay in tuulooyinka Afrika iyo meelaha ka tirsan waddada koraya inay dhaqankan ku dhaqmaan maanta laakiin saa uma ahan waddadamada ka tirsan Yurubta ama Meerikaanka! Midda u eg inay la yaab tahay waxay tahay in qoraaga Cibraaniyada 13:2 uu erayadan maskaxda ku hayey markuu qorayey, *‘Ha illoobina inaad shisheeyaha marti qaaddaan, waayo, sidaas qaar baa malaa'igo u marti qaaday iyagoo aan ogayn.’*

**Mid ka mid ah barakooyinka ugu waweyna uu Ibraahim Ilaah ka helay waxay ku timid deeqsinimo uu kaga dhaqmay noolosha caadiga ah.** Isagoo aan ogayn ayuu si sharaf leh malaa’iga martiqaaday maxaa yeelay, deeqsinimada waxay u ahayd mid dhaqanka laga ogaa inay caadi tahay. Intay martida harsanaysay su’aal caadi ah ayaa la soo jeediyey oo ahayd ‘aaway Saarah?’ (18:9). Waxay ahayd mid lala yaabo. Magaceeday garanayeen! Markaasay caddaatay kuwa ay ahayeen maxaa yeelay, mid iyaga ka mid ah yaa ku hadlayey erayo culus sida isagoo Ilaah ah!

*'Hubaal waan kuu soo noqon doonaa markii xilligu soo wareego; oo bal ogow, naagtaada Saarah wiil bay dhali doontaaye. Saarahna way maqashay, iyadoo joogta iriddii teendhada oo ka dambaysay isaga'* (18:10). Erayada '*markii xilligu soo wareego'* ma ahan 'mar dhaw' ama 'isla wakhtigan sannadka dambe', laakiin waxaa lagu macnaynayey xiliga uurka la wado ama sagaalka bilood sida ay baniaadmiga u tahay. Saarah maalma yar gudahooda ayey ku uuraysan doontaa oo 'sida ay noolosha ku uurka ku idlaataba' cunugga waa dhallan doonaa. Hab fasireedkan waxaa lagu rumeyey 2 Boqorada 4:16-17 taa oo naag loogu sheegaya inay muddo sannad ku dhaw gudaheeda ay wiil dhali doonto 'markii xilligu soo wareego'. Waxay qaadanaysa muddo sagaal bilood ah ama ka badan intaanay cunugga beggeeda saarin. Erayada markii xilligu soo wareego' waxay halkan mar labaad fasiraad uga tahay xilligga ay naagta ku qaadanayso maalinta ay uuraysatay ilaa dhalmada oo aayadda tan ku xigta ayaa caddayn bixinaysa. Naagtii way uuraysatay oo wiil bay dhashay isla xilligii sanadka bilooyin umulidda kaddib *'Oo naagtiina way uuraysatay, oo wiil bay dhashay markii wakhtigii soo wareegay, oo waxay noqotay sidii Eliishaa iyada ku yidhi'* (2 Boqorradii 4:17). Tan micnaheedu waa inay muucjisada uur qaadka ay tahay mid dhici doonta maalma gudahooda. Cunugga wuxuu ahaa doonaa cunug-muucjiso; **in kastoo ay saa tahayna,** ma ahaan doono mid





bikrad ka dhashay sida uu Ciise bikrad uga dhashay!

Cunugga waxaa lagu uuraysan doonaa habka caadiga ahse Ilaah baa uuraysashada suurtagal ka dhigi doona. Siba haddii loo eego Isxaaq wuxuu ka dhallan doona jidhka; wuxuu ahaan doonaa natiijada ka soo baxaysa nin iyo naag iisu tegay. Laakiin dhinac kale haddii laga eego Isxaaq wuxuu ka dhallan doonaa Ruuxa Qoduuska ah ee Ilaah maxaa yeelay, Ilaah ayaa muucjisadiisa ku ficil gelin doona dhallashadiisa. In kastoo uu ahaan doona cunug muucjiso ku dhashay, wakhtiga caadiga ah ee ah sagaalka bilood ayuu ku dhallan doonaa isla sida carruurta kale.  Tan ayaa ah sababta uu Bawlos Isxaaq masaal uga soo qaatay markuu ka hadlayey ku dhallashada doonista Ruuxa Qoduuska ah (Galatiya 4:29). Waxay haddana la siman tahay wax baridda Bawlos oo ku saabsan dhacdooyinka hore loo yiqiin. Wax bariddan waxay ku saabsan tahay inuu Ilaah hore u yiqiin kuwa uu doortay.

Ilaah wuxuu Isxaaq u doortay inuu ahaado kan axdigiisa fulin doono. Isxaaq wuxuu ku dhallanaya axdiga (Galatiya 4:23). **Ballanta waxay soo saraysa carruurteeda!**  **'***Kuwa Isxaaq ka farcama ayaa farcankaaga loogu yeedhi doonaa.'* (Rooma 9:7). Tan waa fikirad laga soo xigtay book la yidhaahdo Lloyd-Jones' magnificent book, *Romans:* God's sovereign Purpose (Banner of Truth, 1991), Baalkiisa 108 – 115, iyo M.A. Eaton,

*Predistination and Israel (Paternoster, 1999), Cutubkiisa 7aad.*

**Ilaah wuu barakeeyey Saarah in kastoo ay ka liidatay xagga iimaanka.** Iridda teendada ay martida ku jirtay gadasheeda ayey ku dhagaysanaysay (18:10 qaybta labaad). Labadan is qabtan aad bay da'dooda u weynayd (18:11) oo Saarah yaab iyo shaki ayey qalbiga kaga qososhay (18:12 ) laakiin waxaa iyada canaanatay malaa'igta wax kasta garanaysa (18:13). In kastoo ay xagga iimaanka ka liidatay Ilaah wuu barakeeyey Saarah. Qosolka Ibraahim wuxuu u ekaa mid ay ka keensisay farxad qosolka Saarahse wuxuu ahaa mid ku yimid shaki ay ka qabtay wixii ay maqashay. Wakhti aad iyo aad u dheer ayey hore u haysatay oo ay aaminsanayd inay ballamada Ilaah run u noqon doonaan. Miyey noqon karta inay ballamadaas hadda fulayaan? Way ka yara shakiday. Saa ay tahayna Ilaah ayaa iyada canaananaya (*Miyey jiraan wax Ilaah la adag…?')* cabsi ayaana gashay markay dareentay inaysan rumaysanin waxay ku hadashay malaa'igta. Cabsideeda ayey ku inkirtay xataa wixii ay qalbigeeda ka niyeysnayd (18:14, 15). Laakiin qalbigeeda waad daacad oo sidaa daraaddeed waa inaan u naxno iyada. Sagaashan ii dhawr bay jirtaa silec badanna way kala kulantay ayey noolosha.

Dhacdadaas ayey Saarah ku rumaysatay ballanta. Iimaankeeda ayaa ka saramaray shakigeeda, Baybalka wuxuu xoogga saaraya inay iimaanka ay





qabtay ay ku heshay cunugga (21:1, 2). Waxay rumaysatay Erayga Ilaah. Barakada ay Saarah heshay wuxuu ahaa mid ku yimid deeqsinimadeeda iyo ku noolaanshaha addeecista Ilaah.

In kastoo ay aad u daahday ballantii way fushay. In kastoo ay xagga iimaanka ka liidatay ballanta way u fushay. Annagay maanta na haysata tan oo waxay nagu dhiiri gelinaysa inaan dhiiranaan ku rumaysano Ilaah. Silec aad u xun ayey la kulantay, rajadeedi oo aad u daahday, iimaan liita, iyo da'da oo sii weynaanaysa – laakiin Ilaah wuu ka soo gudbiyey waxyaalahaas oo dhan wayna heshay natiijada uu Ilaah ka lahaa noolosheeda.

***Cutubka 23aad***

# Ibraahim oo Sodom u duceynayo

(Bilawgii 18:16-33)

Tilmaanta tilmaanada ugu weyn ee noolosha lagu tilmaamo ka tirsan waa ducada, Ibraahimna wuxuu ka mid yahay kuwa looga deyan karo noolosha ducada leh isla sida ay noolosha Masixiinta u tahay. Bilawgii 18:16-33 waa ducada ugu dheer ee ugu horeysa ee ku jirta Baybalka, laakiin ma ahan marka ugu horeysa ee duca la soo magac qaadaya. Ilaah wuxuu ninka kula hadlay kula hadlay beerta Ceeden. Aadanna wuxuu kula hadlay daadkii kaddib (Bilawgii 3:12) iyo weliba Qaabiil (4:9) kuwan oo dhan way la hadleen Ilaah. Alla caabudka wadajirka ah wuxuu jiinsiga baniaadmiga ku bilawday wakhti aan dhaween (Bilawgii 4:26) Enookna wuu sii waday jaalnimadaas uu Ilaah la lahaa oo loogu yeedhay *'la socoshada Ilaah'* (Bilawgii 5:21-24). Ilaah wuxuu la hadlay Ibraahim, Ibraahimna wuxuu ku dhawaaqay magaca Ilaaha qaadirka ah (Bilawgii 12:1-3, 7; 13:4, 18) oo waxyaala qaas ah ayuu Ilaah ku hor geeyey duca (15:2, 3). Wuxuu ku ducaystay barya yar oo aan erayadeeda ka heleyno 17:18 laakiin hadda waxaan arkayna Ibraahim oo duca joogta ah oo mudda dheer qaadanaysa ducaysanaya.





Malaa'igaha jidkay ku jiraan oo waxay u socdaan Sodom. Saddex iyaga ka mid ah horay u soo booqdeen Ibraahim iyo Saarah (18:1); hadda laba iyaga ka mid ah ayaa u socdaalaya Sodom (19:1) laakiin malaa'igta Ilaaha qaadirka ah gadaal ayey ku hartay. Malaa'igta Ilaaha qaadirka ah waa Ilaah naftiisa oo ku yimid muuqaal malaa'ig. Malaa'igtan waxaa loogu yeedhi kara 'Ilaah' maxaa yeelay muulkaalkaas waa mid qaas ah oo metelaya Ilaah. Ibraahim wuxuu malaa'igaha ku arkay jidka markay u safrayeen Sodom (18:16), Ilaaha qaadirka ahna wuxuu go'aansaday inuu sirtiisa la qaybsado Ibraahim, (18:17). Ilaah ayaa Ibraahim doortay wuxuuna u qorsheyey inuu xaqnimadiisa heer sare ka dhigo, si uu u fuliyo ballanta isaga lagu keenay (18:18 – 19). Ilaah wuxuu qorsheynaya siduu Sodom ku baari lahaa (18:20, 21) oo uu ku sameyn lahaa wax alla wixii ku habboon in la sameeya ( 18:20, 21).

**1. Ducada dadka kale loo ducaynaya waa qayb ka tirsan hogaanimada.** Haddii ay tahay inuu Ibraahim noqdo hogaamiye sharaf iyo muhimad ka leh sheekada badbaadada, wuu ku qasban yahay inuu ahaado qof qalbiga ka jacayl inuu dadka kale marxaladahooda uga ducayo.

Hogaamiyaasha magacda leh oo dhan waa dad nooloshooda ay ku salaysan tahay ducada. Dadka xilka iska saara inay marxaladaha dadka kale uga duceyaan Baybalka loogama tilmaamin inay yihiin

dad qaas ah oo Kiniisadda ka tirsan. Masixiinta oo dhan waa inay ahadaan kuwa dadka u duceeya oo weliba hogaamiyaalka Kiniisadda waa inay ahadaan kuwa xilka iska saaray inay marxaladaha ay dadka kale ku jiraan uga duceeya waana inay noqdaan kuwa is hoosaysintooda ay ku muuqata ducada ay ducaynayaan. Ilaah wuxuu Ibraahim u xilsaaray inuu qalbigiisa ku qaado culaabta magaala baaba'aysa. Hogaamiyaalka waa inay noqdaan 'dad dadka ay hogaaminayaan Ilaah wakiil uga noqda' (Baxniintii 18:19, sheekada Muuse). Cabashadooda ayey Ilaah hor keenayaan (eeg Tirintii 27:5). Tani waa sawir weyn oo aan Baybalka kaga garan karno hogaamiyaasha noolosha Allabariga ku noolaa (eeg Baxniintii 32:30 – 32; Sharciga Kunoqoshadiisa 9:18, 19; 1 Boqorradii 13:6; 2 Boqorradii 19:4; Yeremyaah 7:16; 11:14; 14:11; Yooxanaa 17; Efesos 1:15-19, iyo weliba aayada kaloo Baybalka ka tirsan).

**2. Dadka kale u ducaynta waa sheyga ugu muhimsan ee aad qofna ka jeclaysan Karin.** Waxyaala badan oo aan Ilaah ugu adeegno maraha qaarkood xaasidnimo ayaa ku jirta. Waan isku farxinaa oo oo waxaa dhici karta maraha qaarkood inaan ku helno hambalaalyo.  Tusaaleh, wacdinta waxay farxad iyo hambalaalyo u tahay kuwa loogu yeedhay iny wacdiyaan. Laakiin sheyga keliya oo ay xaasidnimo ku jiri karin waa ducada dadka kale loo ducaynaya! Ibraahim kuma noola Sodom. Inkaarta Ilaah ee magaaladaas ku dhici doonta inaba





ka qusayso Ibraahim. Waa xaasidnimo la'aan, deeqsinimo iyo wanaag jacayl tan ka keentay inuu u duceeyo magaaladaas.

**3. Ducada dadka kale loo ducaynaya waa ficilka keliya uu qofka ku dhaqmi karo oo tilmaamaya is hoosaysinta qofka, haddii aadan qofna u sheegin.** Waxyaalaha aan inta badan Ilaah ugu adeegno waa kuwa aan dadka hortiisa ku samaynayno, laakiin ducada dadka kale loo ducaynaya waa inay ahaato mid sir ah. Qofka dadka u duceeya oona sheega inuu saa sameeyey wuxuu gefaya qayb ka tirsan barakada uu heli lahaa. Waa inaadan aayaddaan ku dhigan, *'Oo goortaad tukanaysaan, ha ahaanina sida laba wejiila-yaasha, waayo, waxay jecel yihiin inay tukadaan iyagoo taagan sunagogyada iyo meesha jidadku isku gooyaan si ay dadka ugu muuqdaan.*

*Runtii waxaan idinku leeyahay, Abaalgudkoodii way heleen'* (Matayos 6:5). Marka keliya oo aad Ilaah ka heleysid abaalka ficilkaas waa uun markaan samayno sida ku dhigan aayaddaan, *'Laakiin adigu goortaad tukanaysid, qolkaaga qarsoon gal, oo goortaad albaabkaaga xidhid, Aabbahaaga meesha  qarsoon ku jira bari, oo Aabbahaaga waxa qarsoon arka ayaa kuu abaalgudi doona'* (Matayos 6:6).  Ibraahim keligii buu ahaa markuu u duceynayey Sodom. Waa dhici kartaa inuu qoraal sameeyey oo uu muddo dabadeed dadka la qaybsaday siday wax u dheceen (maxaa

yeelay, maanta waxaan sheekada ka akhrinayna buugga Bilawgii!) laakiin marka ay dhacdadan dhacaysay waxay ahayd duca sir ah.

**4. Fursad qaali ah ayey kuu noqnaysa hadduu Ilaah kula qaybsado ducooyinka qalbigiisa ku jira.** Inta uu Ibraahim nabadgelyeynayey saddexda malaa'igood, Ilaah wuxuu go'aansanayey inuu culayska qalbigiisa saaran la qaybsado saaxibkiis Ibraahim. Ibraahim waa nin aad u deeqsi badan oo wuxuu sogootinayey martidiisa inta ay xaradiisa ka sii baxayeen (18:16). Mid ka mid ah malaa'igaha waxay si qaas ah wakiil uga ahayd Ilaah. Ilaah naftiisa ayaa ku yimid muuqaalka malaa'igta. Ma jiro qof Ilaah arki karo laakiin malaa'igaha way meteli karaan Ilaah iyagoo la arki karo. Hal shey oo ducada lagu tilmaami karo oo aan la fahmi karin ayaa waxay tahay sida la yaabka leh ee uu Ilaah ducada u aasaasay. Malaa'igaha waddooyinkooday qadeen ilawse malaa'igta Ilaah dib ayey u hartay.

Sheekada waa la soo gaabiyey laakiin fikiradda guud ee halkan ku jirta ayaa waxay tahay inaan fahanno inuu Ilaah doonayey inuu arintan u xilsaaro Ibraahim. Dabadeedna Ibraahim wuxuu bilaabay inuu Sodom ugu duceeyo inay naxariista Ilaah ku soo degto sababtoo ah waxaa dhici kartaa inay dad aan iin lahayn ku jiraan magaaladaas Rabbiga ku caasisay. Ilaah arinta oo dhan ayuu u xilsaaray Ibraahim oo wuxuu sugayey wuxuu Ibraahim ku ficilqaadi doono. Sidaa ayey tahay markaan ku





ducaysanayno '*Ruuxa Qoduuska ah ee Ilaah'*. Ilaah ayaa ah kan hogaanka haya. Waxyaala ayuu Ruuxa Qoduuska ah ee Ilaah nagu hor dhigaya wuxuuna sugaya inuu arko waxyaalaha aan ku ficilqaadi doonno. Waxaa dhici kartaa inuu Ilaah nala qaybsado sirtiisa. Waxaa dhici kartaa inuu na siiyo fahan aan horay u garanno waxyaalaha dhici doona. Haddii uu Ilaah saa sameeyo ma dhacayso inuu noogu talagalay inaan markastaba adduunka kale la qaybsano waxyaalahaas uu noo muujiyey uu doonaya inuu dhawaan samayn doono.

Markuu Ilaah fursad noocan ah na siinaya inta badan waa mar ay nagu habboontahay inaan ducaysano. Maraha qaarkood Ilaah wuxuu noo muujin kara dhacdo **lagayaaba** inay dhici doonto oo wuxuu doonaya inaan ducaysano si aanay dhacdadaasi **u dhicin** (sida ay uga dhigan tahay Caamoos 7:1-3). Ilaah weliba si joogta ah ayuu u xukumaya baryada. Halkaas ayuu Ibraahim ku hor joogaya in alla inta mudda ah Uu jacaylyahay Inuu joogo, Inta uu Ibraahim marxaladdas kaga ducaynaya (18:22-32), dabadeedna 'Ilaah wuu bogay waxyaalihii Uu kala hadlayey Ibraahim' wuuna 'ka tegay'.

Ka fiirso lama odhan 'Ibraahim wuu bogay wuxuu kala hadlayey Ilaah'; waxay leedahay Ilaah wuu bogay wuxuu kala hadlayey Ibraahim. Tan waa qaybta layaabka ee ducada lagu tilmaami karo. In kastoo **aan** samaynayno ficilka ducada, waa run oo

weli Ilaah si layaab leh ayuu ducadeena u hogaaminaya. Tani waa qayb ka tirsan waxyaalaha la yidhaahdo ‘ku tukashada Ruuxa Qoduuska ah ee Ilaah’. Isagaa na siinaya waxyaalaha aan ka tukanayno. Oo Isagaa hogaanka haya bilawga tukashada, dhex bartanka marka la joogana Isagaa amar bixinaya sida ay tukashada ku dhamaan lahayd.



Wacdinta Erayga Ilaah ku salaysan: Bilawgii 12-23

***Cutubka 24aad***

# Ducada Deeqsiga leh

(Bilawgii 18:16-33)

Waxaa jiraan ducooyin kala duwan.

1. Waxaa jirta ducada saraysinta Ilaah, taa oo aan ku muujinayno sharafta iyo jacaylka aan u qabno Ilaah.

2. Waxaa jirta ducada qirashada taa oo aan ku asmacayno inaan nahay kuwa iin leh oo weliba waxaan qiranayna waxyaalaha aan ku dhaqannay oo xiriirkeena iyo Ilaah burburiyey.

3. Waxaa jirta ducada aan baahideena Ilaah ku hor geynayno.

4. Waxaa jirta ducada mahad celinta ee aan Ilaah ugu mahad celinayno wax kasta uu nagu deeqay.

5. Laakiin waxaa jirta duca kaloo qaas ah: u tukashada baahida dadka kale

Baraka qaas ah ayaan ka heleyna ducada deeqsiga leh. Ducada deeqsiga leh ma ahan wax loo xilsaaray dad qaas ah oo u sameyaan sida wakhti dhaafiskooda ay jacayl yihiin. Waxaa shey ay Masixiinta oo dhan sameyn karaan. Waxay ka mid

tahay calamooyinka nagu tilmaamaya inaan nahay ‘carruurta Ibraahim’. Markuu Ibraahim u duceyey naagtii madhashada ahayd ee Abemeleek, Ibraahim naftiisa ayaa durbaba helay baraka qaas ah; xaaskiisi madhalaysta ahayd way uuraysatay (Bilawgii 20:17 – 21:2). Waa barakada deeqsiga leh uu Abemeleek u duceynayey tan uu naftiisa ku barakoobay ama duca u noqotay Ibraahim. ‘*Rabbiga ayaa Ayuub axwaalkiisii bedelay markuu saaxibbadiis u duceeyey’* sida ku dhigan Ayuub 42:10aad.

**5. Ducada dhabta ah waxay ku bilaabanaysa xiriirka Ilaah lala leeyahay oo la wanaajiyo si Isaga ‘loogu dhawaada’.** Ibraahim Ilaah buu u dhawaaday, sida ku dhigan Bilawgii 18:23. Sheyga ugu horeeya eed ku dhaqaqeysid intaadan duceeysanin waa ‘ku dhawaanshada Ilaah’. Tani macnaheedu waa inaad cagtaada saraysid qolka carshiga Ilaah. Waxaad dhex tageysa jiritaankiisa. Shaki kuma jiro Ilaah meel walbuu joogaa oo weliba wakhti kastaa la helaya, iyadoo ay saa tahayna waxaa jirta arinta ah in ‘loo dhawaada Ilaah’.

Sida ku habboon ee tan lagu fahmi karo waa uun inaad ficilgelisid fikiradda! Waa marka aad adiga Ruuxa Qoduuska ah ee Ilaah la ag imaanaysid Ilaah hortiisa. Waad fahansan tahay inuu ku maqlaya. Shaki kaagama jiro inuu Ilaah baryooyinkaada iyo saraysinta aad Isaga saraysinaysid, iyo codsiga aad





Isaga ka codsanaysid iyo weliba waxyaalaha aad ka cabsanaysid.

**6. Ducada dhabta ah waa mid ay dood ku jirto.** Waxaan daremeyna inuu Ilaah soo jeedinaya sababo iyo doodo uu u soo jeedinaya Ilaah. Wuxuu yidhi, runtii Ilaahayow xaqdarra kuma dhaqmaysid. Ilaah ma danaynaya haddii aan sababa badan ula nimaadno oo ah sababta aan u rabno in baryooyinkeena laga jawaabo.

**7. Ducada dhabta ah waxaa isugu jira dhiiranaan iyo is hoosaysiin.** Ibraahim dhiiranaan ayuu meela kala duwan ku tegay, isagoo Ilaah weydisanaya waxyaala dheraad ah. Habab dhiiranaan leh ayuu ku ducaysanayey. Saa ay tahayna isagu is hoosaysiin ayuu lahaa oo wuxuuna dareensana inuu waxyaala badan weydisanaya oo wuxuu yidhi, ‘waxaan ahayd ciid iyo dambas’, sida ku dhigan Bilawgii 18:27). ‘Fadlan Ilaah yuusan igu xanaaqin’ (18:30). Ilaah yuusan igu xanaaqin; oo weliba waan hadlaya mar labaad (18:32). Baybalka wuxuu noo sheegaya inuu Ilaah yahay ‘*dab wax baabi’iya’* oo weliba Baybalka wuxuu sii leeyahay aan Isaga ugu tagno dhiiranaan! Side buu qof dhiiranaan ugu dhawaan karaya dab wax baabi’inaya? Saa ay tahayna waa amarka nala siiyey inaan sameyno.

**8. Waxaa jirta arin loogu yeedhay ducada ‘joogtada ah’.** Ibraahim tusaala wanaagsan ayuu naga siiyey halkan. Xaalada kala duwan ayuu Ilaah

ka codsanayey. Markuu qaybta jawaabtiisa helo codsiga kale ayuu kaga sii gudbaayey. Waa maxay sababta aan saan u duceeysanayno? Habkan wuxuu xoojinaya iimaankeenna. Maraha qaarkood waxaan darenaa inaanan awoodin inaan waxyaalaha kala duwan hal mar codsano. Waxaan darennaa inay sahlan tahay inaan waxyaalaha qiimaha yar u duceeyna dabadeedna markuu Ilaah na maqlo, waxaan lahaaneyna iimaan sugan oo aan dhiiranaan kaga ducaysano waxyaalaha waweyn. Inta aan sii duceeysanayno heerka aan joognay heer ka weyn ayaan kaga gudbeyna. Waxaanna daremeyna inuu iimaankeena uu ka sugan yahay heerkii hore oo aan awoodno inaan waxyaala waweyn aan Ilaah weydisano. Jawaabta aan qayb baryadeena ka tirsan u heleyno waxay nagu abuureysa hamiga aan ku dhiirananayno inaan waxyaala kuwaas ka weyn aan Rabbiga ka codsano. Waa duca joogta ah.

**9. Waa inaan issu diyaarino jawaabta uu Ilaah baryadeena doonistiisa uga jawaabi doono.**
Waxaa dhici karta inaan weydino su'aasha ah: Ilaah miyuu baryadan ka jawaabay? Cutubkan waxaan ka arkayna in inkastoo uu Ibraahim Sodom u duceeyey ay dhacday inuu Ilaah Sodom baabi'iyo. Marka maxaa qiima ah oo ku jiray ducada uu Ibraahim u duceeynayey kuwa xaqnimada ku dhamaayey ee deganaa Sodom? Jawaabta waxay tahay, xataa tobban ruux oo xaq ah kuma jirin Sodom! Ibraahim wuu joojiyey ducada – amaba waxaa dhici kartaa inuu Ilaah ka joojiyey inuu duceeyo – oo aan ka





ahayn inuu u duceeyo inay inkaarta Ilaah magaaladaas ka leexato haddii ay jiraan tobban ruux oo xaq ah oo ku nool magaaladaas. Laakiin kuwa xaqa ah waa la badbaadiyey. Luut waxaa badbaadiyeen malaa'igo (Bilawgii 19:16) taa oo runtii ahayd natiijada ducada Ibraahim. Luut wuu iska bodboodayey oo wuxuu u malaynayey inaan magaalada la baabi'in doonin. Luut wuxuu ahaa nin uu rumaysadkiisa sugneyn oo iska jeclaa magaalada Sodom.

Ilaah wuu awooday inuu Luut la baabi'iyo kuwa aan xaqa ahayn uu kula noolaa magaaladaas uu jeclaaday Luut. Laakiin Ilaah ayaa isaga u naxariistay sida aan uga akhrinayno Bilawgii 19:16. Tan waxay na baraysa inaan diyaar u ahaano inuu Ilaah siduu doono uga jawaabo ducadeena. Jawaabta Ilaah waxay ku imaan karta hab aanan filanaynin. Go'aanka uu qalbigiisa ka gaaray inuu duceeyo duca deeqsi leh, Ibraahim waa sida Ciise, maxaa yeelay, kan ugu weyn ee ducada deeqsiga leh duceeyey waa Ciise. Ilaa haatan ayuu Ciise ducadaasi deeqsiga leh noo duceeynaya.

Qof kastoo Masiixi ah wuu ogyahay inuu Ciise gacanta midigta ah ee Ilaah fadhiyo oo uu noo duceeynaya ducadaasi deeqsiga leh. Ma ahan inuu Ciise baryootamaya laakiin Ilaah ayuu si codsi ah noola hadlaya oo waxyaala noo wanaagsan ayuu kala hadlaya. Waan qumannahay markaan ducadan ugu yedheyno 'duca deeqsi leh'. Ciise waxyaalaha

aan runtii u baahannahay ayuu Ilaah nooga baryaya. Wuxuu nooga duceeynaya inuusan sheedaanka na duufsanin, inaan midnimo ku noolaano, inuu iimaankeena sugnaado. Sababta keliya ee ka dhigeysa qofka Masiixiga ah inuu noolaado waa rajada uu ku leeyahay duceeyahaasi sare ee ugu duceeynaya ducada deeqsiga leh. In kastoo ay saa tahayna, ducada deeqsiga leh Ciise wuxuu ku fulinaya Kiniisaddiisa.

Ruuxiisa Qoduuska ah ayuu nagu hogaaminaya si aan u lahaano jacaylka iisu duceeynta, iyo isla sidaanna ducadiisa deeqsiga leh Ayuu nagu istecmaalaya si aan u ahaano qalab uu istecmaalo uu ku duceeyo ducadaasi. Ducada habkan loo duceysto waa sheyga ugu sareeya ee uu qof Ilaah ku xiran weligiis sameyn karo. Ducadan waxaa lagu tilmaamaya Ilaah iyo Ciise. Runtii waa noolosha Masiixa. Sababtan iyo kuwa kale oo aan halkan ku sheegin ayaa naga dhigaya inaan ahaano ‘carruurta Ibraahim’.





***Cutubka 25aad***

# Ku Badbaadidda Dabka

(Bilawgii 19:1-9)

Sheekada ku saabsan baabi’inta Sodom iyo Gomorah waa masiibada labaad ee ugu weynayd uu Ilaah adduunka ku soo dejiyey iyadoo ay tan kowaad tahay tii uu Ilaah dadka ku laayey daadka.

**1. Bulshada heer daran ayey shar ku dhaqasheeda ka gaari karta ilaa uu Ilaah ka gaaraya heer uusan dib uga noqonaynin xukunkiisa.** Ilaah muddo gaaban unbuu bulsha ku dayni kara si ay sharka ugu dhaqato, Isagoo aanan go’aansanaynin inuu baabi’iyo bulshadaasi. Laakiin waxaa jirta heer ay bulshada caasinimadeena ka gaareyso ilaa uu Ilaah dib uga noqonaynin ficilka edbinta uu bulshadaas baabi’inaya. Ficilka qaniisnimada ee ay bulshada si daran ugu dhaqmaysa iyadoo aan wax cabsi Ilaah qabin waxay calaamad u tahay inkaarta Ilaah eek u soo degan doonta bulshadaas. Xukunka Ilaah eek u soo degayey Sodom si tartiib ah ayuu u soo dhawaanayey. Sodom iyo Gomorah waxay ku dhawyihiin xiliga loo baabi’in lahaa falka caasinimada ee ay sameyeen iyo Alla ka cabsasho la’aanta ay ku dhaqmeen awgiis. Ilaah muddo dheer ayuu u dulqataa intuusan edbinin caasinimada baniaadmiga. Waa fikirad qaldan sida ay Masixiinta inta badan ku fikiran iyagoo u malaynayaan in kuwa

xaqa ah ay mudda gaaban gudaheeda ku barakoobi doonaan oo kuwa aan xaqa ahayna mudda gaaban gudaheeda lagu ciqaabi doono. Inta badan Ilaah habkaas kuma shaqayo.

Ilaah inta badan hadiyadda uu kuwa xaqa ah u hayo wuu daahiya oo weliba Ilaah wuu daahiya ciqaabtuu u hayo kuwa aan xaqa ahayn. Ilaah wuu u dulqaatay Sodom laakiin waxay taarikhdeeda ka gaartay heer uusan Ilaah mar dambe iyaga u dulqaadanaynin. Ilaah wuxuu gaaray heer uu Sodom adduunka ka firgooyo. Ku dhaqashada qaniisnimada meela kale ayaa jiraan oo Baybalka lagaga sheegaya oo aan ka ahayn Bilawgii 19 (eeg Laawiyiinta 18:22; 20:13; Xakiinada 19; Rooma 1:26, 27; 1 Korintoos 6:9 – 11; 1 Timoteyos 1:9 – 10). Inta badan aayadahan waxay sheegayan inay qaniisnimada tahay shar ka mid ah kuwa ugu weyn. Rooma cutubka 1aad waxay sharaxaysa hababka kala duwan ee ay quruumaha ku qurmaan. Markay quruun caasinimada caadiga ah ka jeesanayno oo ay u gudbayso kuwa aanan caadiga ahayn, oo ay ogolaanayso inay xalaalteyso qaniisnimada, xukunka Ilaah kama foga quruuntaas. Luukos 17:28 – 30 waxay na ogaysinaysa inay waxyaalahan ka mid yihiin kuwa lagu ogaanaya dhamaadka adduunka.

**2. Waa arin aad u daran marka carruurta Ilaah ay ciqaabta Ilaah adduunka kula kulmayso.** Malaa'igta ayaa u timid inay magaalada xukunto oo





intaanay falkeeda ku dhaqaaqin waxay degniin siisay Luut dabadeedna caradii Ilaah ayaa ku roobtay Sodom (19:1a). Luut wuxuu fadhiyey iridda magaalada. Wuxuu noqday mid jeclaaday fursadda uu uga tirsan yahay magaalada iyo weliba sida uu magaalada caan uga noqday. Iridda magaalada waxay ahayd meesha ay dadka caanka ah beecmushtarigooda ku sameynayeen. Waxaan Baybalka ka akhrisanayna inay ka qayb qaadashada caasinimada adduunka ay sahlan tahay laakiin haddii ay dhacdo inaan ka qayb qaadano, waxaan iyaduna ka qayb qaadanayna xukunka adduunka.

Rasuul Bawlos wuxuu ka digaya *'Laakiinse sida ay qoduusiinta ugu eg tahay, marnaba yaan dhexdiinna laga sheegin **sino**, iyo **wasakh** oo dhan, iyo **damacnimo**, 4 iyo **ceeb**, iyo **hadal nacasnimo ah**, iyo **kaftan bilaash ah**, oo aan idinku habboonayn, laakiinse waxaa idinku wacan mahadnaqid. 6 Ninnaba yuusan idinku khiyaanayn hadal an micne lahayn; waayo, waxyaalahaas daraaddood ayaa cadhada Ilaah ugu soo degtaa carruurta caasinimada'* (Efesos 5:3, 4, 6). Wuxuu haddana Rasuul Bawlos leeyahay, *'**Sidaas daraaddeed** ha ahaanina kuwa iyaga waxyaalahaas la qaybsada; waayo, mar baad ahaydeen gudcur…'* (Efesos 5:7aad). Haddii ay dhacdo inuu qofka Masiixiga ah dadka adduunka kala qayb qaato caasinimada adduunka yuusan ilawbin inuu iyaga kala qayb qaadan doono

xukunka lagu soo dejin doono. Waxaa ‘xanuunjin’ doonta dhimashada labaad (Muujintii 2:11).

Wax saa u sii weyn oo xaqnimo ah uu Luut Sodom ka sameynayey ma jiraan. Maraqfur qiima leh uu Luut Sodom ku lahaa ma jirto. Waxyaala badan oo qiima leh ayuu Ibraahim Sodom u sameeyey ka badan inta uu Luut oo Sodomta dhex deganaa magaaladaas u sameeyey. Ma ayaa jirtay uu Ibraahim macaawino ka bixiyey Sodom taa oo ahayd mar uu ilma adeertiis ka badbaadiyey boqoradii bariga (Bilawgii 14:1-24). Mar kalena wuxuu u duceeyey Sodom sida ku dhigan Bilawgii 18:16-33. Ilaah wuxuu Ibraahim ku amray inuu duca deeqsi leh uga duceeyo Sodom, saa ay tahayna Ilaah kuma uu amrin Luut inuu hawshaas u duceeynta Sodom sameeyo. Luut ‘nimankuu’ si degan ku salaamay oo uu ku caasumay gurigiisa (19:1b – 2a). waxay doonayeen inay habbenkas dibadda baryaan (19:2b) laakiin Luut wuxuu ogaa inay taasi naftooda khatar u tahay (19:3). Habbeenkii nimanka oo dhan waxay ku ag hareersanyeen guriga (19:4).

Luut aad buu uga baaba’ay xagga xiriirka uu Ilaah la lahaa. Dhibaasi oo dhanna wuxuu bilawday markuu go’aansaday inuu taajirnimada adduunka helo. Bilawgii 13:1-13 waxaan ka akhrinayna inay jirtay mar ay addoomaha Luut iyo kuwa Ibraahim uu khilaaf ka dhex taagnaa. Luut wuxuu go’aansaday inuu lahaado qaybta dhulka ugu





deeqsiga badnayd, ileen wuxuu doortay inuu ka ag dhawaada Sodom (13:12), kama uusan taxadirin khatarta ka soo gaari doonto xaga xiriirka uu Ilaah la leeyahay. Mudda gaaban gudaheeda waxaan arkayna isagoo ku nool Sodom (14:12). Wuxuu qumaati iisu dhiibay uu dhex degay magaala Ilaah kiraahiyo ku noqotay, aad buuna u jeclaystay joogidda halkaas. Dadka qaarkiis waxay jacayl yihiin inay ku noladaan magaalooyinka taajirnimada adduunka ku dhereeya.

Laakiin waxay ka war lahayn inay u gacan gelayaan ka fogaashada Ilaah markay farxadda noocaas ah qalbiyadooda kula stareexayaan. Masixiinta inta badan ee hoygooda ka dhigtaan waddadama dhaqaalaha adduunka ku dheereya xiriirka ay Ilaah la leeyihiin wuu burbura. Waxay xoogga saarayan sida ay taajirnimada adduunka ku heli lahayeen laakiin waxay waynayaan boqortooyada Ilaah. Ibraahim wuxuu lahaa oo keliya teendho. Luutse wuxuu lahaa guri (19:3). Ibraahim wuxuu niyeysnaa oo uu unoolaa magaala samada ku taala; Luutse wuxuu u noolaa magaala adduunkan baaba’aya ku taala. Waddooyinka Sodom habbeenki lama mari karin nabadgelyada aan sugnayn daraaddeed Luutna wuu ogaa arintan. Durbaba waxaan arkayna inuusan dadka gurigiisana nabad ku heleynin. Tirade nimanka ayaa magaalada ku batay oo durbaba gurigiisana waa la soo garaacayey. Waxay doonayeen inay si xun ula dhaqmaan kuwa cuseb ee magaalada soo galayey (19:4, 5).

Si joogta ah oo ceeb la'aan ah ayey dadka u dhibayeen. Si kastoo uu Luut iyaga ula baryootamayna wax wanaag ah ama isbedel ah ee ay keentay ma jirin (19:6-8). Ma jirin wax isbedel ah uu Luut dadka ku samayn kari (19:9). Waxaa dhici kartaa inuu Luut Sodom u aaday isagoo damacsan sida uu magaaladaas wakiilka Ilaah oo dadka u maragfuraya inuu noqdo, laakiin arinta sida uu rabbay ma noqon. Qofka rogrogmada weligiis ma noqon karo mid maragfur gala.

**3. Luut waa la samata bixiyey in kastoo uu habab badan kaga rogrogmaday doonista Ilaah.**
Ilaah wuu yaqaana sida uu kuwa xaqa ah ku badbaadiyo sida aan uga akhrin karnaba 2 Butros 2:9, Madaama aan hadda ku dhawaaqay 'Ilaah wuxuu badbaadiyey Luut oo ahaa nin xaq ah' (2:Butros 2:7). Haddii uu Butros qori lahayn way nagu adkaan lahayd inaan weligeen aamino inuu Luut nin xaq ah ahaa inaba! Haba ahaatee, Luut waa la badbaadiyey – laakiin waxaa lagu badbaadiyey dab (1 Korintos 3:15). Badbaadada uu Ilaah ka helay ma aysan ka lumen laakiin ku dhawaan wax kastoo uu lahaa oo dhan way ka lumeen. Wuu lumiyey wanaagga uu lahaa oo dhan, sharaftiisi, farxaddiisi. Wuu lumiyey naagtiisi. Caruurtiisina waxay isaga ku noqdeen kiraahiyo. Madaama ku badbaadidda dabka waa dhacdo aad u xun. Waxay ka wanaagsanayd inuu 'Sodom' durba ka soo baxo. Hadduu Luut Sodom ka soo bixi lahaa ciqaabta





Ilaah ka hore oo uu u adeegi lahaa Ilaah, waa la badbaadin lahaa.

Habka cafiska iyo dib u soo celinta lagu helaya muddo dheer ayuu noo banaanyahay, laakiin maalin waxaa imaan doona malaa'igaha ciqaabta Ilaah, waxaanna bilabeyna inaan ka midho goosano wixii aan beeranay. Ilaah wuu badbaadiyey 'Luutkii xaqa ahaa' laakiin waxay ka sii fiicnaan lahayd in marka horeba uusan aadin magaaladaas Ilaah ku caasisay.

***Cutubka 26aad***

# Sodom iyo Gomora

(Bilawgii 19:10-38)

Luut waa laga badbaadiyey ninankii caasiyiinta ahaa ee ku noolaa Sodom. Malaa'igihii ayaa isaga dib ugu jiiday guriga (19:10), dadkiina aragtidoodi way baaba'day oo nooc indho la'aan ah ayaa ku dhacday (19:11).  Laga yaaba sida sheekada ku dhigan 2 Xakiinada 6:18-20 ma ahan indho la'aanta runta ah ee aan naqaana laakiin waxay ahayd sida qofka oo isku dardarsama oo garan waaya halkuu joogo. Durbaba waxaa caddaatay inuu Luut noqday nin uu reerkiisa ka amar qaadanaynin (19:12 – 14). Markuu isku deyo inuu wiilashiisa uga digo anshax xumada jirtay waxay u malaynayan inuu kaftamaya. Sidee bay ku dhici karta in nin Sodom ku nool uu dadka uga digo anshax xumada halkaas ka jirta?

Luut wuu rumaysan la'yahay in Sodomta uu jeclaa la edbin doono. Agagaarkaas ayuu joogay isagoo rajeynaya inaysan saa ahaanin oo ay wax isbedelan si uu u lahaado fursad uu Sodom ugu nolaado. Wuxuu is rajeynayey inuu Ilaah niyaddiisa bedelo! Laakiin Sodom ma ahan Ninefedii Yuunis! Ninefedii Yuunis waxay haysatay fursad ay ku toobadkeento; Sodom waxay gaartay heer aan mar dambe laga sugaynin toobadkeenkeeda. Malaa'igihii waxay ku qasbanayeen inay Luut dibadda uga jidaan magaalada (19:15-16).





Dabadeedna waxay siyeen degniin culus. *'Oo markay dibadda u soo bixiyeen ayuu ku yidhi, Naftaada la baxso; gadaashaadana ha eegin. Bannaanka oo dhanna ha joogsan, ee buurta u baxso, waaba intaas oo aad baabba'daaye'* (19:17aad).

Saa ay tahayna, Luut wuxuu weli jeclaa inuu ku nolaado qayb ka tirsan noolashii Sodom! Waxaa jirtay magaala yar oo aan aad uga fogayn Sodom. Wuxuuna yidhi, fadlan qaybtan yar ee Sodom ka tirsan miyey noqon kartaa meel nabadgalyadeyda oo keliya sugi karta? *'Miyaanay mid yar ahayn?'* (19:18-20). Luut aad buu ugu dhex dhiimbaday nolosha sharka ah ee ay reer Sodom ku dhaqmayeen. Way u noqotay sida uu rabbayse kuma ay habboonayn inuu xulashadaas sameeyo (19:21-23). Dabadeedna xukunkii Ilaah ayaa yimid. Caradaasi Ilaah aad bay u baabi'isay magaalada Sodom iyo waxa agagaarkeeda jooga oo dhan (19:24, 25). Naagtii Luut ayaa dib eegtay. Waxayna la qaybsatay xukunkii lagu soo dejiyey magaalada (19:26). Maalinta xigtay, ficilkii Ilaah wuu joogsadayse wax la arki karo oo magaaladii ka soo haray ma jirin oo aan ka ahayn qiiq culus. Qiiqa wuxuu ahaa natiijada silcinta ay ka midho guranayeen caasinimada ay Ilaah ku caasiyeen. In kastoo uu ficilka edbinta uu Ilaah iyaga edbinayey idlaaday, weli qiiqi waa baxayey (19:27, 28).

Magaalooyinka oo dhan waa la baaba'shey (19:29). Ibraahim wuu badbaaday. Luutse wuxuu ku badbaaday dab. Naagtii Luut kama dhab ahaantii kama aysan qaybqaadan cadaabta reer Sodom laakiin way naf go'day. Sagaalka aayadood ee ugu dambeeya waxay noo sheegayaan sida ay sheekada Luut ku dhamaatay. Wuxuu ku nolaa cabsi. Weligiis kuma uusan noolan Socar oo ahayd meel uu u 'duceeynayey' hase ahaatee, ducadaasi way badbaadisay dhulkaas la yidhaahdo Socar (19:30). Wuu lumiyey wax kasta, naagtiisa, gurigiisa, wax alla wixii hanti ah uu lahaa, oo durbaba waxay ahayd inuuba anshax xumo ku dhaqmo, oo waxaa baaba'ayey sharafta uu lahaa iyo magacaba. Yaanan weligeed lagu dhawaaqin ku badbaadidda dabka inuu yahay ficil sahlan  ama wax uu qofka dooran karo. Waddada kuwa aan xaqa ahayn way xuntahay oo weliba waddada kuwa aan xaqa ahayn ee badbaadana aad bay u daran tahay. Luutkii 'Xaqa' ahaa ugu dambaystii wuxuu noqday mid Ilaah addeeca waxaanna kula kulmi doonaa jannada laakiin noloshiisa waxay ku dhamaatay hab aad u xun. Gabdhahiisa ayaa sakhraansiyeen isaga (19:31) oo isagoo sakhraansan ayuu gabdhahiisa la seexda kana sinaystay (19:32-36). Dadkii Moo'aab iyo Cammoonna waxay ahayeen farcankiisa (19:37, 38).

Edbinta ku dhacday Sodom iyo Gomora waa calaamad nagula tusaya waxa ay u ekaan doonto cadaabta uu Ilaah ku cadaabi doono kuwa Isaga ku





caasin doono oon aan toobadkeeneynin oo dhan. Injiilka sida uu Luukos 17:28-30 ugu qoran yahay ayaa tan noo xoojinaysa ee leh, "*28Sidaas oo kale ayay weliba ahayd maalmihii Luut. Wax bay cuni jireen oo cabbi jireen, wax bayna iibsan jireen oo iibin jireen, oo beeran jireen, oo dhisan jireen. 29 Laakiin maalintii  Luut ka baxay Sodom ayay dab iyo baaruud cirka kaga soo daateen oo wada baabi'iyeen. 30 Si la mid ah ayay noqon doontaa maalinta Wiilka Aadanahu soo muuqdo".*

**1. Tan waa sawir aan ku garanayno edbinta ebedanka ah.** Dabka iyo baaruudka uu Ilaah Sodom ku edbiyey waa sheyga dabka cadaabta lagu shidi doono ama kan xukumaadda maalinta qiyaamaha dadka lagu cadaabi doono.
Yuudaas wuxuu yidhi, *'Si la mid ah Sodom iyo Gomora iyo magaalooyinkii kale eek u wareegsanaa oo sinaystay oo jidh kale uga daba orday, ayaa masaal laga dhigay, iyagoo ciqaabta dabka weligiis ah ku silcaya'* (Yuudaas aayadda 7aad). Sharciga Kunoqoshadiisa 29:23 waxaa qoran sida tan,  *'iyo in dalka oo dhammu yahay baaruud, iyo cusbo, iyo meel guban, oo aan waxba lagu beerin, aanna dhalin, oo aan cawsna ka bixin innaba sidii markii la afgenbiyey Sodom iyo Gomora, iyo Admaah iyo Seboyim oo Rabbigu ku afgenbiyey cadhadiisa iyo xanaaqiisa.'*

**2. Waa sawir noo caddaynaya badbaadada lagu helaya dabka.** Luut waxaa lagu soo dhex kaxeeyey

dabka laakiin dabkaasi dhibka uu dadka kale u geystay uma geysanin Luut. In kastoo uu dabkaas ka badbaaday, Luut ma helaya sharafta ay helayaan kuwa noolosha xaqa ah ee Alla ka cabsashada leh ku noolaa. Waan ka shakisannahay inuu Ciise Luut ku soo dhaweyn doono erayadan, 'Si wanaagsan baad yeeshay, addoon yahow wanaagsan oo aaminka ahu' (Matayos 23).

**3. Waxay tani u egtahay qof rumaysatay laakiinse dhimashadeeda ay ku timid macaaradnimo ay Ilaah macaarad ku noqotay.** Waxaan jeclahay inay naagta Luut ahayd mid Ilaah ku rumaysay ballantii uu Ilaah Ibraahim siiyey oo ku saabsaneyd midhta Ibraahim. Xaaska Luut waxay ka tirsanayd reerkii Ibraahim ee iimaan uga safreen Haran. Way caddayd inay jaclayd inay ninkeeda kala safarto Haran oo ay la aaddo Kancaan. Laakiin markay magaalada Sodom khatar ku sugnayd naagta Luut waxay qiratay inay hab qaldan ku dhaqatay oo ay aad uga fogaatay Ilaah.

Wey jaclayd inay Sodom aado, waxayna u murugoonaysay hantidii kaga dhuntay Sodom. Inaba ka aanay qayb qaadanin anshax xumada ay reer Sodom ku dhaqmeen; Ilaah baa badbaadiyey iyada. Saa ay tahayna aad bay uga xumeyd sida daran ee ay amarka Ilaah u raaci waysay kaa oo ahaa inaanay Sodom dib soo eeginse iyadu dib bay u soo eegtay Sodom. Sidaa buu Ilaah ku naf goyey iyada, ee ma ahayn in naarta loo diray, laakiin





waxay ahayd hab uu ku caddaynayey sida daran uu u necaybyahay inay dadka dib ugu noqdaan anshax xumada adduunka. Cibraaniyada 10:38 ayaa ka hadlaysa inuu Ilaah qiray inuusan inaba ka dan lahayn ama uusan ku farxaynin qofka markuu iimaanka qaata kaddib sharka dib ugu dhaqanaya. Naagtii Luut nafteeday hurtay. Laakiin taasi nooma caddaynayso inay naarta gashay. Waxaa lala barbardhigi karaya Cananiyas iyo Safiira iyo walaalaha Masixiinta ah ee aan ka akhrinayno 1 Korintos 11:30 kuwa uu Ilaah si aan caadi ahayn samada ugu qaaday si uu u muujiyo sida daran ee uu uga xun yahay caasinimada kuwa laba wejiilayaasha ah (Cananiyas iyo Safiira).

Ama ahayn kuwa si xun wax u quudhsada ee Masixiinta ah (1 Korintos 11:21-22, 29, 30), ama ahayn (sida aan ka akhrinayno Bilawgii cutubka 19aad) taa oo ku saabsan jacaylka xadgudubka ah ee adduunka iyo anshaxiisa la jacaylyahay oo aan inaba Ilaah la xusuusanaynin. Waa yaab oo, waxaa jirta arin la yaab leh oo ku jirta sheekada Luut. Waa tusaalaha ugu weyn ee aan ku arkayno Baybalka oo ku saabsan qof uu iimaankiisa sugnayn oo jannada laga asmacay. Butros ayaa arintaan noo caddaynaya in Luut uu ahaa nin 'xaq ah' (2 Butros 2:7-9). Ilaah kama uusan badbaadinin Luut cadaabtii Sodom oo uma uusan gudbinin naarta! Luut jannaduu jira haddadan! Magaalada Sodom waa laga wayey xataa tobban qof oo xaq ahayd, laakiin Luut wuxuu ahaa

mid Ilaah rumaysan oo sidaa buu ku istaahilay inuu helo badbaadada Ilaah.





***Cutubka 27aad***

# Liidasho aanan la filaneynin

(Bilawgii 20:1-18)

Markii Sodom iyo Gomora la baabi'iyey kaddib Ibraahim wuxuu u safray dhinaca Negeef, taa oo ku taalay koofurta Israa'iil. Wuxuu ku safrayey meelaha u dhexeysa Kadhesh (oo ku taalay koofurta Kancaan) iyo Shuur (taa oo ku taalay agagaarka buurta Sinay), dabadeedna wuxuu u leexday dhexaadka woqooyiga iyo galbeedka halkaa uu mudda gaaban joogay Gerar. Inta uu Gerar joogay wuxuu sameynayey isla wixii uu sameyn jiray markuu joogay Masar sanada la soo dhaafay. Waa sida sheekada ku saabsan Muuse iyo Fircoon (eeg 12:10-20) oo si hor leh loo sheegay mar labaad, in kastoo ay jiraan waxyaala badan ee ay ku kala duwan yihiin (meelaha, boqorada, dabiicaddooda, marxaladaha ay ku jireen, sida uu boqorka ku fahmaya runta, sida uu u macaamiltamay Ibraahim, iyo sida ay ugu dambeysti ku dhaqmeen boqorada, waxyaalahan oo dhan ayey ku kala duwan yihiin).

**1. Ibraahim wuxuu mar kale la kulmay liidasho uu kaga liito xagga dabiicaddiisa.** Kaddib markuu si weyn u go'aansaday inuu xaqnimada ku dhaqmo sida aan uga arkayno  Bilawgii 17:1-2, iyo weliba ducadii weyneyd uu sameeyey sida aan uga akhrinayno Bilawgii 18:16-33, waxaan rajayneyna inay noolosha Ibraahim halkaas horay uga sii

dhaqaaqdo waxaanna rajaynayna in durbaba naloo sheego dhallashada muucjisada leh oo ku saabsan wiilka Ibraahim laga ballan qaaday. Laakiin waxaa naga yaabinaysa sida daran uu Ibraahim dib ugu noqonaya dabiicadihii hore ee sharka ahaa oo aan horay uga soo akhrinay bilawga sheekadiisa sida ay ku dhigan tahay Bilawgii 12:10-20. waxay u egtahay inuu hormar yar nooloshiisa ka sameeyey inta uu galay Kancaan!

Waxaa tan ka sii daran nooloshan waa kaddib markuu Ilaah isaga ogeysiyey in Haagaar tahay naagta uu wiilka muucjisada ah ka heli doono, wuxuu dhallashada wiilka khatar ku gelinaya fursadda uu siiyey Saarah inay u hooyato una gacan gasho boqor kale oo aan Ilaah ka cabsanaynin. Natiijada waxay la mid tahay tii hore! Abimelek, isla sida uu Fircoon yeelay ayuu sameeyey, wuxuu guri geystay Saarah (20:2). Way ka da' weyntahay heerkii ay joogtay markuu Fircoon gurigiisa geysanayey (12:11) oo mar kambe looguma yeedhaya quruxsanay, saa ay tahayna sagaashan iyo dhawr jir ayey ahayd laakiin weli weji quruxsan ayey lahayd! Da'da Ibraahim iyo Saarah ay jireen waxay ahayd mid laga welwelo. Laba shey ayey u ahaan kartay iyaga, tan kowaad, in nooloshooda iyo muuqaalka jirkooda ay ahayd laba jibaar da'da ay jireen, taasi waxay noo macnaynaysa in Saarah ay la mid ahayd naag 45 jir ah oo qaan gaartay.





Midda labaad ee suurtagalka ah ayaa waxay tahay in habka tirada loo waday ay ahayd mid ay tirada garaysay lix bedelkii tobban lagu xisaabtami lahaa taa oo aan ka fahmi karno inay Saarah la mid ahayd naag 54 jir ah oo duqowday. Si kastoo ay wax ahaayeenba, Saarah way quruxsanayd! Ilaah ayaa Abimelek riyo ugu digay (20:3), Abimelekna aad buu u jeclaa inuu is xoreeyo (20:4-5). In kastoo uu runtii sinaystay, dhabtii waxay ahayd wax uusan ku talagelin (tani waxay na ogaysinaysa inaan sinaysan karno ama aan caasinima kale samayn karno iyadoo aanan ka war qabin oo aan ku talagal lahayn inaan Ilaah ku casino. Caasinimada waa shey ficil ku imaanaya; ma ahan oo keliya inuu jiro ku talagal caasinimadas lagu sameeyey). Ilaah wuu daafacay Abimelek iyo Saarah (20:6-7). Abimelek wuxuu sharaxaya masiibada ku dhacday guriga boqortooyada (20:8), wuxuu Ibraahim ka canaananaya khiyaanada uu sameeyey wuxuuna ku amray inuu sharaxaad ka bixiyo arinta ku kaliftay inuu sameeyo ficilkaas. (20:9-10). Ibraahim wuxuu sameeyey marmarsiinya aan sal lahayn (20:11-13).

Abimelek hadiyada badan ayuu siiyey Ibraahim, Saarahna wuu celiyey oo wuxuu Ibraahim kula taliyey inuu soo dego meel alla meeshuu ka jacaylyahay agagaarka boqortooyadiisa (20:14-15). Abimelek cafi ayuu ka weydistay Saarah (20:16). Ugu dambaysta Ibraahim wuxuu u duceeyey naagihii Abimelek oo sanada badan madhalays

ahayeen. Wey boogsadeen jidhkoodana caadi ayuu ku soo noqday (20:17-18).
Tani waxay ahayd canaan ku timid khiyaanada joogtada ah uu Ibraahim sameynayey. Kuligeenba waan gefnay, oo weliba isla qaladkoo hal mar ka badan ayaan sameynay! Dhaqsa uma cilmiyeysano, waxaanna leenahay waxyaalaha noolosheena ka tirsan oo dabiicad noo noqdeen oo aan ku degdegno in kastoo aan ognahay inay shar yihiin.

Meelaha aan ka liidano waxaan u baahannahay inaan xoogga saarno sida aan u go'aansan lahayn sida aan waxyaalahaas sharka ah oo dabiicadda noo noqdeen uga adkaan lahayn. Ibraahim wuxuu tusaya qaybta nooloshiisa ka tirsan ee uu kaga dhaqmo noolol aanan ka farxinaynin 'Ilaaha qaadirka ah'. Qof kalena wuxuu niyadjabkii Ibraahim Masar ku qabsaday (12:10-20) ku macnayn kara inay ahayd dhacdada uu Ibraahim ku fahmi lahaa inuu Ilaah barakadeynaynin khiyaanada ahayd inuu naagtiisa Saaray ku metelay inay ahayd walaashiis. Laakiin weli waxay u egtahay inuusan waayaraggaas waxba ka baranin oo uu weli khiyaana aan loo baahnayn iyo sida joogtada ah uu xaqa Saarah ugu xadgubaya kana dhigtay dabiicad.

**2. Ibraahim wuxuu mar kale iisu arkaya inuu yahay iinlaawe madaama uu sameeyey mala aan macna lahayn.** Ibraahim isagoo aanan haysanin wax dhab ah oo saldhig u ahaan karo shakigiisa ayuu iskiiga shakiyey iskana dhaadhiciyey inuu





Abimelek qur goyn doono Ibraahim. Inta badan dadka aan Ilaah ka cabsanayn xumaan badan ma falaan sida aan u malaynayno, oo kuwa Ilaah addeecana si joogta ah xaqa uguma dhaqmaan sida aan u malayn karno! Dhabtii Abimelek wuxuu ahaa nin aad daacad u ahaa, deeqsi leh, soo dhaweyn leh markii loo kaco arimahan waana fikirad ka duwan tan la rajaynayey inuu ku dhaqma. Sodom anshax xumo iyo shar badan ayaa jirtay laakiin boqorka Gerar, in kastoo uu lahaa meela dumarka laga macsiyeysto la dejiyo, wuu qabay cabsida Ilaah (20:11). Luut wuxuu u malaynayey inuu wanaag kala kulmi doono Sodom laakiin waxay ahayd fikirad qaldan.

Ibraahim wuxuu u malaynayey inay madaxda Gerar yihiin kuwa dilaa ah, tanna waxay ahayd fikirad qaldan. Ma uusan ka daxadirin sida uu dhabta marxaladda ku heli lahaa, kamana uusan daxadirin inuu sheego runta, kama uusan daxadiraynin iimaanka uu Ilaah ku leeyahay iyo sida la yaabka leh uu Ilaah horay u soo badbaadiyey, waxaa kale uusan Ibraahim ka daxadirin inuu dhuujiyo sharafta iyo xushmadda naagtiisa Saarah. Waxay ahayd Ibraahim inuu dareemo in runtii uu ku qaldanaa shakiga uu qabay. Shakigiisa oo dhan wuxuu ahaa wax aanan saldhig sal lahayn. Waxay ahayd inuu u duceeyo dadka uu gefka ka galay waxaana dhacday inay ducadiisa boogsin ku helaan.

**3.** Dhacdada ah inay naagihii Abimelek ee aan weligood dhalin boogsadeen oo ay dhalli doonaan ma ahayn mid aad macna u lahayd maxaa yeelay, labaatan sanno ka badan ayuu Ibraahim naagtiisa u duceeynayey. **Waxay ahayd inuu mar kale Ibraahim wax dheraad ah ka barto awoodda iyo doonista Rabbiga weliba inuu Ilaah wakhtigiisa xaadirka ah wax ku ficil geliyo.** Way caddahay inuu Ibraahim ducada uu naagaha kale u duceeyey ay midho dhashayse ducada uu naagtiisa u duceeyey lagama jawaabin! Ilaah go'aankiisa waa qaas markuu doonaya inuu hadiyado na siiyo. Hadiyad kastoo nooc walba ah ayaa la bixiya *'siduu doono'* (1 Korintos 12:11). Xataa Ciise waxaa lagu yidhi *'kuwa kaluu badbaadiyey…Isaguna ha is badbaadiyo…'* Tan waxay nooga digeysa inaanan baraka kasta iimaan ku qaadanin oo aan u malaynin inaan helnay waayo, waxaa dhici karta inuusan Ilaah raali ka ahayn inaan helno sheyga aan ka duceeysanayno! Xataa muucjisooyinka waweyn waa inaan barino in doonista Ilaah ay noqota ee ma ahan doonisteena. Muucjisooyinka aan doonno iskama qaadan karno doonista Ilaahna ma ahan mid aan mar alla markaan doonno aan sida nalka u shideyno si ay doonisteena u ahaato. Sheyga kale ee halkan nooga muuqanaya ayaa wuxuu yahay in mudda yar dabaddeed kaddib markuu Ibraahim u duceeyey naagaha kale ee dhibanaa ayey tiisana boogsatay mise ay uuraysatay. Sida uu cutubkan u kala qaybsamay waan ku wareereyna. Isla marka laga baxo Bilawgii 20:17-18 waxaa imaanaysa





Bilawgii 21:1-2. Waa marka uu dad kale u duceeyey kaddib markuu isna iisu duceeyey.

***Cutubka 28aad***

# Jidhka iyo Ruuxa

(Bilawgii 21:1-21)

Cunuga u dhashay Saarah iyo Ibraahim wuxuu ahaa mid ay ku heleen nimcada Ilaah; waxaa lagu helay muucjisada ku timid Ruuxa Qoduuska ah ee Ilaah; hawsha oo dhan waa wax ku yimid naxariista Ilaah. Shekooyinka aan horay u soo maqalnay ama u soo akhrisanay ayaa noo caddaynayaan. Mar dhaw unbaan aragnay sida daran uu Ibraahim mar kale iisu niyad jebiyey! Qaybta aan soo dhaafnay ayaan ku aragnay sida daran uu Ibraahim ugu dhaqmay liidasha aanan laga filaneynin iyo sida daran oo uu uga leexday waddada xaqa ah ee leh xigmadda iyo xaqnimada. Waana isla markaas uu xaaladdaas caasinimada uu ku jiray Ibraahim marka uu Ilaah fullinaya ballanta uu ka qaaday Ibraahim.

**1. Wax alla wixii Isxaaq ku lafaaqan waxay na xusuusinaysa nimcada farxadda leh ee Ilaah.** Isla wakhtigaas nala tusala nugeylka baniaadmiga ayuu Ilaaha Qaadirka ah booqday Saarah oo uu si muucjiso leh u fuliyey qorshaha uu uga lahaa ballantiisa (21:1). Erayada ‘Ilaaha qaadirka ah booqday Saarah’ waxay ka hadlayaan muucjiso. Ilaah ayaa marxaladda soo dhex galay si uu xal u keeno. Haddii aan eegno xagga Ismaciil, wuxuu ku dhashay doonista jidhka. Dhallashada Ismaciil uma





baahnayn wax muucjiso ah. Laakiin dhallashada Isxaaq waxay ahayd mid muucjiso ku timid oo sidaa daraaddeed ‘booqashada’ qaaska ah ee Ilaah waa loo baahnaa. Isla sida la ballanqaaday iyo weliba isla wakhtigii horay loo sheegay ayuu dhashay cunugii waa dhashay (21:2). Waxaana lagu waqlalay ‘Isxaaq’ (micnaheeda ‘wuu qoslaa’, 21:3). Waxay na xusuusinaysa mararka badan ee ay jireen dhacdooyin looga qoslay Isxaaq.

Ibraahim farxad buu la qoslay marka ugu horeysay uu maqlay ballanta ku saabsanayd Saarah (17:17); qosolka ay Saarah qososhay wuxuu ahaa mid shaki iyo iimaan la’aan ku yimid (18:12). Qosolka ma dhamaan doono. Dadka waxay la yaabi doonaan fikiradda ku saabsan da’da ay waalidkan jiraan iyo ballanta cunugga ay heli doonaan qoyskan! Waalidkan qosolkooda ma dhamaan doono waayo, waxay la qosli doonaan farxadda inta ay ka fikirayaan qorshaha  iyo danta uu Ilaah wiilkan ku oofsan doono. Waxaana la rajaynaya inuu wiilka ahaan doono mid faraxsan oo qosol iyo farxad u keeni doono waalidkiisa. Ilaah wuu jacayl yahay qosolka! Wax kastoo Isxaaq ku saabsan waxay tilmaan u tahay farxadda ku jirta deeqsiga Ilaah. Wiilka waa la guday (21:4), waxayna ahayd addeecista amarka Ilaah in wiilka la gudo (17:10).

Dudniinka wuxuu ahaa calaamad lagu garanaya bulshada Ibraahim waxayna ahaan doonta barakada Ilaah ee adduunka oo dhan saamayn doonta.

Bilawgii wuxuu na xusuusinaya da'da weyn ee Ibraahim (21:5) iyo addeecis la'aantii ay ku dhaqatay Saarah (21:6-7).

**2. Waxyaalaha ku lafaaqan Ismaciil waxay na xusuusinayaan dadaalka baniaadmiga iyo 'jidhka'.** Waxaa dhici kartaa inay jireen laba qof oo ay ku adkayd inay ka qayb qaataan farxadda guud ee lagu farxayey dhallashada Isxaaq – labadan qofna waxay ahayeen Haagaar iyo wiilkeeda, Ismaciil. Waxaa jirtay mar uu Ismaciil ahaa wiilka uu Ibraahim aad ugu faraxsanaa. Hadda dhallashada muucjisada ahayd ee Isxaaq ayaa Ibraahim u caddeyneysa in ay qalad ahayn u tagga uu Ibraahim Haagaar u tegay uuna ka dhalay Ismaciil. Ibraahim wuxuu marka hore isku deyay inuu ballanta Ilaah ee uu ku heli doono wiil dabartiisa ku fulliyo. Hadda dhallashada Isxaaq ayaa Ibraahim fahansiisay wuxuu Ilaah u dan lahaa, muucjiso la yaab leh, taa oo ah inuu Ilaah 'booqan' doono Saarah si uu wiilka la ballanqaaday u dhasho. 'Isxaaq ayey ku ficil geli doontaa midhta', ayuu yidhi Ilaah**.** Ficilgelintasi midhta wey socota, tijaabintii hore ee lagu tijaabiyey Haagaar si aad ah ayaa hadda loo caddeeyey fasiraadda dhacdada. Su'aasha hadda na hor taala ayaa waxay tahay: sidee bay nimcadu xiriir ula lahaan karta jidhka? Side buu cunuga dadka oo dhan xusuusin doona nimcada Ilaah xiriir ula lahaan kara cunuga dadka oo dhan xusuusin doona dhacdadii dadaalka jidhka ee ku jirtay taarikhda noolosha Ibraahim?





**3.** Jawaabta durbaba waa la fahmi doonaa. **Jidhka iyo Ruuxa waa laba iska soo horjeedda.** Wakhti kale ee dheraad ah (laga yaaba sida laba ama saddex sanadood) Isxaaq wuxuu ku nolaa naaska. Maalinta uu Isaxaaq naaska ka go'ay waxaa laga dhigay maalin qaas ah (21:8). Laakiin Ismaciil (kaa oo ugu yaraan todoba iyo tobban jir ahaa) si joogta ah ayuu ugu jesjesayey una yasayey Isxaaq (21:9), 'ciyaarista' ama 'ku qoslidda' ma ahan turjumaan aad u fiican; erayada ficilka halkan wuxuu leeyahay macna ah cay ama caro). Xiligan la joogo Saarah waxay codsatay in labada wiil la kala fogeeya, waxay soo jeedisay in Haagaar iyo wiilkeeda Ismaciil la dirro (21:10). Ibraahim kuma uusan faraxsanayn fikiradda ay Saarah soo jeedisayse wuu ogolaaday codsigeeda (21:11). Ilaah wuxuu ballanqaaday inuu Ismaciil shaqsi ahaan u barakadayn doono (21:12, 13).

Labadii waa la diray (21:14). Isla markiiba Haagaar way jaho wareertay. Biyihii ayaa ka dhamaaday inta ay ku dhex safrayeen lama degaanka, Haagaarna way ka sabartay wiilkeeda waayo, waxay aragtay inuu durbaba dhiman doono (21:15-16). Ilaah wuu maqlay qaalideeda macaawino doonka ah (21:17-18) Ilaahna wuu cusboonaysiyey ballantii ku saabsanayd inuu Ismaciil barakadayn doona (21:17-18). Ilaah ayaa iyaga ku hogaamiyey meel ay biyo ka heli karaan wayna samato baxeen. Ismaciil wuu barbaaray wuxuuna noqday qof aan taxadir lahayn

laakiin wuxuu ahaa geesi la aqoonsan karo wuxuuna guursaday gabadh ku dhalatay dhulka hooyo ee ay hooyadiis ka timid (21:19-21). Rasuul Bawlos ayaa dhacdadan soo xigtay wuxuuna sheegaya in dhabta jirta ay tahay in Ruuxa iyo jidhka ay weligood heshiis ahayn. Fursadaha iyo barakooyinka Isxaaq lagu deeqay waxay kordhiyeen uun cadawtinimada uu Ismaciil Isxaaq u qabay. Sidaa daraaddeed ‘jidhka’, dulqaad ma leh, wax kastoo wanaagsan ayuu isla raba, waa dabiicadda qofka aan Ilaah addeecsanayn, waxaa inta badan ka xanaajiya kana soo horjeeda Ruuxa, wuxuu ka soo horjeeda shaqada muucjisada, ma jeclo naxariista, ma jeclo shaqada deeqsinimada Ilaah. Ismaciil aad buu u yasayey Isxaaq. Jidhka wuu nacaybyahay Ruuxa. Adduunyada way nacaybtahay Kiniisadda. Nafta wax isla jacayl way nacaybtahay qosolka.

Macaaradka waa in la soo dhaweyo. Addeecista Ruuxa waxay u baahantahay inkiraadda jidhka. Carrada ay adduunyada u qabto kuwa sida runta ah Ilaah u addeeca kuna nool noolol Ilaah ka farxisa waa inaan ogolaano inay jiraan. Habka jidhka lagu garto waa isku daxaluujinta sharciga. ‘Fiiji Haagaar!’ ayuu yidhi Bawlos – taa oo ay macnaheedu tahay iska xoor aaminaadda aad aaminsan tahay awoodda jidhka iyo ku kalsoonidda iyo addeecista sharciga si aad u awooddid inaan si dhab ah ugu nolaatid xaqnimada Ilaah. Haddii aan Ismaciil gooni u bixino kuna tilmaano sawirka ‘jidhka’ waana inaan aqoonsano kan uu yahay, waa





inaan nidhaahno inuu ahaa sheyga lagu oofiyey naxariista Ilaah. Isagoo marxalad xun ku jira ayuu Ilaah nooloshiisa soo galay una naxariistay isaga.

Way dhici kartaa inuusan qayb ka haysanin axdiga Ilaah sida uu Isxaaq qayb weyn uga haysta oofinta axdiga Ilaah. Waxaa dhici karta inuu tilmaan u ahaa dulqaad la’aanta iyo ficilka jidhka kaa uu Ibraahim ku dhaqmay, laakiin Ismaciil ahaan, isaga iyo hooyadiis Haagaar way daremeen naxariista Ilaah. Ibraahim daraaddiis ayuu Ilaah ku barakeeyey Ismaciil. Waxaan ahaan karnaa kuwa dabiicaddooda ay xuntahay, oo aan wax amfac ah ka lahayn qorshaha guud ee Ilaah, laakiin markaan qalbi daacad ah Ilaah kaga codsano naxariistiisa isla sida ay Haagaar iyo Ismaciil yeleen – Ilaah wuu na maqli doonaa wuuna noo naxariisan doonaa dabiicad kastoo aan horay u lahaynba.

***Cutubka 29aad***

# Baaqa dhiirigelinta Ilaah

(Bilawgii 21:22-34)

Ballantii ku saabsanayd 'midhta' tallaaba weyn ayey horay u qaadday, laakiin hadda arin kale ayaa jirta, ballan ku saabsan dhulka. Waxaa jireen wakhtigan waxaa dhulka Israa'iil deganayeen 'Falistiin'. Ma ahayn kuwa waaya dambe la yaqaanay ama maantaba adduunka laga yaqaano, laakiin kuwaasi waxay ahaayeen kuwa astaankoodi hore ka yimid agagaarka Meditareeniyan . Waxaa jirtay mar uu Ibraahim Ceel ka agagaarka dhul uu Abimelek lahaa oo Abimelekna Falistiin ayuu ahaa ceelkana wuu sheegtay inuu kiisa (Abimelek) yahay. Ibraahim wuxuu qadayey tallabooyin uu ku qaadan lahaa dhulkuu Ilaah isaga ka ballanqaaday. Laakiin madiidanyadii Abimelek ayaa ceelasha wada xayuubtay. Wakhtigaasna waxay Ibraahim u haysteen inuu ahaa ajinabi ka yimid dhulka Haran wax xaq ahna ma uusan lahayn uu wax dhulkooda ka tirsan ku lahaado, xataa ceelasha biyaha xaq uma lahayn inuu lahaado! Marxaladda oo dhanba waxay ahayd mid aad niyadjab u leh Ibraahim. Laakiin durbaba waxaa jiray isbedel. Markii la joogo maalinta loo dabaaldegayey maalintii Isxaaq naas nuuga laga joojinayey, Abimelek oo Falistiinka ayaa iyo Ficool oo ahaa boqol u taliyaha militariga Abimelek ayaa martida murtida leh ka ahaa





xafladdaas waxaana jiray codsi ay u soo jeediyen Ibraahim (21:22 qaybta kowaad).

Waxay aad u jecladeen hormarka muuqda uu gaaray Ibraahim (21:22 qaybta labaad). Sidaa daraaddeed waxay rabbeen inay axdi xiriir kula yeshaan Ibrahiim. Waxay Ibraahim ka codsadeen inuu ballan ku dhaarto. Tani waxay u egtahay ballan labada dhinacba ah maxaa yeelay, kuligoodba waxay ahayd inay dhaarta wada galaan (eeg 21:31). Ibraahim wuxuu ku dhaaranaya inuu iyaga 'been kula dhaaran doonin'; baarinimada waa arin aad qaali uga ah dhaarta ballanta lagu gelaya. Waxay isaga ka doonayaan 'naxariis kula dhaqmo' iyaga; naxariista iyo deeqsigana waa qaybba anshaxa ballanta xiriirka ka tirsan (21:23). Ibraahim sida ay iyaga rabbeen ayuu ku galay ballanta (21:24), hase ahaatee, cabashuu lahaa. Haddii ay tahay inay labada nin axdi wada gelayaan, Ibraahim codsi ayuu leeyahay. Madiidanyadii Abimelek waxay qateen ceel uu Ibraahim qoday.

Abimelek waa ka xunyahay arintaas, wuuna soo bandhigay sida uu uga xunyahay ficilkaas iyo weliba inuusan horay uga warqabin wixii dhacay (ceelkaas uu Ibraahim qoday oo ay madiidanyadiisa qateen), diyaar ayuuna u ahaa inuu khilaafkaas xaliyo (21:25 – 26). Marka axdigii waa la galay. Ibraahim wuxuu hadiyado siiyey Abimelek (21:27) laakiin wuxuu bixiyey toddoba lax oo dheraad ku ah wuxuu Abimelek rajaynayey (21:28). Waxay

ahayeen hadiyad sbeeshel ah oo la socotay ahaa in ceelasha Ibraahim loo aqoonsado inay kuwa Ibraahim yihiin (21:29-30). Codsiga waa la ogoladay (21:31), nimankiina waxay halkaas ku dhaar ku kala qateen axdiga labada dhinacba laga ballanqaaday. Sidaa daraaddeed dhacdada aad maskaxda loogu haya ayaa waxay tahay tan ugu dambeysay, meesha iyaga ah waxaa loogu yeedhay ‘Bi’ir Shebac’ – micnaheeduna waa ‘ceelkii dhaarta’. Dabadeedna labadii marti way hoyden (21:32). Ibraahim wuxuu halkaas ku beeray geed maalmaha dambe lagu harsan doono madaama uu ahaan doono geed hoos aad u qabooban lahaan doono halkaasna wuxuu ku dhisay mawlac. Bi’ir Shebac waa meel uu Ibraahim dhisay waxayna ahaan doontaa meel barakaysan oo lagu duceeysan doono laguna bixin doono waaqdhac (21:33). Muddo dheer ayuu Ibraahim qaybtaas dhulka ku noolaa (21:34).

**1. Ilaah wuu na dhiirigelinaya inta aan ku socono dhaxlidda dhulka uu naga ballanqaaday.** Sheekadan gaaban waxay na fahansinaysa inuu Ibraahim ku sii tallaaba qaadaya kuna dhawyahay fulinta uu Ilaah u fulin doono ballanta uu isaga ka qaaday. Waxaa laga ballanqaaday midh, Isxaaqna waa dhashay. Waxaa laga ballanqaaday dhul, haddana niman madaxda dhulka Kancaan ayaa way asmaceen in Ibraahim uu ku gulaystay inuu helo qayb ka tirsan dhulka Kancaan. Waxay ka hadlayaan, dhul uu Ibraahim qariib ku ahaan doono.





Way fahansan yihiin in dhabtii uu Ibraahim ahayn reer Kancaan. Wuxuuse ka yimid Haran kumana dhaqmaynin dabiicadaha reer Kancaan. Saa ay tahayna waxay gacan siyeen barakaynta uu Ilaah Ibraahim barakadaynaya. Sidaa daraaddeed waxay rabbaan inay xiriir wanaagsan Ibraahim la yeshaan. Waxayna ogoladeen inuu reer Kancaan ka mid noqdo wayna u dayeen ceelashii biyaha. Wax badan oo qiima sii leh ma ahayn laakiin waxay ahayd tallaabooyinka loo qaaday xagga dhaxlidda dhulka ballanka.

Waxyaalahan oo dhan waxay na fahansinayaan inaan tixgelino markay waxyaala yar yar noolosheena ku dhacayaan inay waxyaalahan yihiin kuwa noo sii dhaweynayaan waxyaalaha waweyn uu Ilaah noo danaynaya uu doonaya inaan noolosheena ku helno. Ilaah weligiis waa noolyahay. Weli wuxuu nagula xiriirinaya saaxibtinimada aad u weyn ee doonistiisa ku jirta. Intaan noolnahay wuxuu weli nagu boorinaya inaan waddadiisa ku socono.

**2. Dhacdada Ibraahim boorisay waxay ku dhallisay fahanka ah inuu hab cuseb u fahmo dabiicadaha Ilaah.** Hadda magic cuseb ayuu ugu yeedhaya Ilaah, ‘Ilaaha Qaadirka ah’, ‘Ilaaha weligiis jira’. Waxaa jiraan shan magac oo waweyn oo Ilaah loogu yeedho kuwa oo ku bilabanaya xarfaha *El* oo aan ka akhrinayno buuga Bilawgii waana kuwan,

a). *El Shaddai* – Waa Ilaaha wax kasta noogu filan, waa Ilaaheena weyn (Bilawgii 17:1).
b). *El Elyon* – Rabbiga sareeya (Bilawgii 14:18).
c). *El Olam* – Ilaaha weligiis jira (Bilawgii 21:33).
d). *El Ro'i* – Adhijirkeyga ii jira
e). *El Bedel*

Magacdan oo dhan waxay ku yimideen marxalad qofka ku kaliftay inuu Ilaah marxaladdiisa ku arko. Halkan Ibraahim wuxuu ka fikiraya mustaqbalkiisa dambe. Runtii miyuu dhulkii laga ballanqaaday noqon doonaa mid uu Ibraahim lahaan doono? Laga yaaba sababta ma ahan madaama uu hadda sii gaboobaya. Waxay u egtahay inuu helaya uun fursado yar sida ceelasha uu qoday inuu ka cabbo. Laakiin taasi ma ahan wax weyn. Laakiin markuu ka fikiro kan uu yahay waxaa maskaxdiisa (Ibraahim) ku soo dhacdaa inuu 'Ilaah yahay mid weligiis jira'. Markuu Ibraahim adduunkan ka tago, Ilaah wuu sii jiri doonaa weligiis. Ballanta isaga la siiyey waxay ahayd mid sameynaysay quruun weyn iyo boqora badan oo ka dhallan doona midhtiisa. Tan qasab waxay macnaynaysa inay ballanta ay tahay wax ku fidsan mustaqbalka weyn ee isaga ka horeeya kana sareeya mudda nooloshiisa.

Miyey suurtagal tahay inay Kancaan weligiid ahaato mid ay farcankiisa lahaan doonaan? Haah! Ilaah waa Ilaaha weligiis jira. Qorshooyinka Ilaah wakhtigiisa habboon ayey ku fullaan, laakiin Ilaah





wuu ka sareya wakhtiyada aan xisaabano. Dib ayuu wax u eegaa oo weliba gadaal ayuu wax ka eega wuuna ka war qaba waxyaalaha qorshooyinkiisa ku jiraan iyo weliba wuxuu samayn doono. Waa fikiradaha noocan ah kuwa ka tirsan kuwa Ibraahim ku caawiyeen inuu aqoon dheraad ah ku fahmo Ilaah. Hal boori oo xagga Ilaah uga timid ayaa waxay ahayd in kuwa qoysaska kuwa boqol u taliyaasha ah ka tirsanaa ayaa xafladda wiilkiisa ka soo qaybgalay – Ibraahimna wuxuu ku hogaansamay inuu helo fikiradda ah inuu Ilaah yahay mid weligiis jira. Dhacdooyinka nocaas ah ee yar yar ayaa isbedel aad u weyn noolosheena u keeni kara, haddii aan diyaar u nahay baaqa uu noo baaqaya Ilaah.

***Cutubka 30aad***

# Tijaabada Addeecista

(Bilawgii 22:1-2)

Bilawgii cutubka 22aad wuxuu na gaarsinaya heerka ugu sareeya ee ay joogto sheekada Ibraahim. Waa qaybtan bartanka looga oofinaya ballantii lagu qaaday cutubka 15aad ee Bilawgii. Ballamadan waxaa marka ugu horeysa la bixiyey markay sheekada joogtay cutubka 12:1-3, oo weliba laba jeer ayaa ballantan la cusboonaysiyey intaanan ballan kaloo cuseb la bixinin ama la magacaabin (12:7; 13:14-17). Dabadeedna Ilaah wuxuu bilaabay hababka axdiyada lagu maamuli lahaa kuwaa oo ku salaysna isla ballamadii horey loo bixiyey (15:5, 7, 13-21) laakiin way caddahay in dhaarta ugu dambaysa aanan la bixinin. Axdiga weli ma hergelin (17:2). Ballanta weli waxay ahayd uun deeqsi (17:4-8). Calaamadda gudniinka wuxuu axdiga ku soo kordhay markay sheekada joogto Bilawgii 17:9-14, oo ballamaduna waa la xaqiijiyey (17:15-16). Ibraahim si joogta ah ayuu u helayey boorin iyo muujinta ballamada oo sii weynaanayey (18:10, 14). Ugu dambaystina Isxaaq ayaa dhashay. Saa ay tahayna, xataa kaddib markuu Isxaaq dhashay ma jirin dhaar xaqiijinaysa inay ballamada la qaaday ay fuli doonaan. Ibraahim weli wuxuu ku noolaa rajada ballamada Ilaah laakiin wax dhaar ah oo Ibraahim la siiyey ma jirin. Haddaba mudda





markuu Isxaaq naaska ka go'ay kaddib (22:1 ayaa na ogaysinaysa in sannada laga soo wareegay).

Halkan ayuu Ibraahim ku helaya tijaabada ugu weyneyd ee weligiis nooloshiisa kala kulmaya, tijaabadan kaddibna Ibraahim wuxuu helay dhaarta looga dhaaranaya ballamada la siiyey ballamadana way dhismeen. Ilaah ayaa Ibraahim la hadlay oo ku amray inuu waaqdhac u baxsho (gawraco) wiilkiisa oo keliya.

**1. Intaanan dareemin dhaarta Ilaah oo aan 'nasashadiisa gelin' waxaa suurtagal ah inaan tijaabooyin waweyn kala kulanno noolosheena oo nagula tijaabinaya heerka aan ka joogno addeecisteena.** Wakhtiga sheekadan ay dhacayso waa mudda sanado laga joogo wakhtigii uu Isxaaq naaska ka go'ay (22:1 qaybta hore). Waxaan u malayn karnaa inuu Isxaaq tobban jir ahaa, kaa oo da'diisa ay gaartay heer uu ku weydiyo su'aala maskaxgal ah (eeg 22:7). Dabadeedna Ilaah ayaa tijaabinaya Ibraahim. Ilaah wuxuu nagu badbaadiya nimca oo keliya. Ibraahim rumaysad buu Ilaah ku aaminay – waxay ahayd oo keliya rumaysad tallaabada uu Ilaah ku aaminay, xaq baa laga dhigay isaga, oo si buuxda ayaa loogu deday xaqnima aan inaba ahayn wax uu tabartiisa ku helay. Ilaah maanta Ilaah wuxuu nagula dhaqmaa nimcadiisa joogtada ah. Dib ayuu xaradiisa noogu soo celiya (isla sida uu Ibraahim dib ugu soo celiyey xaradiisa markuu qalaadka galay). Nimcadiisa guud ayuu

nooga tirtira caasinimadeena daran (sida ficilkii uu Ibraahim kaga macsiyeystay Haagaar) oo weliba si guud oo weligeed ah ayuu nooga tirtiraya caasinimadeena.

Saa ay tahayna, Ilaah wuxuu naga codsanaya inaan si xornima ah xaqnima kula dhaqanno Isaga oo aan qayb kastoo noolosheena ka tirsan aan sida saxda ah ugu socono (eeg 17:1-2). Weli Ilaah wuxuu nagula dhaqmaya naxariistiisa guud oo weliba wuxuu barakooyinkeena ugu waweyn na siyaa kaddib markaan Isaga ku caasino oo aan samayno waxyaala daran oo doonistiisa ka soo hor jeedda (isla sida ay Bilawgii 21 ula socoto Bilawgii 20:8-18). Hase ahaatee, habkan waa isla midka uu Ilaah doonaya inuu inta badan ku tijaabiyo addeecisteena. Hadduu qofka caasinimada oo dhan iska nadiifiyo wuxuu noqonaya qalab uu Ilaah hawlishiisa waweyn ku fushanaya. 2 Timoteyos 2:21 waxay leedahay sidan tan, *'…kaasu wuxuu ahaan doonaa weel sharaf leh, oo qoduus laga dhigay. Oo sayidka wax u tara, oo shuqul kasta oo wanaagsan loo diyaariyey.'* Xataa intaanan daahir noqonin waxaa jiraan waxyaala badan uu Ilaah nagu deeqo, laakiin Ilaah wuxuu doonaya inaan addeecista aan Ilaah addeeceyna aan heer sare ka gaarno intuusan na siinin barakooyinka waweyn ee uu noogu tallagalay.

Dabadeedna dhaartisa naxariista leh ayaa nagu soo degi doonta. In kastoo aan heerka aan maanta





joogno ku soo gaarnay nimcada Ilaah, oo weliba hadiyadaha Ilaah waa kuwa nimcadiisa lagu helaya, saa ay tahayna waa run oo Ilaah wuu jacayl yahay inuu hadiyad na siiyo. Ilaah wuxuu doonaya inuu nagu hogaamiyo heeraha sare ee uu nooga baahan yahay inaan ka gaarno addeecisteena. Marka yaanan inaba la yaabin haddii si daran naloo tijaabiyo intaanan dhaarta Ilaah dareemin miseba aanan gelin 'nasashada Ilaah'.

**2. Waxaa dhici karta inaysan tijaabada Ilaah wax macna ah nala yeelanin.** Waxay u ekeyd arin aan maskaxgal ahayn inuu Ilaah Ibraahim ku yidhaahdo wiilkaaga Isxaaq ii gawrac. Hadduu maanta qof noo yimaado oo yidhaahdo 'Ilaah wuxuu igu yidhi wiilkaaga gawrac' waxaan ugu jawabayna 'kaasi ma ahan Ilaah; kaasi kuugu dhega hadlay wuxuu ahaa jinni', waanna ku saxsananayna! Waa run in – maalmaha ugu dambaysta ah – Ilaah mar dambe ma weydisan doono waaqdhac baniaadmiga. Ilaah ayaa joojiyey tallaabadaas intaanay heerkeeda ugu dambeya gaarin. Ma jirto meel aan Baybalka ka akhrinayno aqbalaadda ah inuu Ilaah doonaya in loo gawraco qof. Laakiin Ilaah wuxuu doonaya inuu ogaado habka aan u egnahay, inta ay addeecisteena dhantahay. Ilaah wuxuu doonaya inuu fahmo waxa qalbiyadeena ku jira iyo weliba inaan xajin doonno amarada uu na siin doono iyo inaan ku caasin doonno. Wax tan u eg ka eeg Baxniintii 16:4 oo leh sida tan, *'Markaasaa Rabbigu wuxuu Muuse ku*

*yidhi, Bal eeg, waxaan samada idiinka soo dayn doonaa kibis, oo dadku waa inay dibadda u baxaan oo maalin walba soo urursadaan in maalin ku filan,* ***si aan u tijaabiyo iyaga, bal inay shrcigayga ku socdaan iyo in kale.****"* iyo weliba tusaala kale oo ku jirta sharciga Muuse sida aan uga akhrinayno Sharciga Kunoqoshadiisa 8:2).

Dadka maanta u malayn karaa inuu Ilaah iyaga ku amraya inay sameyaan waxyaalaha uu sharciga ka soo horjeedo sida saxda ah ee lagula dhaqmaya waa uun in lataliyaal iyo dadka tacliinta maskaxda ku dhereeya loo geeyo si ay macaawino u helaan. Amarada Ilaah waxay la socdaan marxaladaha aan ku jirno xiliga aan joogno, oo kuma jirno xiliyadii Ibraahim oo ilmaha waaqdhaca loo bixinayey ay dhaqan ahayd ama ay ahayd caabudaad aan ku caabudeyno Ilaah! Isla sida ay horey u ahaanba u ahayd maantaba way ahaan karta oo tijaabada uu Ilaah na marinaya waxay ahaan karta mid aad u xanuun badan oo aan weliba aan wax maskaxgal ah noo ahayn.

**3. Tijaabada Ilaah waxaa dhici karta inay ka tirsanaato inaan wax alla waxaan ku noolayn oo dhan aan sadaqo u baxsano.** Arin la yaab leh ayey ahayd inuu Ilaah amro in sadaqa ahaan loo siiyo wiilka yaraa ee Isxaaq. Mudda soddon sano ka badan ayuu Ilaah Ibraahim ka ballanqaaday 'midh'. Waxay ahayd mudda dheer oo safar adag oo samir iyo iiman leh loo soo maray. Maraha qaarkood



*Wacdinta Erayga Ilaah ku salaysan: Bilawgii 12-23*

Ibraahim aad buu u dhiirana maraha qaarkoodna aad buu u shakinayey. Hase yeeshee, Ibraahim waxyaalahaas oo dhan waa soo dhex dabaashay oo hadda Isxaaq wiilkii la ballanqaaday waa dhashay. Laakiin haddana waxaan arkayna Ilaah oo Ibraahim ku amraya inuu xooro wiilka keliya ee weligiis helay! Isxaaq waa sheygii ugu qiimaha badnaa uu Ibraahim sanooyin sugayey tobnaan sanno! Oo miyey dhallashadii muucjisada ahayd ee uu Isxaaq Saaraydii da'da ahay u dhashay ka kac noqonaysa? Hadduu Ibraahim waayo wiilkiisa Isxaaq waxaa suurtagal ah inay Saarah mar dambe dhali doonin! Horaan waxay ahayd sagaashan iyo sagaal jir; haddana waa boqol iyo tobban jir ama ka badan! Sidee bay ku dhici kartaa inuu Ilaah Ibraahim ku amro inuu xooro wuxuu sugayey nooloshiisa oo dhan? Maraha qaarkood tijaabada ugu weyn ee iimaankeena ku timaado waxay noqon kartaa mid nagula tijaabinaya heerka uu addeecista aan Ilaah addeeceyno gaaray kaa oo ah inuu ahaado mid ka sareeya qiimaha aan qiimaynayno waxyaalaha noolosheena u muhimsan. Maraha qaarkood waxay tan u dhacdaa in habka aan sannado badan Ilaah ugu adeegeynay uu dhamaadkiisa gaaro. Maraha qaarkood waxay noqon kartaa inaan ku hawlanaano waxyaala aan isha dadka ugu ekaan doonin wax sharaf leh ama ay nacasnimo ku jirto amaba aanan dhab ahayn. Laakiin intaanan helin barakada ugu weyn uu Ilaah noolosheena ugu talagalay, waxaa aad suurtagal u ah in nagula tijaabiyo heerka aan ka gaarnay addeecisteena.

***Cutubka 31aad***

# Addeecista Ilaah

(Bilawgii 22:3-19)

Ibraahim wuu addeecay Ilaah. Markay tijaabada Ilaah timid Ibraahim durbaba si dhab ah oo ay wax su'aal ah ku jirin ayuu ku addeecay Ilaah. Heer intee dhan ayaad ka joogtaa addeecista aad adiga Ilaah addeecdid? Heer intee dhan ayaan ogolahay aniga inaan Rabbiga addeeco? Waa su'aal jawaab doonaysa. Ibraahim aroortii hore ayuu soo toosay maalinta xigtay, wuxuuna waday Isxaaq iyo laba caawyaal ah, wax alla wixii alaab ahaa soo waaqdhaca looga baahnaana wuu wada qaatay wuxuuna u safray dhulka Ilaah u sheegay (22:3). Maalinta saddexaad Ibraahim meeshii loo tilmaamay ayuu kor ka arkay (22:4). Meeshaasi waxay ahayd buur caan ah oo mar dambe loogu yeedhi doono Yerusaleem. *Buurta Rabbiga* (22:14) waa isla meesha *'Buurta Ilaah'* ee laga sheegaya Sabuurrada 24:3 oo calaamad looga dhigay dadka Ilaah ee aan ka akhrinayno Ishacyaah 2:2 *'Buurta guriga Ilaaha qaadirka ah').* 2 Taarikhda 3:1 waxay noo sheegeysa in macbudka laga dul dhisi doono isla bartankan. Waa haddana isla meesha loogu yeedhi doono 'Saleemka' Bilawgii 14:18. waa meeshii uu Malkisadeq wadaadka sare uga ahaa dadkiisa. Qaybtan Baybalka oo dhan waa mid aad caan u ah. Mutaclamiinta Yahuudda waxay ugu





yedhaan 'Akiidada' ('xirxirka') iyadoo lagu xusuusanaya halkii Isxaaq mawlaca lagu kor xiray.

**1. Addeecista waa in lagu muujiyo waaqdhaca ugu sareeya.** Addeecista waa maxay macnaheeda? Inta badan waxay tixgelinaysa ka saraysinta aan Ilaah ka saraysinayno shey kasta ama qof kastoo ugu awoodda (sharafta) badan ee aan naqaano. Isxaaq wuxuu ahaa sheyga ugu qaalisanaa uu Ibraahim haystay, wuxuu ahaa kan ay rajada Ibraahim ku salaysnayd.

Wax kastoo uu Ibraahim tobnaan sanadood u soo noolaa oo dhan waxay ku xirantay wiilkiisa uu jeclaa. Ibraahim miyuu runtii diyaar u yahay inuu runtii wiilkiisa badbaadiyo mise wuxuu diyaar u yahay inuu Ilaah addeeco oo uu wiilkiisa waaqdhac u bixiyo? Ibraahim diyaar buu u yahay inuu addeeco Ilaah, wax kastoo ay ku qaadataba Ibraahim diyaar buu u yahay inuu Ilaahiisa addeeco. Markuu ficilka gawraca wiilka samaynayey Ibraahim dib ayuu iskiisa reebay kuwa isaga caawiyaalka u ahaa (22:5). Ma jiro qof Ibraahim ka caawin karo qaybtan tallaabada uu qaadi lahaa. Waaqdhaca waa inuu ahaado mid dhan oo la gubi doono (22:6). Ibraahim wuxuu haysta qorya, iyo weel uu dhuxul dab ah ku wato, iyo mindida uu doonaya inuu ku gawraco waaqdhaca (22:6). Dabadeedna waxaa la gaaray marka ay ugu kharereyd. *'meeh wankii allabariga la gubo loo bixin lahaa?'* (22:7). Waxay ahayd su'aal uu shaki

ka jirin inuu Ibraahim aad uga fikiray ficilka daran ee uu doonayey inuu ku gacan qaado. Laakiin Ilaah ayaa macaawino u noqday oo siiyey jawaab dhab ah in kastoo ay ahayd mid ka leexasho leh (22:8), labadooduna way ku sii socdeen bartanka sadaqada lagu gubi lahaa.

**2. Addeecista waa la tijaabiya.** Tallaabooyinka oo dhan waa la caddeeyey. Maalma ayey Ibraahim iyo asxaabtiisa ku qaadatay inta ay u safrayeen meesha sadaqada la gubaya lagu bixin lahaa. Dabadeedna waxaa la gaaray mar ay Ibraahim waajib ku ahayd inuu buurta fuulo. Dabadeedna waxay ahayd inuu buurtaas loo tilmaamay uu ka dul dhiso mawlac (22:9). Intay safrayeen Isxaaq wuxuu aabbihiis weydiyey su'aal aad u culus. Qorshaha oo dhan wuxuu noqday mid aad u dheer. Tani waxay noo caddaynaysa in Ibraahim lagu tijaabinayey inuu dib uga noqon doono wuxuu samayn lahaa iyo in kale. Way sahlan tahay inuu qofka go'aansado inuu Ilaah addeeco laakiin tijaabada ayaa waxay tahay midda lagu ogaanaya inuu qofkan safarka ku sii adkaysan doono iyo in kale markay dhibatooyin iyo silec yimadaan. Natiijada tijaabada ka soo dhallan doonto ayaa caddaynaysa halkuu qofka iimaankiisa ka joogo. Ibraahim saacadba tan ku sii xigtay ayuu kaga sii taagsanayey addeecista amarka Ilaah oo wuu ku adkaystay inuu oofiyo wuxuu Ilaah isaga uga baahan yahay. Ma ahan oo keliya inuu Ibraahim rabbo inuu addeecose wuxuu yahay mid addeeca!





Ibraahim weli ma oga in uu Ilaah u dibcin doono sharuudda lagu amray uu durbaba oofin doono. Wuxuu wiilkiisa Isxaaq ku amray inuu mawlaca ku tul seexdo, markuu saaxdayna gacmahuu ka xiray. Waxaa dhici kartaa inuu Isxaaq u sheegay xaaladda socota. Isxaaq iyo aabbihiis Ibraahimba way dhiban yihiin. Ibraahim wuxuu addeecsan yahay amarka Ilaah ilaa daqiiqadda ugu dambeysa. Ibraahim wuxuu kor u qaaday seeftiisa (22:10) wuxuuna diyaar u ahaa inuu ku ficiltamo gawricidda wiilkiisa keliya.

**3. Addeecista waxay leedahay abaalgud.** Marka ugu dambeysay ayey malaa'ig samada ka yeertay. *'Ibraahim, Ibraahim!'* (22:11). Aayaddan waxay ka tirsan tahay aayado yar oo Baybalka ku jira oo magaca qofka laba goor lagu dhawaaqay (eeg Faalimaha Rasuullada 9:4 iyo kuwa kaloo tidha yar oo Baybalka ku jira). Malaa'igta waxay Ibraahim ka xoreysay ficilkii darnaa ee ahaa gawraca uu ku oofinayey amarka uu Ilaah ka helay uu durba suubin lahaa. Bilawgii 22:12 waxay leedahay sida tan, *'Markaasay ku tidhi, Gacantaada ha saarin wiilka, waxbana ha ku samaynin: Waayo, hadda waan garanayaa inaad Ilaah ka cabsatid, maxaa yeelay, igama aadan lexejeclaysan wiilkaaga, kaas oo ahaa wiilkaaga keligiis ah.'* Durbaba Ilaah xal buu keenay oo lagu wiilka dhiman lahaa lagaga badbaadiyo dhimashada (22:13). Meeshaasna waxaa loogu yeedhay 'Yehowah Yireh' – 'Ilaaha qaadirka ah' sheekadiina markay adduunka oo dhan

ku faaftay oo lala qabsaday waxaa soo baxday maahmaah ah *'Buurta Rabbiga ayaa lagu deeqi doonaa'* (22:14). Dabadeedna waxaa malaa'igta ka yimid eray qaas ah. *'Kolkaasaa mar labaad malaa'igtii Rabbigu Ibraahim samada uga yeedhay, oo waxay ku tidhi, Rabbigu wuxuu yidhi, Waxan aad samaysay aawadood, iyo wiilkaaga aadan iga lexejeclaysan, kaas oo ah wiilkaaga keligiis ah aawadiis* ***ayaan nafsaddayda ku dhaartay'*** (22:15, 16). Waa arintan tan ay waxyaalaha sheekada Ibraahim ku jiray oo dhan ay ku soo hoobanayaan. Ilaah wuu dhaartay ballantiina ugu dambaysta waa la dhaxlay. Ibraahim wuu helay wuxuu sanado badan u riyaaqayey. Ilaah wuu dhaartay kamana leexan doono wuxuu ballanqaaday.

Hordhaanta badbaadada lagu helaya midhta Ibraahim hadda waa xaqiiq. Ballanta waxaa loo oofinaya Ibraahim. Hadda wixii ka dambeya waxay noqonaysa mid la xoojinaya, aan laga hor imaan karin, aan la baabi'in karin, oo aan la bedeli karin. **Sadaqada Isxaaq lagu oofin lahaa waxay tilmaan u ahayd ficilka uu Ilaah nagu siinaya wiilkiisa madiga ah**. Ilaah ayaa xilka iska saaray inuu ficilgeliyo wixii Ibraahim laga dibciyey ama Isxaaq lagaga leexiyey dhimashada. Rooma 8:32 waxay leedahay sida tan, *'Kii aan xataa Wiilkiisa lexejeclaysan, laakiinse innaga dhammaanteen u bixiyey, side buusan wax walbana inoola siin doonin isaga?'* Ma ahan mid nasiib darro ku



*Wacdinta Erayga Ilaah ku salaysan: Bilawgii 12-23*

dhacday inuu Bawlos aayaddan kaga istecmaalo erayada Bilawgii 22:16. Ma jirin wax haba yaraate ee uu Ilaah dib u ceshtay. Ilaah sababta uu saa ugu hadlay waxay ahayd inay addeecista fusho si uu amar u lahaado xataa markuu Isaga gudcurka u dirayey sida ku dhigan Luukos 22:53. Isla sida ay Ibraahim iyo Isxaaq ay keligood silica ugu jireen, madaama labadii midiidan la diray, isla sidaa ayey Ilaah iyo Wiilkiisana keligood ugu ahayeen silaca ay kala kulmeen iskutallaabta. Ishacyaah 53:4 waxay dhigaysa sida tan, *'Sida runta ah wuxuu xambaartay xanuunyadeennii, wuxuuna qaatay murugadeennii, laakiinse waxaynu ku tirinnay mid belaayo ku dhacday, oo Ilaah dilay, oo dhibaataysan.'*

***Cutubka 32aad***

# Dhaarta Ilaah

(Bilawgii 22:1-19)

**Addeecista uu Ibraahim Ilaah addeecay ma ahayn mid lagu qasbayse waxay ahayd mid qalbigiisa ka soo go'day**. Maraha qaarkood noolosha Masixiinta waxaa ka jirta addeecis qasab ku timaado. Rasuul Bawlos wuu ka hadlay tan oo wuxuu yidhi, *'Runtii anigu wax kasta ayaan khasaare ku tirinayaa'* (Filiboy 3:8). Bawlos wax kastuu ku khasaaray. Laakiin waxyaalahan uu lumiyey ma ahayn wax kaga dhumay akhtiyaarkiisase dan ayaa ku kaliftay. Isla sidaana marxaladdii uu Ayuub wuxuu lahaa oo dhan ku waayay (Ayuub cutubbada 1aad iyo 2aad) ma ahayn mid uu ku go'aansaday inuu reerkiisa baabi'iyo, maalkiisa ku waayo, hoygiisa ku waayo oo ugu dambaystina ku waayo caafimaadkiisa. Waxyaalahan **amar** ayaa looga qaaday isaga. Way ka duwan tahay markaan iskeena iisu dhiibeyno waaqdhac ahaan. Bawlos siduu Filiboy 3 uga hadlaya waxyaalihii uu horay soo maray isagoo leh, (*Masiixa aawadiis ayaan khasaare ku tiriyey)* oo weliba xataa wuu ka hadlay xaaladda markuu waraaqdan qorayey haysatay isaga waayo, wuxuu yidhi, *'Runtii anigu 'Wax kasta ayaan khasaare ku tirinayaa wanaagga aqoonta aan aqaan Rabbigayga Ciise Masiix aawadiis, kaas oo aan*





*aawadiis wax kasta ugu khasaaray, oo haatan waxaan ku tirinayaa inay yihiin qushaash inaan Masiix faa'iido ahaan u helo'* (Filiboy 3:8). Filiboy 2:7 waxaan ka akhrinayna sida uu Ciise **iisu hoseysiyey.** Ma ahayn inuu Aabbaha isaga hoseysiyey. Isaga ayaa is hoseysiyey. Xagga noolosha Masiixinimada maraha qaarkood waa inaan ogolaano inuu Ilaah waxyaalaha qaarkood ee aan noolosheena ka qiimaynayno uu naga qaado. 'Rabbiyow tani haddii ay doonistaada ahayn iga duw' ayey noqon karta ducadeena. Laakiin marxaladda ka taagnayd Bilawgii 22aad ma ahayn arin sahlan uu Ibraahim diyaar u ahaa inuu ogolaado wax alla wuxuu Ilaah isaga ku samayn doono (*Rabbiga ayaa iga qaatay…ha barakoobo magaca Rabbiga').* Isaga naftiisa ayaa diyaar u ahaa 'in laga qaado wuxuu qiimaynayey'! Ilaah ayaa isaga ku hogaamiyey tan. Dhinac kale haddii laga eegi lahaa oo odhan kari lahaa doorasho ma aanan lahayn oo aan ka ahayn inaan gacan siiyo wixii laygu amray, saa ay tahayna wuu lahaa doorasho ama wax kaloo uu ku dhaqaaqi lahaa.

Addeecista Ibraahim waxay ahayd mid qalbigiisa ka soo go'day, ma ahayn addeecis lagu qasbay. Waxay ahayd inuu u safro meeshii waaqdhaca lagu bixin lahaa, waxay ahayd inuu buurta fuulo, waxayna ahayd inuu wiilkiisa madiga ah uu gacmaha ka xiro oo uu mawlaca ku kor seexiyo, waxay ahayd inuu mindida gacantiisa ku qaado. Ciise wuxuu yidhi, *'hadduu qof doonaya inuu I soo raaco, ha iska*

*inkiro waxyaalaha uu jacaylyahay oo iskutallaabtiisa ha soo qaato…'* Ciise wuxuu u baahan yahay kuwa **iskooda** wax u go'aansada. Ciise wuu nagu qasbi kara waxyaalaha qaarkood – maraha qaarna wuu na qasba. Laakiin markaan iskeena go'aansanayno oo aan annaga nafteena dulqaad xilka iskiiga sarayno waxyaalaha adadag ee aan noolosha kala kulanno, haddii ay tan dhacdana waxaan noqonayna kuwa heer sare ka gaaray addeecista. Waa run oo sheyga aan halkan kaga hadlayno waa shey uu Ilaah naftiisa nala rabbo naguna hogaaminaya. Ma ahan inaan waaqdhac nacasnimo iyo ciyar ciyar ay ku jirto aan ku muujino heerka addeecisteena. Waa in Ilaah naftiisa nagu hogaamiyo waxyaalahan, waana inaan xaqiiqsano waxyaalaha ay doonista Ilaah ku jirto yaanan ku soconin doonisteena ama waxyaalaha aan isla rabno inaan yeelno.

**Tijaabintii uu Ilaah Ibraahim tijaabiyey waxay timid mar uu Ibraahim diyaar ahaa.** Waxaan la yaabanahay inuu Ibraahim tijaabadan ku guulaysan lahaa haddii ay u imaan lahayd waaya hore uu heer kale ka joogay xiriirka uu la leeyahay Ilaah. Waan ka shakisanahay inuu guusha uu maanta gaaray gaari lahaa haddii ay tijaabadan imaan lahayd mar uusan diyaar u ahayn wax kastoo xagga Ilaah uga imaan doono. Ugu yaraan waxaa la soo dhaafay soddon iyo shan sanno (35) muddada uu Ibraahim Haran ka maqan yahay. Dhacdada Bilawgii 12:4 iyo Bilawgii 17:1 waxaa u dhaxeysey mudda dhan



*Wacdinta Erayga Ilaah ku salaysan: Bilawgii 12-23*

labaatan iyo afar sano iyo weliba hal sano oo dheraad ah inta uusan Isxaaq dhallanin. Hadda Isxaaq waa tobban jir ama ka badan. Ibraahim wuxuu ballamada Ilaah aaminsanaa uu sugayey ugu yaraan mudda dhan 35 sano. Waxaan odhan karnaa hadduu Ilaah nagu dhihi lahaa wax erayadan u eg 'ii gawrac wiilkaaga, anigu ma aanan samayn lahayn'. Waxaa dhici kartaa in hadduu Ibraahim ku jiri lahaa aasaaska iimaankiisana uu odhan lahaa isla sida aan maanta ku fikirayno. Ilaah tijaabadan ma gelinin Ibraahim ilaa uu ka ogaaday inuu xagga iimaanka ka bislaaday diyaarna u yahay wax alla wuxuu Ilaah ku amri doono isaga. Waan ka fikiri karnaa waxyaalaha aan qiimayno oo aan doonaynin inaan xoorno oo aan bedelkeeda u adeegno Ilaah, laakiin waa inaan iska ilaalino inaanan waxyaalahan fasiraad qaldan ka bixinin. Tijaabada Ilaah waxay noo imanaysa markaan diyaar u nahay. Markay marxaladaha tijaabinta dhacayaanna macaawinaya Ilaah way nala jirta, waxaanna fahmi karnaa in markii wakhtiga habboon ee Ilaah la gaaro ay nimcadiisa ka weyntahay wax kastoo aan ka fikiri karno. Waxaan fahmayna in si kastoo ay ahaataba aan ku guulaysanayno tijaabada si kastoo ay ahaataba.

**Markuu Ibraahim addeecistiisa heerkan ka gaaray waxaa loogu abaalguday axdiga wata dhaarta Ilaah.** Heerka ugu sareyey ee axdiga ayaa la gaaray. Qayb ka tirsan xiriirka uu Ilaah la lahaa ayaa qiima kaga kordhisantay heerkan la gaaray.

Ilaah wuxuu yidhi, *'hadda waan garanayaa inaad Ilaah ka cabsatid'.* Luuqadda halkan looga hadlaya waa luuqad baniaadmi. Ilaah wuu yaqaana wax kasta! Laakiin waa hab lagu muujinaya in xiriirkii uu Ibraahim Ilaah la lahaa inuu barbaaray ama uusan joogin heerka uu joogay markii ugu horeysay uu Ibraahim Ilaah aaminayey. Wuxuu addeecistiisa ka gaaray heer sare; wuxuu ku guulaystay tijaabo sare. Heerkan markii la gaaray ayuu Ilaah dhaartay. Waa maxay macnaheeda dhaarta uu Ilaah dhaartay? Erayada *'waxyaalahan kaddib'* Bilawgii 22:1aad waxay na fahansinaysa inay marxalad qaas ah ka dhaceyso noolosha Ibraahim. Waa wixii uu Yacquub ugu yeedhay *'xaq ku noqoshada shuqulada'. 'Miyuusan Ibraahim xaq ku noqonin shuqul* ***markuu sadaqa u bixiyey wiilkiisa Isxaaq****?'* (Yacquub 2:21). Goormey ahayd taasi? Soddon iyo shan sano kaddib *'markuu xaqnima ku helay iimaankiisa!'* Dhacdadan nooma sheegeyso inuu Ibraahim 'badbaaday'; waa xaalad uu heer sare kaga gudbay xiriirka uu Ilaah la lahaa kaa uu Ilaah naftiisa Ibraahim u caddeynaya Inuu ku farxay iimaanka Ibraahim. '*Hadda waan garanayaa inaad Ilaah ka cabsatid'* ayuu yidhi Ilaah (22:12). Waxaa jirtay dhacdo gaar ah uu Ibraahim nooloshiisa kala kulmay wax cuseb oo aan horay nooloshiisa ugu dhicin. Waxayna ahayd waayaaragga uu u helay dhaarta Ilaah.

Habka ugu habboon ee lagu fahmi karo dhaarta Ilaah waa iyadoo lays weydiyo su'aasha ah 'Ilaah



*Wacdinta Erayga Ilaah ku salaysan: Bilawgii 12-23*

miyuu niyaddiisa bedeli kara?' Miyey dhici karta inuu Ilaah niyaddiisa bedelo oo uu ka noqdo ballan uu horay u qaaday? Miyuu ka noqon kara hanjabaad uu horay ugu dhawaaqay? Jawaabta waxay tahay in mararka abadan loo arko inuu Ilaah yahay 'ku Niyaddiisa bedela'. Waxaa dhici karta inuu muqaalkan yahay 'habka lagu hadlo', haddii ay saa tahayna 'waa habka lagu hadlo' midda ay tahay inaan ogolaano inaan istecmaalno. Bilawgii 22:16 waxay noo caddaynaysa in dhabtii uu Ibraahim helay ballanta. Heerkanna waa laga gaaray heerka ugu sareeyey ee ballanta lagu oofin lahaa. Ballanta waxaa lagu helay hab aan lagu lumin karin. Heerkan ka horese way dhici kartay inuu Ibraahim ballanta ka talabaxo (isla sida uu Saulos uga talabaxay arinta boqornimada). Dhaarta Ilaah kaddib suurtagal ma ahan inay ballanta lunto (isla sida ballanta Daa'uud ay noqotay mid aanan la bedeli karin markii la gaaray 2 Samu'eel 7). Ibraahim wuxuu galay 'nasashada Ilaah'. Ballanta waa la 'lahaaday' (Cibraaniyada 6:22). Wixii ka dambeeyey dhacdadan dhaarta waxaa rumoobay inuu Ciise ahaan doono midhta Ibraahim.

***Cutubka 33aad***

# Gelidda nasashada Ilaah

(Bilawgii 22:1-19)

Aan dabagal dheraad ah ku sameyno arintan 'dhaarta Ilaah'.

**1. Marxaladdii ay Israa'iliinta lamadegaanka ku jireen waxay ahayd dhaarta inkaarta Ilaah.** Ilaah wuxuu ballanqaaday inuu Israa'iil siin doono dhulka uu ka ballanqaaday, laakiin way dideen inay rumaystaan, oo marar badan ayey Ilaah ku caasiyeen. Ugu dambeysta Ilaah wuu dhaartay. Tirintii cutubka 14aad waxay mar labaad ku ganuunaceen rumaysaddarradooda, waxay rumaysan wayeen inuu Ilaah iyaga siin doono dhulka uu ka ballanqaaday. Muuse ayaa iyaga wakiil u noqday oo duca deeqsi leh u duceeyey (Tirintii 14:13-19). Ilaah wuxuu ku dhaartay inuu reer binu Israa'iil uu siin doono dhulka (Tirintii 14:16). Ilaah ayaa jawaab bixiyey. Wuu u **cafiyi** doonaa iimaan la'aantooda (Tirintii 14:20), laakiin wuxuu ku dhaaran doonaa inaynan **farcankaas** geli doonin Kancaan. **Farcankaas** waa laga celiyey natiijada ballanta horey loo siiyey. Ilaah wuu 'bedelay niyaddiisa' oo wuxuu horaan farcankaas ugu tallagalay ma noqon doonto. Ilaah wuu dhaartay (Tirintii 14:21-23), wuxuu ku dhaartay inuusan farcankaas geli doonin Kancaan. Dhaar ka bacdi ma jirto wax isbedel ah oo la samayn karo. Israa'iil waxay **hadda** toobadkeento si ay ku gasho





Kancaan (Tirintii 14:40) laakiin waa mar ay dhiil iyo findhiil kala dhaceen. Mar ay wax isku toosin lahayeen ayaa jirtay (shaley) laakiin hadda ama manta ma ahan. Dhaarta waa bartamaha ay arinta gobaabinteeda ku garayso; dhaarta dabadeed wax isbedel ah oo arinta lagu dhaartay laga qaban karo ma jirto.

**2. Marxalladdii Saulos waxay ahayd mid loogu dhaartay inay nacaladda Ilaah ku dhaceyso.** Ilaah wuu ka noqon kara ballan. Ilaah wuxuu Saulos u doortay inuu ahaado boqorka Israa'iil. Waxay ahayd inuu farcankiisa noqdo mid ebedan jira sida ku dhigan (1 Samu'eel 13:14 laakiin waxaa la gaaray heer uu Saulos caasinima daran Ilaah ku sameeyey taa oo sababtay inuu Ilaah 'niyaddiisa bedelo' oo wuu diiday inuu Saulos noqdo boqor sida uu horey uga ballan qaaday (1 Samu'eel 15:26). Waa dhacdadan ka bacdi marka aan arkayno xaaladda lagu yidhi 'Isagu baniaadmi ma ahan oo niyaddiisa ma bedelo sida ay ugu dhigantahay 1 Samu'eel 15:29. Dhaarta waa heer marxalad lagu gebagebaynaya; dhaar dabadeedna wax isbedel ah oo marxalladdaas lagu samayn karo ma jirto.

**3. Arinta Nineweh waxay ahayd dhacda ay dhaar gelin.** Yuunis wuxuu umadda Nineweh u sheegay in afartan maalmood gudahooda uu Ilaah magaalada baabi'in doono (Yoonis 3:4). Saa ay tahayna boqorkii Nineweh wuxuu yidhi *'Bal yaa og*

*in Ilaah ka noqon doono oo cadhadiisa kulul ka jeesan doono iyo in kale, si aynaan u haligmin?* Boqorka wuu ku saxsanaa fikiraddiisa! Ilaah wuu ka noqday waxyaalaha masiibada ahaa oo uu doonayey inuu ku baabi'iyo oo uu horay u sheegay inuu ku soo dejin doono Nineweh sida ku dhigan Yoonis 3:10aad. Inta aanan wax dhaar ah la gelin waa suurtagal inay marxalad isbedesho. Ballanna waa la gefi kara; hanjabaadna waa laga noqon kara.

**4. Arinta ku saabsanayd wadaadkii sare ee farcanka Melkizedeq waxay ahayd mid lagu dhaartay naxariista deeqsi lagu bixin doono.** Waraaqda Cibraaniinta loo diray waxay tilmaamaysa in wadaaddada reer Laawi ay wadaaddo ku noqdeen dhaar la'aan sida aan uga akhrinayno Cibraaniyada 7:21. Ilaah wuu ka ceshan kara iyaga hadiyadda wadaadnimada maxaa yeelay, Ilaah kuma uusan dhaaranin inay wadaadnimadaas haysan doonaan weligood. Laakiin markaan eegno xagga kuwa wadaaddada ku noqdeen farcanka Melkizedeq waxay hadiyaddaas ku haysteen deeqsiga Ilaah maxaa yeelay, Ilaah ayaa iyaga ugu dhaartay. Rabbigga wuu dhaartay weligiisna niyaddiisa ma bedeli doono sida aan uga akhrinaynaba Cibraaniyada 7:21; Sabuurrada 110:4. Sababta uu Ilaah u baabi'inaya shaqada wadaadnimada reer Laawi ee uusan u baabi'inaynin shaqada wadaadnimada Ciise waxay tahay tan Ciise Ilaah wuu ku dhaartay inay jiri doontose tan kale kuma uusan dhaaranin.





Haddan waxaan fahmayna inay dhaarta tahay xalka kama dambaysta ah oo arin lagu xiri karo; dhaarta ka bacdi wax isbedel ah haba yaraatee oo la samayn karo ma jirto. Qofka Masiixiga ah wuxuu axdi kula jira Ilaah. Waxaa jira xiriir uu Ilaah Aabbaheena yahay annaguna aan nahay carruurtiisa. Axdiga waa ballan ay dhaar ku lifaaqantahay. Durbaba isla marka aan Badbaadada Ilaah aqbalayno waxaan noqonayna carruurta Ilaah laakiin axdiyada Ilaah oo dhaarta ku xiran si dhaqso ah kuma heleyno. Axdiga Ilaah waa deeqsi uu Ilaah nagu deeqaya naxariistiisa (wayna kala duwan yihiin). Ma haws joogno sharciga Muuse kaa oo ka duwan axdiga Ilaah kuna lifaaqan axdiya kala duwan. Kama dambaysta axdiga waa markuu Ilaah dhaarto oo uu qofka Masiixiga ah gelaya 'nasashada Ilaah'. Markay heerkaas gaartana qofka masiixiga ah axdiyada oo dhan wuxuu u xil saaray Ilaah. Si kama dambays ah ayuu Ilaah u oofinaya hawl kasta uu Ilaah doonaya inuu qofka Masiixiga ah qabto.

Hawsha uu qofka si buuxda Ilaah iisu dhiibay u sameynaya Ilaah weligeed ma halaabayso. Waa xaqiiq inay ballamada qofka masiixiga laga qaaday oo dhan la oofin doono. Aad ayey tan qalbiyadeena nasasho u siinaysa. Ilaah wuxuu nagu deeqsinaya barakooyinkiisa nasashada leh. Haddii xagga Masixiinta loo kaco axdiga tallaaba dheraad ah ayuu qaadaya waayo, wuxuu ku salaysan yahay waaqdhac. Qofka Masiixiga ah wuxuu si joogta ah

ugu noolyahay dhiigga Ciise kaa oo isaga siinaya badbaadada weligeed ah maxaa yeelay, sida aan Cibraaniyada 9:12 uga akhrinayno waxaa muuqata in rumaysashada aan Ciise rumaysanayno aan ku heleyno badbaado weligeed ah. Dhiigga Ciise waxaan ku noqonayna nadiif xaga qalbiyadeena sida aan iyaduna uga akhrinayno Cibraaniyada 9:14, waxayna suurtagal ka dhigaysa inaan helno hadiyadda Ilaah na siinaya, dhaarta Ilaah sida ku dhigan Cibraaniyada 9:15. Wakhtiyada looga hadlaya Cibraaniyada 9:12, 14 iyo 15 waa muhim. Badbaadada **waa la helay**; nadiifinta qalbigase waa mid aan **maalin waliba heleyno**; dhaxalkana **waa suurtagal** in wakhtigiisa la gaadho.

Axdiga deeqsinimada waa mid aan sharuud lahayn marba haddii la bixiyo. Dhaarta waxay timaddaa kaddib markuu qofka lahaado iimaan sugan iyo dulqaad, laga yaaba sanada badan markuu qofka badbaadada helay kaddib. Markuu Ilaah naxariistiisa noogu dhaaranaya, ballantiisi ahayd inaan helno hadiyadda shuqulka fiican uu noo caleema saaray oo ah inaan ku dhaqanno waanu heleyna oo lama rogi karo inaba. Axdiga waxaa loogutalagalay inuu nagu booriyo inaan safarka aan bilawnay aan wadno oo weliba inaan dhiirinaano. Ilaah wuxuu noogu dhaaranaya inuu barakooyinkiisa nagu deeqaya, wuxuuna nagu casumaya inaan ku adkaysano addeecisteena ilaa aan ka dhaxalno axdigaasi. Masixiinta oo dhan waa carruurta Ibraahim. Waxaan raacsannahay raadka





aabbaheena. Annaguba axdi ayaa kula jirnaa Ilaah. Ilaah wuxuu doonaya inuu annaguna wax nagula hadlo ‘*hadda waan hubaa inaad inaad iga cabsanaysid’* ayuu nagu leeyahay Ilaah oo wuu nagu soo dejin doona barakooyinkiisa deeqsiga leh kuwa oo aan ku geli doonno nasashada Ilaah oo waxaan dhaxli doonnaa ballamada Ilaah.

**Waayaaragga dhaarta Ilaah waxay ka mid tahay maragfurka tooska ah ee aan Ilaah ka heleyno,** ama (sida uu Axdiga cuseb leeyahayba) waa Ruuxa Qoduuska ah oo toos nooga maragfuraya. Ilaah **iskuma** odhanin, ‘hadda waan ogahay inuu Ibraahim iga cabsanaya’ (saa ma ahan haddii aan eegno Bilawgii 22:12). Wuxuu Ibraahim **ku yidhi** ‘hadda waan ogahay inaad iga cabsanaysid sida ku dhigan Bilawgii 22:12. Ilaah wuxuu na siya fursad aan ku ogaano doonistiisa. Wuxuu na siinaya hadiyadda Ruuxiisa Qoduuska ah. Wuxuu qalbiyadeena ku beeraya hawsha uu doonaya inuu nagu adeegsado. Iimaan iyo dulqaad, sida ay Ibraahimba u ahayd, waa inaan doonista Ilaah dabadhigana. Maalinta noolosheena ugu muhimsan waa markaan dhaxalno wuxuu doonaya inuu noo qabto uu nagu fulin doono. Markuu leeyahay waxaan ku dhaaranaya inaan ku barakadayn doono, waxaan geleynaa nasashadiisa.

***Cutubka 34aad***

# Nasasho mise Hawlgab?

(Bilawgii 22:1-24)

Haddii dhab ahaan looga eego Bilawgii cutubka 22aad waxaan fahmayna inaan dhabtii halkan iimaanka Ibraahim lagu tijaabinaynin. Ibraahim horay ayuu u muujiyey iimaankiisa sugan xataa intaanan lagu amrin inuu wiilkiisa waaqdhac u bixiyo ka hore. Rooma 4:18 waxaa qoran sida tan, *'Ibraahim rajuu wax ku rumaystay iyadoo aan rajo jirin inuu aabbe u noqdo quruumo badan, sida waxyaalihii lagula hadlay leeyihiin, Farcankaagu sidaasuu noqon doonaa'.* Xaalad kastaba cadaw bay ku ahayd Ibraahim. Saa ay tahayna shaki uguma jirin inuu wiilka laga ballaqaaday imaan doono uuna Ibraahim ahaan doono aabbaha quruumaha. Iimaanka Ibraahim wuxuu ahaa mid dhab ah oo sugan. Waxa keliya ee la tijaabinayey waxay ahayd muddada uu ku adkaysan doono ku dhaqashada iimaanka, iyo sida uu uga faa'idi doono iimaankaasi uguna addeeci lahaa Ilaah.

Tijaabadan waxay timid uun kaddib markuu Ibraahim barakooyin badan helay, *'waxyaalahaas ka dib'* ayey leedahay 22:1aad. Ibraahim mar dhaw unbuu helay boorinta lagu boorinaya inuusan ka niyad jebin wuxuu rumaystay taa oo ah dhaxalka uu dhaxli doono dhulka uu heli doono markay tijaabada ugu weyneyd u timid. Yaanan la yaabin





haddii ay tijaabadeena ugu weyn imaato ka dib markaan Ilaah ka helnay barakooyin waweyn. Tijaabadan ayaa Isaga ka dhigtay mid uu xataa ku rumaysto inuu Ilaah awoodo inuu Isxaaq dhimashada ka soo sara kiciyo (eeg Cibraaniyada 11:19). Ilaah wuxuu horey u sheegay inuu farcanka Isxaaq yahay kan uu farcanka Ibraahim ku waari doono, hase ahaatee, waxaan arkayna Ilaah oo amraya inuu Ibraahim gawraco wiilkaasi. Qof kasta wuu ku fahmi kara wuxuu Ibraahim ku fikirayey markay tijaabadan ugu weynayd timaaday: 'Sidee buu farcankayga u ahaan doonaa mid waara hadduu Ilaah igu amraya inaan gawraco wiilkayga keliya ee uu farcankayga ku waari lahaa?' Sidee buu Ilaah u ahaan kara mid ballan xajiya hadduu igula talinaya inaan gawraco Isxaaq?

Wuxuu gaadhay gebagebada ugu dambaysay oo ahayd inuu u malayey inay tani suurtagal ku ahaanayso hal hab oo keliya. Habkaasi keliya uu Ibraahim ku fikirayna waa marxaladda aan ka akhrinayno Cibraaniyada 11:19. Waa uun isla sida uu Ibraahim tijabooyin adadag u maraya sida keliya uu iimaankiisa ku sugnaanaya kuna weynaanaya iimaankiisa. Madaama uu jeclaa inuu Ilaah addeeco waxay ahayd inay addeecistiisa ay iimaankiisa isbedel u keento taa oo isaga ka dhigtay mid uu xataa ku rumaysto inuu sara kaca suurtagal yahay. Waa sababtaas daraaddeed tan aan Bilawgii 22:5aad uga arkayno inuu Ibraahim leeyahay *'waannu idinku soo noqonaynaa'*. Wuxuu rajaynayey inuu

Isxaaq dib ula soo noqon doono. Wuxuu rajaynayey markuu ka dib markuu wiilkiisa gawraco ka dib inuu Ilaah ka soo sara kicin doono Isxaaq dhimashada. Ibraahim wuxuu aaminsanaa sara kaca.

Iimaanka Ibraahim hab kaluu ku balaartay. Axdiga cuseb wuxuu sheegaya inuu Ibraahim Ciise arkay maalmihiisa (Yooxanaa 8:56). Wax buu ka yara arkay imaatanka Ciise. Goormay arintani dhacday oo sidee bayna ku dhacday? Runtii halkan ayey ku dhacday oo meel kale oo aan faahfaahin dheeraad ah sida tan ma jirto.

Ibraahim wiilkiisuu waday oo ma uusan doonaynin inuu Ilaah ka lexejecleysto wiilkiisa laakiin wuxuu doonayey inuu waaqdhac u bixiyo. Wuxuu doonayey inuu sameeyo ficilka gawraca wiilkiisa laakiin durbaba Ilaah baa xal keenay! Wan ayaa dhintay bedelkii ay kuwa eedeysnaa dhiman lahayeen. Waaqdhaca bedelka ah uu Ilaah bixiyey wuxuu ahaa mid loo bixiyey bedelkii qof kaloo dhiman lahaa. Intay marxalladdan dhacaysay Ibraahim si mugdi mugdi ah ayuu ku arkay natiijada dhacdadan oo uu Ilaah samayn dooni. Wuxuu waayaarag u leeyahay marxalad uusan lexejeclaysanin wiilkiisa oo keliya. Ilaah ayaa Ibraahim siiyey waaqdhaca bedelka ahayd uu wiilkiisa ku badbaadiyey, laakiin maalin ayaa imaan doonta uu Ilaah wiilkiisa madiga ah u bixin doono sida wanka waaqdhaca.  Ibraahim wuxuu arkay waxyaalaha muhimka ah oo ay ka dhisan tahay





marxaladda dhimashada iyo sara kaca wiilka Ilaah markuu arkay dhimashada Ciise oo soo dhaw, oo uu kaga wiilkiisa Isxaaq badbaadiyey dhimashada.

Hadduu Ilaah ku tijaabiyo oo aad ku guulaysato tijaabada si dheraad ah ayaad u sugaysa xiriirka aad la leedahay Ilaah. Waxyaala badan oo oo dheraad ah ayaad ka fahmaysa Ilaah. Doonista Rabbiga ayaad fahmaysa oo waxaad fahmaysa oo kale sida uu kuugu naxariisanaya garabkaagana u taagan yahay markaad dhibaysan tahay. Intaa ka sokow waxaad fahmaysa inuu Ciise yahay kan kuu dhintay. Ugu dambaysta Ilaah wuxuu sii balaariyey ballantii oo wuxuu gaarsiyey heer aanay weligeed gaarnin. Wuxuu haddana soo geliyey ballanta ku saabsan taranka uu tarmi doono Ibraahim. Waxaa la sheegay inay midhtiisa u badnaan doonto sida xiddigaha cirka ku yaala ama sida carrada xeebta badda.

Ugu dambaysti ballanti waxay noqotay wax la huba oo kuma aanay noqonin oo keliya rumaysadka Ibraahimse waxaa kale oo ay ku fushay addeecista uu Ibraahim Ilaah addeecay, madaama uu codka Ilaah addeecayna wuu dhaxlay ballamadii Ilaah horay u ballamiyey inuu heli doono. Sidaa daraaddeed Ibraahim wuu galay nasashada Ilaah saa ay tahayna weli waxaa jiraa tallabooyin kale oo ay waajib tahay in la qaado si uu rumaysadka u kaamilmo. Gelidda nasashada Ilaah ma ahan dhamaadka shaqada aan noolosheena ka qaban

lahayn. Waxaa jiraan waxyaala badan oo Ibraahim suganayaan inuu ku dhaqmo!

Ibraahim hadda wuu gaboobay. Miyey tahay xili uu ka hawlgabo noolosha rumaysadka? Wuu dhamaystiray hawsha ugu weynayd oo nooloshiisa looga baahnaa. Heerkan la joogo Ibraahim waxaa lagu tijaabiyey inuu ka noqdo gelidda uu geli lahaa Kancaan. Ibraahim kama sara marin heer lagu tijaabiyo heerkan uu gaarayna waxay u muuqataa inuu yara fahmay inay suurtagal tahay inuu dambco inuu ku noqdo Haran. Sanado badan ayuusan arkin reerkiisa iyo ehelkiisa laakiin qof baa u yimid oo u keenay war eheladiisa ku saabsan waxaana loo sheegay inay eheladdiisa geeska Mesabotamiya degani ay noolol barwaaqa sooran ah ku noolyihiin (22:20-24). Waxaa jireen kuwa ehehladiisa ah oo ku noolaa Haran uusan weligiis isha saarin. Farintan waxay u noqonaysa mid uu saldhig uga dhigi doono waxyaalaha dambe uu ku dhaqaaqi doono – Rebeqada aan ka akhrinayno Bilawgii 22:23 ayaa noqotay xaaska wiilkiisa – laakiin waxay u badan tahay inay ahayd arin jarrabaad ahaan ugu timid. Wax dhul ah kuma uusan lahayn Kancaan wuuna gaboobay. Ballantii midhtana waa la oofiyey. Wuxuu ogaa in heerka ay arinta gaadhay ay tahay mid aanan dib looga noqon karin ballanta la oofiyey ama aanan la rogi karin .

Qoraaga buugan wuxuu yidhi, “aayadahan ay dadka inta badan qaymaynaynin aniga aad bay wax ii





tareen shaqsi ahaantayda. Waxaan ku dhashay Ingiriiska laakiin noolosheyda inta badan waxaan ku noolaa Afrika. Sanada la soo dhaafay waxaa layga codsaday inaan wadaad ka noqdo Kiniisad ku taala Ingiriiska. Waxay ahayd Kiniisad aad u weyn oo ku deyasho leh laakiin waxaan arkay inay jarrabaad ii ahayd aniga fursaddaas. Aayad Baybalka ku jirta ayaa igu waanisay inaanan ka noqonin wuxuu Ilaah iigu yeedhay inaan sameeyo.

Maalmahaas waxaan ka shaqaynayey buuga Bilawgii waxaanna joogay Bilawgii 22:20-24. Qaybtan ila ma ahayn mid qalbigayga taabatayse waxaan akhriyey Cibraaniyada 11:15 oo leh sida tan, *‘Oo hadday xusuusnaayeen waddankii ay ka baxeen way heli lahaayeen wakhti ay ku noqdaan’!* Waxaan ogaaday inay taasi ahayd codka Ilaah oo ila hadlayey, codsigii laygaga rabbay Kiniisadda Ingiriiskana waxaan ku jawaabay ‘MAYA’. Ilaa maanta waxaan jogaa Afrika”. Waxay ahayd wakhti ay Ibraahim nolloshiisa ka joogtay heer uu ka fekero dhulkii uu ka soo baxay, wuuna haystay fursad uu dhulkaas ku noqdo! Xiriir buu la lahaa eheladiisa laakiin kuma uusan noqonin Kancaan. Mustaqbalka Ibraahim wuxuu ku jiray Kancaan ee ma ahan Mesobotamiya.

***Cutubka 35aad***

# Sharaf Daa'imi ah

(Bilawgii 23:1-20)

Ibraahim waxaa u hartay duri kale oo aad muhim u ah nooloshiisa. Wuxuu galay nasashada noolosha waana xaqiiq inuu helaya guusha hawsha uu nooloshiisa ku qabtay. Hadda waa inuu ku dadaalo dhaxalka waxyaalaha laga dhaxlaya shisheda qabriga. Sheyga ugu muhimsan uu rumaystaha Ilaah toos u addeeca rajaynaya waa waxyaalaha aan dhaxlayno noolosha adduunka ka bacdi, taa oo aan ka dhaxli doonno 'adduunka imaan doona'. Waa run Ilaah wuxuu adduunkan nagu siinaya barakooyin badan wuuna nagu xanaanaynaya inta aan adduunkan ku noolnahay. Laakiin waxyaalaha aan adduunka ku haysano waa uun deeqsi siyaado ah oo noogula kordhinaya waxyaalaha sare ee uu Ilaah noogu tallagay inaan ka dhaxalno adduunka dambe. Masixiintana waxay rajaynayan oo ay isha ku hayan waxyaalaha ay heli doonaan adduunkan ka dib.

Ilaah wuxuu Ibraahim siiyey ballama ku saabsan dhul. Waxay ahayd inuu aado 'dhulka' uu Ilaah tusi doono isaga. *'dhulkan oo dhan adaan ku siin doonaa'*, marar badan ayuu Ilaah erayadan ku yidhi Ibraahim. Laakiin heerkan hadda la joogo Ibraahim





aad buu u gaboobay. Durbaba nooloshiisa way dhamaan doontaa isagoo aan helin wax dhul ah.

Fikiraddan waxay aad Ibraahim ugu dhallatay markay Saarah dhimatay. Waxay ku dhimatay Xebron agteeda (23:1, 2) taa oo ah meel ka mid ah meelaha uu Ibraahim horay ugu noolaa. Isaga iyo Saarah in mudda ah ayey hoy ku lahayeen meeshaasi ay ku dhimatay. Ibraahim wax dhul ah uu lahaa ma jirin. Ballantii marar badan lagu soo celcelinayey inaba uma aanay oofin Ibraahim sida ay ballanta ahayd. Axdiga cuseb Bawlos wuxuu uga hadlaya ballamada uu Ibraahim ka dhaxli lahaa adduunka (Rooma 4:13). Ilaah kama uusan hadlaynin oo keliya qayb ku kooban Kancaan markuu ballamdan siinayey Ibraahim. Wakhtigaas dabadiis, quruuntii Israa'iil dhabtii way heshay dhulkaas Ibraahim laga ballanqaaday. Laakiin Kancaan waxay ahayd oo keliya qayb aad u yar uu Ilaah doonayey inuu siiyo Ibraahim. Sida aan uga akhrinayno Cibraaniyada 11:8 Ibraahim dhulkii laga ballanqaaday ayuu mudda dheer qariib ku ahaa oo wax hanti joogta ah uu ku lahaadayna ma jirin. Ibraahim wuxuu rajaynayey dhul ay tilmaantiisa tahay tan aan ka akhrinayno Cibraaniyada 11:10 oo leh sida tan, *'Waayo wuxuu filanayay magaalo aasaas leh oo kan dhisay oo sameeyey uu Ilaah yahay.'* Dhulka uu Ibraahim rajaynayey ma ahayn mid ka koobnaa adduunkan. Kancaan waxay ahayd uun asturka tallaabada ugu horeysa ee dhulka rasmiga ah lagu heli lahaa, Ibraahimna ma jirin

qayb haba yaratee uu ka helayey Kancaan. Dhulka dhabta ah oo isaga laga ballanqaaday waxay ahayd adduunka oo dhan. Midhta Ibraahim ayey ahayd inay dhaxlaan dhulka. Waxaa jiri doonaan sama cuseb iyo dhul cuseb oo ay qoduusiinta dhex dabaalan doonaan. Rajada kama dambaysta ah ee ay Masixiinta rajaynayaan waa dhul sharaf leh, waana markay ay Masixiinta heli doonaan jidh cuseb oo ay ku noolaan doonaan dhul sharaf leh. Rajadaas kama dambaysta ah waa janna ku aali doonto dhulka.

Markay Saarah dhimanaysay Ibraahim xataa qayb yar kama uusan lahayn dhulka Kancaan oo wuxuu waayay xataa meel uu jidkeeda ku aaso. Waxaa qasab ku noqotay inuu u tago kuwa reer Kancaan si uu u codsado dhul uu ku aaso iyaga. Hase ahaatee, ballanta waxay ahayd inuu helo dhul dhab ah uu dhulkiisa ugu yeedho.

Inta badan Masixiinta waxay ku dhaqmaan sida iyadoo nimcada Masiixinimada loo siiyey inay u ahaato xaqiiqad ay kaga baxsanayaan caasinimada naarta lagu gelaya si ay u hubsadaan inay adduunka ku nooladaan noolol wanaagsan. Laakiin fikiraddan aad bay u qaldan tahay waayo, sababta uu Ilaah noogu deeqay badbaadada ma ahayn habkan ay Masixiinta u malaynayaan. Yaanan u dhaqmin si iyadoo barakada uu Ilaah na siinaya ay tahay mid ku eg adduunkan dhamaanaya. Butros wuxuu yidhi, *‘Gacaliyayaalow, ha la yaabina jirrabaadda dabka ah oo idinku dhex dhacday in laydiin tijaabiyo sida*





*iyadoo ay idinku dhaceen wax la yaab lihi’* (1 Butros 4:12). Ciise wuxuu yidhi, *‘Waxyaalahaas waxaan idinkula hadlay inaad nabad igu haysataan. Dunida ayaad dhib kala kulantaan, laakiinse kalsoonaada, anaa ka adkaaday dunida e* (Yooxanaa 16:33). Waa inaanan rajaynin noolol sahlan. Waa inaan rajadeena u gudbina shisheda qabriga. Waxa aan rabno waa sama cuseb iyo dhul cuseb. Waxaan damacsanahay adduunka imaan doono, magaala saldhigga leh. Ibraahim wuxuu damacsanaa Kancaanta adduunkase Kancaanta uu Ilaah u diyaarinayey waxay ahayd mid ruuxiyan ah oo daa’iman ah qaybteeda dhabta ahaydna waxay ahayd in lagu helo adduun daa’iman ah oo ka dambeyo kan aan hadda ku noolnahay.

Ibraahim shaki uguma jirin inay ballanta Ilaah socon doonta xataa ka dib markuu isaga dhinto. Wuxuu doonaya inuu Saarah ku aaso Kancaan. Wuxuu u tegay reer Kancaan wuxuuna ka codsaday inay dhul ka iibiyaan (23:3-4). Kancaaniinta way ogoladeen inay Ibraahim dhulka uu rabo ka iibiyaan (23:5-6) laakiin Ibraahim weli kuma uusan qancin taasi. Wuxuu rabbay inuu ku iibsado hab sharciyan ah. Wuxuu dhulka ku iibsaday ‘iridda’ taa oo ahayd meel ay beecshara ka socotay (23:7-16). Wuxuu doonaya inuu dhulka uu iibsanaya hanti u ahaado reerkiisa. Wuu ogaa inay dan mustaqbalka ballanta Ilaah lagu oofinaya ay ku xirantahay wuxuu Ilaah ka samayn doono Kancaan. Sidaa daraaddeed wuxuu doonaya in Saarah halkaas lagu aaso oo ay

qaybtaasi dhulka ay ahaato mid ay lahaan doonaan reerkiisa. Qof kasta wuu ogaan doonaa qarniyada dambe ee imaan doona inuu Ibraahim aaminsanaa in maalin uun ay reerkiisa lahaan doonaan dhulkaas. Sidaa daraaddeedna dhulkii wuxuu noqday hantida Ibraahim (23:17-20), taasna waxay calaamad u tahay inuu Ibraahim aaminsanaa waxyaalaha uu Ilaah samayn doono xataa dhimashadiisa ka dib.

Adigu miyaad u nooshahay oo keliya adduunkan? Stareexa adduunka oo keliya miyaad u nooshahay? Lacag jacayl oo keliya miyaad u nooshahay? Hantida aad adduunka ku leedahay oo keliya miyaad u nooshahay? Sheyga ugu muhimsan ee ay nagu waajibka tahay inaan u noolaano waa rajada aan ka leenahay danta Ilaah ee ku jirta taarikhda midhta Ibraahim, Ciise. Dabadeedna waxaad noqonaysa mid dhaxla samada cuseb iyo dhulka cuseb oo ay kuwa xaqa ah dhex dabaalan doonaan. Noolosha adduunkan si dhaqsa ah ayey ku dhamaanaysa sidaa daraaddeed waa inaan u noolaano sida aan ku heli alahayn adduunkan imaan doona ee ma ahan inaan ku ekaanno adduunkan. Ibraahim inaba ka uusan cabsanaynin dhimashada.

Danta Ilaah way ka shishe maraysa noolosha shaqsiga. Laakiin ma beeli doonno hantideena dhulka. Waxaan heli doonna dhul cuseb oo shucaac ayaan kaga nuuri doonaa sharafta Ilaah ee ka jirta xagga adduunka cuseb ee uu Ilaah na siin doono.





Haddii aan dib ugu noqono taarikhda noolosha Ibraahim waxay muraayad u tahay noolosha Masixiinta. Waxay wax kasta ka bilaabanayaan noolol xaq laga dhigay. Sababta badbaadada naloo siiyey waa inaan Ilaah u agu adeegno badbaadada uu na siiyey oo weliba waxay tahay inaan dhaxal ku helno. Waxaan nahay kuwa ay wada shaqayn uga dhaxayso Masiixa. Sheekada noolosheena ku saabsan oo dhan waxay noqonaysa mid ay khilafaad iyo hormar labaduba ka soo gaadhi doonaan iimaankeena. Iimaanka ayaa ah hogaamiyaha dabiicadaha qofka Masiixiga ah. Iimaanka ayaa nagu hogaaminaya barakooyinka kale oo dhan. Iimaan iyo dulqaad ayaan ku dhaxlayna ballamada uu Ilaah nooga ballanqaaday noolosheena. Waxaan wax ku heleyna boqortooyadiisa gudaheeda. Inta aan ku noolnahay noolosha uu iimaanka hogaaminaya kulligeenba waxaan ku socona safarka aan ku xajin lahayn xiriirka aan Ilaah la leenahay. Ilaah wuxuu ku dhaartay inay midhta Ibraahim dhab ahaan doonto. Wuxuu ku dhaartay inuu wadaadkiisa oo ah mid farcanka Malkizedek raacsan uu si joogta ah barya deeqsi leh noo baryaya. Waxaan haysana Ciise oo ah tiirka qalbiyadeena. Isagaan ku xirannahay wuxuuna ku jira sharafta Ilaah.

Waxaan ku noolnahay dhaarta loo dhaartay Ibraahim. Midhta Ibraahim ma baaba’ayso. Laakiin waxaan u baahannahay inuu Ilaah qaas ahaan noo dhaarto. Waxaan nahay carruurta Ilaah sidaa daraaddeed waxaan doonayna inuu Ilaah noo

dhaarto isla sida uu ugu dhaartay Ibraahim. Haddii aan ku adkaysano waan heleyna waxaan Rabbiga ka sugayno. Ilaah wuxuu nagu odhan doonaa ‘hadda waan ogahay inaad iga cabsanaysaan aniga’. Noolosheena inta badan markaan jawaabtan helno ka dib waxay noqonaysa uun inaan goosano midhaha wixii aan qalbiyadeena ku beernay oo beeris dambe ma jiri doonto. Saa ay tahayna sharafta kama dambaysta ah kuma heleyno nooloshan. Kancaanteena, dhulkeena nagala ballanqaaday, halkan ayaan hadda ku haysana. Qayb weyn ayaan hadda ka haysana ballantaasi oo noolosheena waxaa ka butaacaya ‘caana iyo malab’. Saa ay tahayna waxyaalaha ugu sareeya ee wanaagsan weli lama gaarin. Waxaan hantideena ku asturanayna samada. Qayb kastoo halkan Kancaan kaga tirsan waxay uun noo tahay hor marin naloo hor mariyey qayb ka tirsan waxyaalaha aan adduunka dambe si buuxda ku heli doono. Durbaba sama yar ayaan adduunkan ku leenahay oo mar dhawna waxaan xagga sare ka heli doonnaa samada oo dhan. Mar dhaw ayaan u gudbi doonnaa qaybta xigta ee aan dhaxalkeena ku heli doono oo Isxaaqeen wuu guursan doonaa safarkan noolosha iimaanka wuu nagula jiri doonaa. Waan ku farxi doonaa inay saa noo noqoto, maxaa yeelay, waxaan ku farxi doonnaa magaalada saldhigyada leh, kaa uu dhisaheeda iyo hagajiyaheeda uu Ilaah yahay. Waxaan ku rayrayn doonnaa sharafta daa’imiga ah.